

# HAALGAN

Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyed



## ◦ SANADGUURADII 1<sup>aad</sup> EE X.H.K.S.

- qaabkii abaabulka dhismaha X.H.K.S. iyo urur-rada bulshada.
- waajibaddka deg degga ah ee X.H.K.S.
- macnaha erayada hidde iyo dhaqan.

U Halgan  
Waxbarasho  
Si Waxbarashadu  
Halgankaaga  
U Kordhiso



waxaa soo saara  
GOLAHA DHEXE EE  
XISBIGA H. K. S. BISHIIBA HAL MAR

### GUDDIGA QORAALKA

MAXAMED AADEN SHEEKH /Guddoomiye

ABUUKAR MAXAMED XUSEEN (Ikar)/ Xoghaye

### XUBNAHA GUDDIGA QORAALKA

Xuseen Maxamed Aadan

Saciid Cabdisalaam

Rashiid Shiikh Cabdulaahi

Yuusuf Suleymaan

### QIIMAH

Soomaaliya

Koobigiiba 2/= Shilin

Sanadkiiba 40/= shilin oo kharajka Boostada ku jiro

Dumida Carbeed iyo Afrikada Bari

40/= shilin sanadki oo kharajka boostadu

ku jiro.

Koonfur, bartamaha iyo Galbeed Afrika

\$17.00 sanadkiiba Kharajka boostadu ku ji-

ro.

Aasiya

\$20.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku

jiro

Yurub

\$25.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku

jiro

Ameerika (Waqooyi iyo koonfur)

\$30.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku

jiro.

# T U S M O

<b>I. DAYMADA WARGEYSKA</b>	<b>Bogga</b>
— Sannadguuradii 1aad ee XHKS.	2
— Jabuuti: Jamhuuriyad madax bannaan	4
— Sannadguuradii 17aad ee xornimada	6
— Halganka Eereteriya.	7
<b>II. NOLOSHA XISBIGA</b>	
— Qaabkii dhismaha XHKS	11
— Waajibaadka degdega ah ee XHKS	26
— Maalmo libineed	28
— Wafdi XHKS oo tababar u tegay Jekoslafaakiya	30
— Wafdi XHKS oo tababar u tegay Yugoslaafiya,	30
— Xuska dhalashadii Georgi Dimitrov	31
— «Taas» oo ka faalootay sannadguuradii 1aad ee XHKS	32
— Lisboon: hiilka gobannimadoonka.	33
— Wafdi XHKS oo ka qaybgalay kulan saaxiibtinnimo	34
— Bishii taageerada halganka dadka Kuuriya	35
<b>III. ARRIMAHA SIYAASADDA, DHAQAALAHAYO BULSHADA</b>	
— Isbeddel kacaaneedka waxbarashada Soomaaliyeed	36
— Dhibaatooyinka maalmahan	39
<b>IV. ARRIMAHA DUNIDA</b>	
— Nabad raadinta Bariga Dhexe	41
— Dalalka adduunka 3aad iyo xiriirka dhaqaale	44
<b>V. WARBIXINTA BISHA</b>	
— Sannadguuradii 6aad ee U.K.O.	46
— Jabuuti way xorowday	47
— Boocqashadii madaxweyne ku-xigeenka Ciraaq	49
— Sannadguuradii Suweeto	50
— Jaalle Ismaaciil oo booqday Shiinaha iyo Kuuriya	51
— Shirkii 14aad ee UMA	53
<b>VI. ARAGTIDA CILMIGA AH</b>	
— Xulashada hawlcareennada	55
<b>VII. HIDDHAHA IYO DHAQANKA</b>	
— Macnaha ereyada «Hidde» iyo «Dhaqan»	60
— Jawaabta Idaaja'a	61
— Jawaabta Gaarriye	63
— Jawaabta Siciid Saalax	64
— Masrax Siyaasadeedka	66

# HALGAN


S. B. 1204  
Telefoon Lr. 720-51,74  
Qolka Lr. 112

oo ku soo baxa afafka Soomaaliga  
Carabiga iyo Ingiriiska.

Guriga Ummadda  
Muqdisho, JDS

CODKA RASMINA AH EE GOLAHA DHEXE EE X.H.K.S.  
Bishiiba mar — Sannadkii 1aad; Tirsigii 9aad Luulyo, 1977, Qiimaha waa 2 Shs.

## Daymada Wargeyska



# SANNADGUURADII 1aad EE XISBIGA HANTIWADAAGGA KACAANKA SOOMAALIYEED

1da Luuliyo, 1977ka waxay astaynaysaa sannadguuradii 1aad ee X.H.K.S. Dabbaaldeggaa Maalintan qaayaha weyni wuxuu ku bee-ganyahay 17guurada xornimada iyo midnimada labadii gobol ee Talyaaniga iyo Ingiriisku kala gumaysan jireen. Waxa sii bilaya xuska maalintan weyn, qiime iyo qaayo dheeraad ahna sii taraya, 27ka Juun oo Xeebta Jabuuti ee Soomaaliyeed ee Faransiisku gumaysan jiray xornimo hantiyayso.

Oktoobar 21dii, 1969kii, ayaa ciidammada Soomaaliyeed ee qalabka sidaa, iyagoo garabsanaya dadweynaha, hoggaanna u yahay, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, curiyeen kacaan aan qudhii ku bixin Ummaddana ka rogay heeryadii talisyadii dibusocodka ah. Ambaqaadkii horeba way iska caddayd in ciidanka xukunka la wareegay ka geddisan yihii, asaagooda dalalka kale ee Afrikada xukunkii ku maroorsaday, Markiiba dawladda Soomaaliyeed ee kacaanka ihi waxay guddoonsatay deg-deg u dhalan-rogga dhaqan-dhaqaale. Tabihii lagu tabantaabiyay dhaqaalaha, qaramaynta ayaa ka mid ahayd si loo kobciyo qaypta dawladda ee dhaqaalaha. Qaabkii iyo han-naankii waxbarashada waa la beddelay ha ahaato waxbarashada caadiga ah ama ta dadka waaweynba, taasoo ku suurtogashay, qoriddii far Soomaaliga, 1972kii. Barnaamijka cuntada degdegga ah iyo mashaa-riic kale oo faro badan ayaa oodda laga qaaday.

Xag Siyaasadeed dawladda kacaanka ihi waxay bilowday in dadweynaha la uruursho, garaadkooda siyaasadeedna kor loo soo qaado. Doorashadii Hantiwadaagga Cilmiga ah loo doortay idiyoolajiyada dalka lagu hoggaaminayaa si weyn ayay u fududaysey dhaqan gelinta mashaariicedaa. Baahida xisbi kacaanka haga ugu horraystiiba waa la dareemay, hase yeeshee lama hurayn in salka laga soo abaabulo, ilaa laga gaadhaday dhalashadii Xisbiga muudo sannad ah ka hor.

XHKS, waa Xisbi horseed ah oo ku xidhiidhsan mabda'a dimuqoraadiyadda guddoonka dhixe. Shirweynihii Xisbiga lagu aasaasay ayaa lagu doortay golaha dhexe XHKS. Hawlihii ugu horreeyay ee la soo dersay XHKS waxa ugu mudnaa xil-dejinta hoggaammada Golaha Dhexe XHKS, taasoo ay barbar socotey abaabulkii iyo habayntii laamaha Xisbiga ee gobollada iyo degmooyinka. Halkaa waxa ka dhashay qaabkii horee maamulka dalka oo la dhalan rogay.

XHKS, tababarro is-dabajoog ah ayuu xubniiisa u qabanqaabi-yay. Tababarradaa oo heerar kala geddisan ahaa Xamar iyo gobal-ladaba waa laga qabanqaabi-yay. Machadka Culuunta Siyaasadda ee Xalane waxa loo rogay Machad qarameed oo diyaariya kaadirka Xis-biga. Dalalka Hantiwadaagga ah ee Mabda'u ina walaaleeyay qayb libaax ayay ka qaateen waxbarridda kaadirka iyagoo had iyo jeer er-goojin XHKS ka socda dalalkooda ku martiqaaday si ay aqoon iyo waayo-aragnimaba u soo korodhsadaan.

Tan iyo haatan wufuud XHKS ka socotaa waxay aqoon korodsi socdaal ah ugu tegeen: Midowga Soofiyeti, Jamhuuriyadda Dimoq-raadiga Jarmalka, Jekoslafaakiya, Yugoslaafiya, iyo Jamhuuriyadda dadka ee Shiihaha. Dhowaan Wufuud XHKS ka socota ayaa aqoon korodhsu u aadi doonta: Bulgaariya (ugu yaraan 2 kooxood). Kuuba, Kuuriya iyo dalal kaleba.

XHKS xidhiidho badan oo Caalamiya ayuu leeyahay, taasoo looga danleeyahay fulinta barnaamijka Xisbiga oo ku baaqaya in xi-dhiidh fiican lala yeesho dalalka Hantiwadaagga ah, dhaqdhaqaaq-yada gobannimadoonka ah iyo dhaqdhaqaaqa xoogsatada ku ciillan dalalka Hantigoosiga ah.

Kalfadhidhii 3aad ee Golaha Dhexe XHKS ahmiyad gaar ah ayuu lahaa isagoo gudoonsaday go'aanno dhaxal gal ah oo saameeya dhaqan iyo dhaqaaleba hawla badan ee loo baahanyahay in la qabto. Dha-qalihibaa hab loo qorsheeyay Xisbigu ku hoggaansho, waxa kalfa-dhigaana lagu guddoonsaday dib-u-habayntii ururrada bulshada.

Waxa la qabtay shirweynihii Aasaaska Ururka Dimoqraadiga Ha-weenka Soomaaliyeed, 8dii Maars, Xidhiidhka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed ayaa la qotomiyay Maajo 1dii, waxaynu u soo joognay aasaaskii Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed. Ururradaasi haatan waxay ku hawlanyihiin siday dhismahooda qaran, gobol iyo degmaba u tusmayn lahaayeen. Xil gudashadooda xididdada XHKS ayay ku gaadhsiinayaan dadweynaha Soomaailyeed meel kas-too u joogaba.

Hawlaasoo dhan dareen cusub oo dhaqaneed ayaa lagu hirge-liyay. Heeso, Gabayo iyo Riwaayado ayaa lagu muuiiyay, xilka iyo kaalinta xisbiga horseedka ah iyo ururrada bulshada. Xisbigu waa damaanadda sii ambaqaadka kacaanka 21ka Oktoobar. Xoghayaha Guud ee XHKS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, in badan ayuu tilmaan iyo tusaaleba ka bixiyay kaalinta hormoodnimo ee Xisbiga taasoo taa-banaysa Xubin walba oo nolosha bulshada ku lug leh: Siyaasadda, maamulka, dhaqaalaha iyo dhaqankaba.

Ilmuu waa gu jir, korriin iyo bislaashaba waa u baahanyahay. Waxyaabo badan ayaa dhiman. Unugyadii Xisbiga hadda ayuun baa la dhammeeyay dhismahoodii, waqtii ayay u baahanyihiin si ay xilkoo-da u gutaan. Hantiwadaageyntii waxbarashada jid dheer oo aynu u marro ayaa inala gudboon. Laga soo bilaabo Oktoobar 1976kii,

Halgan oo ah codka golaha Dhexe XHKS ayaa la daabacaa. Haddda ayuunbaa la bilaabay in looga faa'iidaysto hirgelinta barnaamijka iyo hawlaha Xisbiga.

Halganka horyaal, XHKS wuxuu u baahan doonaa laxaad iyo Xubno firfircoon oo ku soo hirta. Wixa kaluu u baahan doonaa Xub-niisa oo uu ku dagaal gesho dhismaha bulsho fayow.

XHKS wuxuu dalka ku hoggaamin doonaa siyaasadihii nabadeed ee lagu wadey dalka tan iyo 1969kii. XHKS wuxuu guddoonsaday nabad iyo derisimo-wanaag adduunku ku wada noolaado gaar ahaan Geeska Afrika.

Garsoor sugarayaa curiya nabad waarta. Dhiigmiirad iyo caaadis-qowmiyadeed jaad ay tahayba waa in la muquunshaa si loo gaa-dho nabad iyo barwaqaqo. Waa taa, ta ku qasabtay XHKS inuu taageero shacbiga Falastiin ee xuquuqdoodii la duudsiyay, Ummadaha Carbeed ee ka gilgilanaya cagajuglaynta Sahyuuniyadda, halganka dadyowga Simbaabwi, Naamiibiya iyo Koonfur Afrika. Waa taa, ta dhalisay in XHKS haaraamo gumeysiga la baday Ummadda Soomaaliyeed ee waaxyaha badan loo qaybshay iyo inuu midayntooda u dagaal galoo. XHKS lid wuxuu ku yahay Imberyaliyadda, gumeysiga, gumeysiga cusub, midabtakoorka iyo Sahyuuniyadda, waxaanu si aan hagar lahayn u taageeraynaa halganka loogu jiro nabadda, horumarka iyo Hantiwadaaggaa.

## JABUUTI:



# JAMHUURIYAD MADAX BANNAAN

Dadyow badan ayaa muddooyinkii dambe si isdabajoog ah uga xoroobey isticmaarka. Arrintaasi waxay noqotay astaan ka mid ah astaamaha casrigreenan ku caan yahay. Dagaal dheer oo in qarni ka badan soconayey ka dib ayaa dadka Xeebta, Jabuuti 27kii Juun 1977kii hantiyeen xornimadoodi iyagoo heeryadii gumeysiga Faransiiska gees isaga xooray. Xoog iyo ciidan ayaa Afrikada madaxbannaan ku soo biirey.

Inkastoo ay aad u dad yar tahay, (dadka reer Jibuuti kama badna rubuc malyan) barwaqaqada dalka si naafsi weyn looga tabcaana ay kooban tahay, misana Jamhuuriyadda ugubi waxay ku taal meel istaraatiji ah. Waxay ku taal iridda Koonfureed ee Badda Cas. Qaayahaas istiraatijiga ah ayaana u sabab ahay waxa Faransiisku sida macangagnimada ah isugu dhejinaayey Jabuuti muddaaas dheer oo idil.

Xeebta Jabuuti waxay madaxbannanideeda ku soo gaartey, si lagu tilmaami karo xasillooni iyo degganaan. Dadka Xeebta muddadii ay u halgamayeen xornimadooda waxa si weyn u taageeray ururro Caalami ah oo meeqaan iyo maamuusba mudan sida: Qarammada Midoobey, Ururka Midowga Afrika, Ururka Jaamacadda Carabta, dalalka Dhixdhexaadka ah iyo Ururrada Dimoqraaddiga ah ee adduunka.

Waxaa iyadu xus gaar ah mudan sidii JDS talo iyo taageero hagar lax leh si joogta ah ugu deeqi jirtey gobannimaddoonka Xeebtaas; taageeradaas oo sida la wada ogsoon yahay kaalin aad u laxaad weyn ka ciyaartay madaxbannaanida Jabuuti.

Faransiiska calankiisii Jabuuti tan iyo aammanuu wuu ka duubmay; wuxuuse halkaas ku dhaafay dal si kastaba dib-u-dhaesan. Yidiiiladu waxay ku jirtaa madaxda hoggaanka Siyaasadda dalka haya ee hore u muujiyey in khilaaf iyo is-af-garadwaa kastaba ay wada hadal iyo degganaan ku dhammayn karaan. Kuwaas weeye kuwa xilka xallinta mashaakilka dalka horyaal iyo horumarintiisu saaran yahay, iyadoo mar walba helaysa taageero iyo saaxiibtinnimo.

Sidii aanu sheegnay, Jabuuti waxay Baab-el-Mandab oo ah illinka Koonfureed ee Badda Cas u jirtaa tuuryo dhagax. Taas ayaa indho badan oo caalami ah u soo jiidday.

Arrintaas ayaa keentay in aan si sahal ah oo madaxbannaan loo dhaafin in Jabuuti ay horumarkeeda ku xaqiijiso; hase yeeshee dadka reer Jabuuti oo si wacan ula socda hunguri-kasoo-ridka ay goobta ay deggan yihin ku hayaan xoogagga caalamiga ihi waxay u guntan yihin inay dib kasta oo ka hortimaadda xalli ka gaaraan, horukaca bulsheed iyo kan dhaqaaleedna ka soo dhalaalaan.

Waxa hubanti ah ku tallaabsiga ay Jamhuuriyadda ugubi ku tal-laabsato Siyaasad dhixdhexaad ah, nabab-ku-wada noolaad ah, xurmayn arrimaha guda-ahaaneed ee dawlad kale, iskaashi iyo tix-gelin derisnimo ah, hubaal Siyaasaddaasi mu'aamaraadka iyo shirqoolka xoogagga imberiyaaliyadda iyo dib-u-socodku ay shabaakteeda gochtan dhigayaan afka ayey dhulka u daraysaa.

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyeed iyadoo munaasabaddan faraxa leh awgeed u gudbineysa dadka Soomaaliyeed oo idil iyo inta Xeebta Jabuuti deggan dhammaantood hambalyo qaali ah iyo salaan diirran waxay Soomaaliya u aragtaa istiqlaalka Jabuuti inuu yahay mid iyada u dhashay waxtar weynna ka taraya xaqiijinta himilada Ummadda Soomaaliyeed ee ah inay si buuxda uga madaxbannaanaadaan gumeyisiga.



# SANNAD-GUURADII 17aad EE MADAXBANNAANIDA QARANKA SOOMAALIYEED

Dadka J.D.S. waxay xuseen bishan Luuliyo Sannadkan 1977ka Sannadguuradii 17aad ee ka soo wareegtay maalintii madaxbannaanida iyo midnimada qaranka Soomaaliyeed, iyagoo ay ku dhaceysa cad-ceeddi kululeyd ee gu'gu.

Had iyo goor bisha Luuliyo ee sannad kasta waxay soo celisaa xusuustii dhabbihii dheeraa ee uu soo maray dhaqdhaqaqa Soomaaliyeed, xaaladdii adkayd iyo halgankii qaraaraa ee dadka Soomaaliyeed ku qaadeen dalalka gumeysiga. Waxaa kale oo ay ina xasuusaa sida dadweynihii kadeednaa ee Soomaaliyeed ay u khiyaameeyeen kooxdii danaystayaasha ahayd ee ay xariga siyaasadda u dhiebeen. 9kii sannadood ee ugu horraysay madaxbannaanida J.D.S.

Waayo-aragnimadii laga helay sannadahan mugdiga ahaa ayaan kobcisay ruuxa kacaannimo ee dadweynaha; soo-shaac bixiyey khattarta siyaasadda gumeysiga cusub ee ay ku dhaqmayeen kooxda xukunka wadday, sugayna culaysinta iyo ballaarinta halganka uu dadweynaha Soomaaliyeed uu kula jiray daba-dhiliska imberiyaaliyadda iyo gumeysiga cusub, laguna doonayey isheddel bulsho oo run ah oo kor u qaada nolosha dadweynaha shaqaalaha ah.

Halganka lagama daalaanka ah ee dadka shaqaalaha ah waxaa taajka saaray kacaankii 21 Oktoobar 1969kii, kaas oo afka u riday xukunkii hore ee gaabiska ahaa, una daadaheeyey xoogga, tamarta iyo awoodda dadka Soomaaliyeed sidii loo gaari lahaa madaxbannaani, dhaqaale iyo dhaqan sarreya. Intii kacaanku ka curtay dalka guulo badan ayaa la soo hooyey, 1da Luuliyo ee Sannad kastaama waxay maragsataa horumar laxaad leh iyo guulo fara badan oo ay gaartay J.D.S.

Qaramayntii hay'adaha shisheeye ee waaweyn, miisaankii baayinusharka, iskaashigii loo dejiyey beeraleyda, qoraalkii afka Soomaaliga iyo qaadashadiisa uu noqday afka rasmiga ah ee waxbarashada iyo maamulka dalka, aasaaskii XHKS, iyo Ururadda Bulshada waxay dhammaan ka mid yihii waxyaabaha la taaban karo ee ay maragsadeen bilihii Luuliyo ee sannadihii kacaanka.

Hase yeeshee xil fara badan ayaa weli horteenya yaalla: isbedelka degdegga ah ee bulshada; tirtiridda: shaqo la'aanta; Cudurka iyo Jahliga waxay yihii arrimo culus oo u baahan adkeysi; iyo shaqo is-daba joog ah oo ay ku dheehan tahay aragti sax ahi.

Hadda waxaynu u dabbaal degaynaa sannad guuradii 17aad ee ka soo wareegtay madaxbannaanidii qaranka Soomaaliyeed, xilli ay gobolka (geeska Afrika) ku meersan yihii dabinno loola dan leeyahay hakinta socodka kacaannimo ee ka socda qaaradda geesteedan. Xoogagga imberiyaaliyaddu iyo kuwo ka mid ah dalalka jaarka ah oo aan maskaxlahayn ayaa waxay ka saqeynayaan sidii loola diriri lahaa xaqiijinta nabadeed iyo is-afgaradnimo ee bedkan.

Iyadoo iminka aannu xusayno sannadguuradii 17aad ee madaxbannaanida qaranka Soomaaliyeed, waxaannu ku niyad sannahay una hanweynahay lama huraannimada madaxbannaanida qaybaha dalka Soomaaliyeed ee weli ku jira gacanta gumaysiga. Hase yeesh ee arrintani waa mid inooga baahan inaynu xoojinno midnimadeena iyo inaynu meel uga soo wada jeesano dhammaan dhibaatooyinka hor-taagan xaqiijinta himiladan.

Sidaa claraadeed, munaasabadan farxadda leh waxaa loo baahan yahay inaynu ku hiranno Xisbiga; xoojinno midnimada xocgagga aimograadiga ah; hore u marinno isbahaysiga aynu la leenahay saaxii-badeenna iyo inaynu ka feejignaano dabinnadda khatarta ah ee lagu baqna yooyahayo kacaankeenna. Intan marka aynu gaarno ayuun baynu xaqiijin karaa in dabinnadaas waxshinimada la kulmi doonaaan guul daro iyo qalbi jab.

## HALGANKA ERETERIYA OO GAARAY HEER SARE

Waxaa la wada ogsoonyahay in halganka dadka reer Ereteriya ay kula jiraan Taliska Xabashida si ay u hantaan Madaxbannaani buuxda uu sannadahan dambe aad ugu badnaa wararka dunida. Taas oo caddaynaysa in halganka gobannimadoonka Ereteriya uu gaaray heerkiisii u sarreeyay.

Dabayaqaqadii Qarnigii 19aad waxaa ku habsaday Qaaraddaau Afrika duullaankii caanka ahaa ee Imberiyaaliistayaasha reer Yurub. Talyaaniga oo isagu goor dambe ku soo biiray xoogaggaas duullaanka ahaa, wuxuu ku guulaystay inuu qabsado Liibiya, Ereteriya iyo qayb ka mid ah dalka Soomaaliyeed.

Wuxuu Talyaanigu dalka Ereteriya soo galay 80aadkii Qarnigii 19aad, oo uu si rasmi ahaan ah uga dhigtay mustacmarad uu gumaysto 1890kii. Taariikhda Ereteriya waxay la mid tahay haddii si loo fii-iryo taariikhda qaybta dalka Soomaaliyeed ee uu Talyaanigu gumaysan jirey. Waxay labaduba wadaagaan waayaha xukunkii gumeysi-ga Talyaaniga oo ay gacan bir ah ku qabatay faashiistadii Milatariga ahayd ee imberiyaaliyadda Talyaaniga.

Ereteriya, waxay noqotay taariikh ahaan bulsho ku barbaartay halgan iyo iska-horimaadkii ay la gashay xoogagga gumaysiga Tal-

yaaniga «ka hor 1941kii», Ingiriiska (1940 naadkii) iyo Xabashida oo ay hadda is-hayaan.

Markii la jebiyey faashiistadii Talyaaniga, xoogaggii imberyaa-liyadda waxay gacan buuxda siiyeen siyaasaddii Xabashida ee ku dhisnayd dal ballaarsiga, waxayna isbarbartaageen Xabashida ee ku adkaysatay in la soo raaciyo Ereteriya. Waxaa hoggaainaayey xoggagga kale ee gumaysiga imberiyaaliistaha Maraykanka; Maxaa yee-lay wuxuu qorshaystay inuu saldhiga weyn oo Milatari (Kagnew) ka dhisto Ereteriya, taas oo Xabashidu ku siinaysey gacan buuxda.

Siyaasadaas tirtiridda qarannimada Ereteriya waxaa diiddanaa xoogagga horusocodka ah ee dunida, gaar ahaan waxaa waagaasi si cad uga soo horjeestay dalka M. Soofiyeteeti.

Taliska Xabashidu wuxuu qaaday tallaabocin ku fadhiya cury-amin, argagaxiso, dhac, dil iyo qalalaase aan damin si uu u xoojiyo siyaasaddiisa ku dhisan gumaysiga.

Isla markaana, waxay muujisay kaniisaddu gaalada inay dabadhilif daacad ah tahay aadna uga faa'iidsatey waayaha gumeysi-ga si uu u fushado siyaasaddiisa foosha xun ee lidka ku ah xuquuq-aa asaasiga ah ee dadka reer Ereteriya.

Isla 1949kii, ayaa koox horusocod ah oo ka tirsan waddaniyiinta Ereteriya, bilaabeen inay ka doodaan sida ugu habboon ee loo suuragelin karo abuuritaanka «Jabbadda Xoraynta Eereteriya». Hase-yeshee, wuxuu waagaas ra'yiga dadweynuhu u muuqday inuu la jiro, bal, in fursad la siyo go'aanka qaramada Midoobay; sidaa Jab-hadda gobannimadoonka Ereteriya.

Waxaa la wada ogsoonyahay in talidii ay soo jeediyeen Qaramada Midoobay ee ku saabsanayd xiriirka barlamaaniga ah ee Xabashida iyo Ereteriya uu fashilay. Waxay arkeen reer Ereteriya sharuftii iyo gobannimadii dalkooda oo si tartiib-tartiib ah loo dhacayo, iyo xukunka Xabashida ee gumeysiga ah oo gacan bir ah ku qabtay dalkooda; taasoo ku dhalisay dib-u-dhac dadweynaha, horumarka dha-aaleed iyo waayaha bulshadeed.

Xukunkii (Xayle-Sillaase) wuxuu ku tuntay go'aankii Qaramada Midoobey ee xusayey inay Ereteriya u madaxbannaanaato xukun-

keeda iyo maamulkeeda gudaha, wuxuuna soo hashtey Ereteriya muddo aan yarayn isagoo ku haya dadka reer Ereteriya kadeed iyo gumaysi.

Waxaa hubaal ah, taariikheduna ina baraysaa in meeshii iskadeed iyo isku dul-noolaad uu ka socdaba, dagaal iyo halgan gobannimadoon ah lagala horjeedo. 1959kii waxaa la abuuray dhaqdha-qaaqa gobannimadoonka Ereteriya oo ku bilaabmay dagaal dhuumaalaysi ah, kana aaloosmay markii hore magaaloo yinka. Taasima waxay u sii gogol xaartay asaaskii Jabhadda Xoreynta Ereteriya taa-riikhdu markay ahayd Sebtember, 1961kii.

Waxay arrintaasuna tusaale u ahayd bilowga halganka gobannimadoonka Ereteriya oo galay heer sare oo uu isticmaalayo hubnooc walba leh. Haddaba si loo joogteeyo loona xoojiyo halgankaas gobannimadoonka waxaa abuurmay 3 urur, ama Jabhadood oo waddani ah kana qayb qaata halgankaas — midiba waayo iyo hab ay ku dagaalantayba — oo kala ah:- (ELF-RC, PLF iyo ELE-PLF».

Inkastoo oo uu dhexmaray Jabhadaha gobannimadoonka ah khilaaf, colaad iyo xifaaltan ku dhisan tartan iyo hinaase, haddana, waxaa ka dhexeeyey dhammaantood isu duwid iyo wada shaqeyn, waddaninimo oo la filayo hadda iyo wixii ka dambeeyaa inay dagaalyahaniinta reer Ereteriya midnimadooda xaqijiyaan si ay uga guulaystaan gumaysiga Xabashida.

Muddo 16 sanno ah, ayaa gobannimadoonka Ereteriya ku jirey halgan aloosan oo xornimadoon ah, kuna dhisan inay awood u helaan ka taliyaanna aayahooda dambe ee xaqa ay u leeyihiin.

Halganka Millatari ee ay soo gashay Ereteriya wuxuu ahay mid qiime weyn leh hase yeeshii, waxaa fiiro gaar ah mudan oo lagu xusaa kacaanka gobannimadoonka Ereteriya isbeddellada qotada dheer ee uu dhaliyey kuwaas oo soo taabtay dhinciyada kale duwan ee nolosha bulshada Ereteriya.

Halganka gobannimadoonka ah ee uu ku soo jirey dadka reer Ereteriya, wuxuu kaloo qiime weyn u lahaa, raad iyo xiisad inay abaabulaan oo habeeyaan beeraha, inay curiyaan tabo iyo xeelado kacaameed oo lagu muujiyo qiimaha iyo horumrinta tacabka iyo sha-

qada. Iyadoo u dagaallamaysa madaxbannaanideeds qarannimo waxay Ereteriya suuragelisay inay hirgeliso kacaan demokraatik ah oo ay ugu gogol xaarayso dhalashada Jamhuuriyadda Dadka ee Ereteriya.

Halganka gobannimadoonka ah ee uu ku soo jirey dadka reer Ereteriya, wuxuu kaloo qiime u lahaa, raad iyo xamaasad, gobannimo, demoqraadiyad iyo horumar u dirir ku beeray oo ku tallaalay dadweynaha reer Itoobiya ee u dagaallamaaya inay dhaesadaan xuquqdooda uu duudsiyey gumeysiga Xabashidu.


Taliska cusub ee Addis-Ababa, intii uu aqoonsan lahaa xuquqda sharciga ee Ereteriya, oo uu raadin lahaa xal siyaasi ah oo cadaalad ku dhisan dhibaatadan — wuxuu abaabulayaa dagaal uu ku tirtirayo jiritaanka Ereteriya; oo ciidammada qalabka sida, calooshooda u shaqaystayaasha, dagaal gelintooda ka sokow, wuxuu isku deyayaa taliska Xabashida ee cusubi iruu kicin iyo abaabul ku dhisan (Shuufansim) iyo cunsurnimo ku abuuro beeraleyda danyarta ah, kuwo shaqaalaha iyo wax-ma-garadka ah oo uu u qaybiyo hub iyo raashin, isagoo qaadaya Olole uu ku beerlaxowsanayo — islamarkaana ku abaabulayo socod dheer oo loogu daadgureeyo dadkaas si loogu duulo Eretriya oo loo jebiyo kacaankeeda, hase yeeshie, ay taasi dhalisay inay ku hooftaan goobaha dagaalka ee K. Ereteriya, iyagoo u dhimanaya fikradda gurracan ee Imberiyaaliyaddu alliftay naf-u-huridda iyo difaaca «xuduuddii gumaysigu u qaydey xabashida»

Waxaan shaki ku jirin inaan ummad addoonsata ummad kale ahayn ummad xor ah. Isagoo isticmaalaya hall-haysyada horusocodka ah, kuna andacoonaya inuu dhisay H/wadaag taliska cusub ee Addis-Ababa wuxuu ku shaqayr:ayaa Joogtaynta siyaasadihii ku dhisnaa kadeedka iyo dulmiga ee Taliska boqortooyada ee hore.

Hase yeeshie, waxay caddaysay taariikhdu, inkasta oo la isticmaalo qalab iyo tab maqaar saar ah oo ka horjeeda nuxurka siyaasadda iyo mabaadii'da uu ku dhawaaqay uu jabayo oo hoog iyo fashal ku damaynayo mustaqbalka.

Halganka Ereteriya wuxuu soo sooday 16 sano, wuxuuna u muuqdaa inuu socon karo in ka badan 16 sano oo kale; si uu u tirtiro dulmiga waddaniga ah iyo iskadeedka bulshadeed.

Wuxuu kacaanka Ereteriya u yahay tusaale halganka dabaqiga ah ee lagala horjeedo dabaqadda Afrikaanka ah ee haysata Xukunka. Sidaas darteed, waxay waayo-aragnimo iyo aragti cusub siinaysaa kacaanmmada mustaqbalka Afrika iyo dunida 3aad ka dhalan doona.



## NOI OSHA XISBIGA

### Munaasabadda Sannadguurada Koowaad ee aasaaska Xisbiya, Qaabkii Abaabulka Dhismaha XHKS iyo Ururrada Bulshada

Cumar Salaad X.G.DH. XHKS



Halganka Gobbannimadoonka Ummadda Soomaaliyeed taariikhdiisu waa dheer tahay wuxuuna soo taxnaa ilaa qarnigii 16aad horraantiisii, waqtigii dhaaqdhaqaaqii Axmed Gurey. Kacaakuf badan kad-dib, dhaqdhaqaaqaas waxaa mar labaad si xoog leh u soo rogaal celiyey geesigii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan iyo daraawiishtiisii, halgankaas oo socday 1901kii ilaa 1921kii, ayna Ummadda Soomaaliyeed kala hor jeedday gumeysigii dalka qabsaday kaddib shirkii Imberyaaaliyadda ee Baarliin 1884kii. Halgankii Daraawiishtu wuxuu baraaruujin iyo shidaal siiyey dhala-shadii axsaaktii gobannimadoonka oo dalka ka dhala-tay dhammaadkii Dagaalkii Adduunka ee Labaad, markii la jabiyyey Fashiistada. Kuwaas oo uu ugu horreeyey Xisbigii Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed «Somali Youth League», oo halganka soo hoggaaminayey 1943kii ilaa 1960kii, waqtigii gobannimada. Xisbigaasi wuxuu gaarsiiyey dadweynaha midnimo, shacuur waddani ah, iyo garaad siyaasadeed. Wuxuu gaarsiiyey dadweynaha heer ay illoobaan qabiijka, iyo danaysiga oo ay midnimo iyo waddanimo ku wada fikaraan. Xisbigu Barnaamijiisa wuxuu ku qortay «Soomaalidu giddigeed waa walaalo siman, qabiil, diin iyo dariiqo ma kala qaybiyaan». Gumeysigii wuxuu ku tilmaami jirey Xisbiga dhallinyaradii hoggaaminaysay in ay qabeen fikrad shcuuciyadeed, midnimadoodii, barnaamijkoodii iyo xeeladahooda marka uu kalsuuri waayey. Hase yeeshi, been ma ahyn in fikrad horusocod ahi hoggaaminaysay ururkaas. Jaalle Yaa-siin Xaaji Cusmaan oo ahaa Hoggaamiyihii ugu horreeyey oo ururka, wuxuu ahaa nin horusocod iyo ka-caan ah oo xiriir iyo talo la lahaa Xisbiga Shuuciga ee Talyaaniga Laantii uu ku lahaa Muqdisho. Calaa-madda Ururka «SYL» waxay ahayd caleen saddex dhe-good leh oo ku fadhida bil dhalatay, taasoo macnaheedu yahay calaamadda Hantiwdaagga ee caalamiga ah (Dubbbe iyo majo) oo la maldahay. Midnimadii xoogga

weynayd ee ururkaasi ku hoggaaminayey dadweynaha waxay dhalisay in labo qaybood oo ka mid ah shantii meelood oo gumeysigii u kala qaybiyey dalkeenna ay madax bannaani gaareen sannadkii 1960kii. Sidii caadada u ahayd Gumeysiga, wuxuu awooddii dawladnimo ku wareejiyey daba-dhilifyadiisii uu soo tababaray oo danihiisa iyo kuwooda gaarka ah u adeegayey.

Sidaas darteed, Halgankii iyo himiladii dadweynuhu waxay noqdeen dhicis iyo kuwo meel maran ku dhacay. Xukunkii gumeysiga cusub ku faruur xirnaa wuxuu bilaabay inuu hirgeliyo siyaasadda gurraan oo ah «Qaybi oo xukun», iyagoo isticmaalaya qabiil, laaluush iyo nooc kasta oo Musuq-Maasuuq ah. Siyaasadaasi waxay dhalisay niyad jab, midnimadii oo kala furfurata, shucuurtii waddaniga ahayd oo hoos u dhacda iyo tartan danaysinimo. Xaaladda dhaqan-dhaqaale oo ku sognayd heer miyinimo iyo habka gumeysiga cusub way sii xumaatay. Dhaqaaluhu wuxuu gaaray heer musalif ah, haddii aan si kale u niraahnana, dalku wuxuu rahaamad ahaan gacanta ugu galay imberyaliyadda Aoduunka, marka laga eego-deynkii uu ku haftay, mushahaarooyinkii iyo kharashkii caadiga ahaa oo la bixin waayey iyo sidii guud ahaan Imberyaliyaddu ugu talinaysay. Markaas shaki kuma jiro in siyaasadda iyo dhaqankuba ay noqdeen dabdhilif iyo gun. Kala firkaas iyo jahawareerkaasi wuxuu dhaliyey inay soo baxaan ururro «siyassadeed» iyo «bulsho» oo ciiddaas ka badan. Ururku-sheegyadaas oo tiradoodu gaareysay 88, waxay dhab ahaan ahaayeen ururro qabiil, danyasi iyo u adeegidda gumeysiga cusub iyo imberyaliyadda ku dhinaa, looguna talo galay kala qaybinta midnimada dadweynaha iyo hakinta halgankooda ay ku doonayeen gobannimo buuxda, oo horumar bulshadeed leh. Ururradas qaar ka mid ahi waxay sheegan jireen fikrado horusocod ah, hase ahaatee waxaa dhexdooda ku xoog batay fikradhihi dibusocodka ahaa. Inkastoo xaaladda guud, qaabkii iyo dulucdii abaabul-siyaasadeedkii jiray ay sidaas ahaayeen, haddana halganka dadweynaha Soomaaliyeed uu ugu jiray in uu gaaro gobannimo iyo horumar dhab ah, marnaba madamin. Waxaa jirey nacayb iyo mucaaradnimo xoog leh ooy dadweynuhu u qabeen xukunkaas gumeysiga u adeegaayey iyo waddada uu ku socaday.

Ururradii Shaqaalaha iyo Dhallinyarada oo jirey, inkastoo ay saamaysay xaaladdii markaas jirtey, si cad bay uga soo horjeesteen xukunkaas. Tusaale waxaan u soo qaadan karnaa mudaahaaradyadii shaqaalaha iyo dhallinyarada oo sannadihi 1962kii, 67kii iyo 68kii



oo si xilleh u gilgilay tiirarkii nidaamkaas. Mudaaharaadyadaas iyo kuwo kale oo badan waxaa had iyo jeer taageerayey dadweynaha oo idil, bareer iyo qarsoodiba. Xaaladaasi waxay na tusinaysaa in dadweynuhu doonayeen isbeddel in lagu sameeyo habkaas hase yeeshay ay la'aayeen urur hoggaamiya. Dhibaatada noocaas waxaa ummadda ka saari lahaa, xisbi shaqaale oo horusocod ah. Laakiin shaqaalaha jirey dhanka dawladda oo ugu badnaa, tiradoodu waa ka yarayd 30,000 marka laysku daro shaqaalaha tacab soo saarka iyo kuwa hawlahaa. Dhinaca shaqaalaha ka shaqeeyaa dhaqaalaha gaarka ahna tiradoodu 5.000 waa ka yarayd. Markaas miyey suuroobi kartay in la helo xisbi noocaas ah? Jawaabtu waa maya. Rajada dadweynuhu lahaa maxay ahayd? Xoogga Dalka. Dadweynuhu waxay xoogga dalka u arkayeen in uu ka fogaa musuqmaasuuqii jirey Dalka. Sidaas darteed halhayskoodu wuxut ahha «Xoogga Dalkow naga soo gaar».

## II. DHALASHADII KACAANKA IYO ABURITAA-NKII XAFIISKA XIRIIRKA DADWEYNHA

Xaaladda kor ku tilmaaman waxaa madaxeedii ma jo u rogay Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii oo ay soo abaabuleen saraakiil horusocod ah oo ka tirsanayd Ciidamada Qalabka Siida oo uu hoggaaminayey Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre, iyagoo ka gilgishay maamul xumadii iyo dhiigmiiradkii ummaddu ku jirtey iyo Laadaantii qaranku ka lushey, iyagoo ka tarjumayey dareenka dadweynaha, haystyna kalsoonida iyo taageeradooda.

Hoggaankii ka dhashay kacaankaas oo ahaa Golaha Sare ee kacaanka oo guddoomiye uu ka ahaa Jaalle

Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre, wuxuu baabi'i-  
yey dastuurkii, karlamaankii, dawladda iyo wixii kale  
oo shariyo ahaa oo ka horjeeday ujeeddada Kacaanka  
kuwaas oo lagu caddeeyey Xaashidii kowaad ee Ka-  
caanka. Isla xaashidaas waxaa ku caddayd si-  
yaasacda kacaanka, taas oo ahayd: in dalka  
laga dhiso bulsho cusub oo ku dhisan caddaalad, shaqo  
iyo sinnaan bulshadeed. Gobollada iyo Degmooyinka  
waxaa laga dhisay Guddiga kacaanka oo ka kooban sa-  
raakiil ciidamada qalabka sida, kuwaasoo ahaa hayada-  
ha awocdda kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka.  
Tillaabooyinkii ugu horreeyey oo kacaanku qaaday, ka  
sokow qaramyantii halbowlayaasha dhaqaalaha, waxaa  
ka mid ahaa dib u soc noolayntii, kalsoonida, Iimaanka,  
sharafta, wadcaninimada iyo midnimada dadweynaha.  
Golaha Sare ee Kacaanku wuxuu durbadiiba bishii No-  
fember 1969kii abuuray Xafiiska la yiraahdo Xafiiska  
Xiriirkha Dadweynaha, oo hawshiisu ahayd **xiriirkha**  
GSK iyo Dadweynaha. Xafiiska hawlihiisa waxaa ka  
mid ahaa inuu dadweynaha u gudbiyo go'aamada iyo  
farriimaha GSK ka soo baxaayey, iyo inuu waraaqaha,  
arjiyada iyo dhambaallada taageerada iyo talo bixinta  
ah oo dadweynaha ka imaanayey gaarsiiyo GSK. Ka  
dib tillaabo xafiisku wuxuu bilaabay inuu u  
gudbo kicinta dadweynaha.

Hawlihi kicinta oo ugu horreeyey oo uu qabtay  
Xafiiska Xiriirkha dadweynuhu waxay ahaayeen bannaan  
baxyo dadweyne oo lagu taageerayey go'aannadii Ka-  
caanka oo ay ka mid ahaayeen kuwii qaramyantii xub-  
naha dhaqaalaha, ku-dhawaaqii doorashada Hantiwa-  
daagga Cilmiga ah. ololayaashii ku baraaru jinta dad-  
weynaha qimaha shaqada, fasiirraaddii iyo fidinta Han-  
tiwadaagga Cilmiga ah, iyo dhaqangelinta Mabda'a cu-  
sub oo dhaxalgalka ah ee Iskaa wax-u-qabso oo kacaan-  
ku curiyey, la dagaallankii iyo ceebayntii qabiilka, go-  
bolaysiga, eexda, qaraaba kiilka, maamul xumada, fi-  
dinta iyo taageeridda dhaqdhqaqyada gobannima-  
doonka iyo dadweynaha dulman, iyo cambaareynta  
dhagarta iyo gardarrada gumeysiga iyo imberyaaliyadda  
iyo daba-dhifilyadooda. Hawlihi Xafiisku markii ay  
sidaas u fideen, GSK wuxuu gartay abaabulidda gudiyo  
dadweyne oo kala duwan oo xafiiska ku caawiya haw-  
laha kicinta, hanuuninta iyo hawlgeinta dadweynaha.  
Si loo hanto loona fuliyo hawshaas kicinta, iyo abaabul-  
ka dadweynaha oo kacaanka qimo weyn u leh, waxaa  
la amray in lagu soo ururiyo kaadarka horusocodka ah  
xafiiska, isla markaasna la tababaro kuwo cusub iyo ku-  
waasba. Muddada oo hawlahaas oo dhan lagu fulinaa-  
yey waxay ahayd 1970kii gudhiisa ilaa 1971 horraan-  
tiisii. Bishii Sebtember 1971, si kicinta, hanuuninta,  
abaabulka iyo hawlgeinta dadku u sahlanaato, hoosna

ugu degto, waxaa magaalada Muqdisho loo kala qaybi-  
yey 13 xaafadood, waxaana laga furay laamo xafiiska  
xiriirkha Dadweynaha, laamahaas oo madax looga dhi-  
gay kaadarkii XXD uu u soo tababaray abaabulka si-  
yaasadeed, kuwaasoo xafiiska wakiillo uga ahaa xafada-  
ha, Xaafadahaas waxaa laga dhisay guddiyo cusub  
oo la yiraahdo Guddiga dadweynaha xaafadda, guddi-  
gaas oo ka kooban 25 qof oo isugu jira shaqaale, dhal-  
linyaro, haween, odayaal, iyo ganacsato yaryar. Guddiga  
waxaa guddoomiye u ahaa wakiilka XXD. Hawla-  
ha Guddiga waxaa ka mid ahaa.-

1 — Iyagoo dadweynaha u qabta si joogto ah  
shiraj ballaaran oo hanuunin, oo lagula socodsinaayo  
go'aamada GSK iyo tilmaamaha Guddoomiyaha GSK.  
**Jaalle Maxamed Siyaad Barre**, sida joogtada ah uga soo  
baxaayey, u fasiridda fikradaha horusocodka ah ee han-  
tiwadaagga, eebeyn ta iyo kashifaadda dhagarta iyo bi-  
ni-aadami la'aanta gumeysiga iyo imberyaaliyadda IWM

2 — Kicinta iyo u diyaarinta dadweynaha inay  
ka qaybgalaan ololyasha Mashaariicda faraha badan  
ee dib-u-dhisidda dalka oo kacaanku bilaabay, iyadoo  
halhaysku ahaa «Iskaa wax u qabso», mashaariicdaas  
oo ka koobnaa dugsiyo, isbitaallo, bukaan-socodyo,  
Xafiisyo, waddooyin, jardiinooyin, beero IWM, si loo  
baajiyi kharashka ku baxaaya farsamada iyo cududda,  
kadibna loogu dhiso mashaariic kale.

3 — Qabanqaabinta bannaanbaxyada lagu ta-  
ageerayo go'aannada GSK, xuska munaasabadaa wad-  
caniga ah, kuwa lagu taageerayo guulaha ay gaareen  
dhaqdhqaqyada xooggaga horusocodka ah iyo dad-  
yowga la dulmaayo, tusaale waxaan u soo qaadan kar-  
naa bannaanbaxyadii loo sameeyey taageeridana ahayd  
«Falastiin Ha xorrowdo», «Ha laga joojiyo dadweynaha  
reer Fiyetnaam sunta iyo dabka Maraykanku ku gubaay-  
yo», «Afrikada Koonfureed Ha Xorowdo», «Anjela  
Dafis Ha la sii daayo»

4 — Xulidda iyo tababaridda Kaadir waddan-  
yiin iyo kacaaniin ah oo fuliya hawlaha kacaanka.

5 — Ilaalinta Nabadgelyada Kacaanka.

Dhismihii Xaafadaha, Golayaasha Hanuuninta iyo  
Guddiyada Bulshada

Hawlahaas dadweynaha oo idil waxaa isku dubarid-  
di jirey XXD. Hawlihi kicinta, hanuuninta iyo abaa-  
bulka dadweynaha iyagoo had iyo jeer sii ballaaranaa-

yeey dartood, GSK wuxuu guddoomiyey bishii Febraayo 1972 in xaafadaha Muqdisho laga dhisoo Golayaal Hanuunin Dadweynaha. Golayaashaasi waxay sahleen oo suurto geliyeyen in hawshii kicinta, hanuuninta, iyo abaabulka heer sare gaarto, markii dadweynuhu helay xarumo mug weyn oo qaada dadkoo dhan, oo ay si sahlan ugu dhageysan karaan hanuuninta ayagoo fadhiya, halkii horay meel gegi bannaan iyagoo taagan lagu hanuunin jirey, iyo qolal shirarka lagu qabto iyo xafiisyo guddiyadu ku fuliyan hawlahooda.

Qaabkaas cusub ee hanuuninta waxaa la dhashay iyadoo la badiyey guddiyada dadweynaha iyo noocydoodii. Halkii horay uu ka jirey guddiga dadweynaha ee Xaafaddu, waxaa kaloo la dhisay guddi shaqaale ee xaafadeed, Guddi dhallinyaro ee xaafadeed, guddi ha-ween ee xaafadeed oo midkiiba ka kooban yahay 15 xubnood. Saddexdaas guddi waxay hoos imaanayeen Guddiga dadweynaha ee Xaafadda oo isaga xubnihiisu isugu jireen shaqaale, dhallinyaro, Haween, odayaal, iyo ganaesato yaryar. Guddiga Dadweynuhu wuxuu masuul ka ahaa Maamulka Xaafadda oo dhan, xag abaabul, dhaqaale, kicin, hanuunin, Iskaa wax qabso. Guddiyada shaqaalaha, dhallinyarada iyo haweenku waxay si gaar ah u qaabilsanayeen kicin, hanuuninta, hawlgeinta kooxaha ay ka wakiilka yihii, iyagoo islamarkaas hawlahu ku taageeraya guddiga dadweynaha ee Xaafadda:-

Xubnaha guddiyadaas waxaa magacaabi jirey XXD ayadoo la tixgeliyey xulka iyo talada uu soc jeediye Wakiilka XXD ee Xaafadda. Sharuudaha xubnaha guddiyadaas lagu xuli jirey waxaa ka mid ahaa taageeridda kacaanka, hawlkarinimo, iyo daacadnimo. Guddiga Dadweynaha ee Xaafadda waxaa guddoomiye u ahaa wakiilka XXD. Guddigu fadhiyadiisa marka uu uga dodo hawlahu iyo shaqooyinka markaas taagan waxaa la gaa-ri jirey go'aan ku dhisan inta badan. Wakiilka XXD waxaa la siiyey awood uu wax uga qabto arrimaha deg-degta ah oo u baahan go'aan qaadashadiisa iyo inuu ka hortago waxyaalaha qaladka ah. Waxaa lagu dadaali jirey in wakiilka XXD noqdo qof xilkasnimo, daacadnimo, iyo garaad siyaasadeed oo fiiqan leh. Wakiilkii la arko inuuusan hawshii sidii la rabay u gudanayn waa la-qaadi jirey wakiilnimada.

Abuuridda Golayaasha cusub ee hanuuninta dadweynaha ee xaafaduhu, sidaan horay u soo sheegnay, waxay la timid tiro iyo tayo cusub ee kicinta, hanuuninta iyo abaabulka ah. Guddiyada bulshada oo kala duwan ka sokow, waxaa durbadiiba halkaas laga abaabulay ciidanka Guulwadaayaasha oo ka dhashay dhallinyaro, Ma-

gaala-Madaxda Muqdisho, oo loo furay tababar ga-raakooda siyaasaceed kor loogu qaadayey kuwaas oo la xiriiray ololihii hirgelinta Hantiwadaagga Cilmiga, dhallinyaradaas tababarkii la siin jirey waxaa ka mid ahaa ka qaybgalka fulinta Iskaa wax u qabso, dhismaha nadaafadda, ilaalinta nabadgelyada kacaanka, go'aamada GSK iyo daruus Hantiwadaag ah. Maalmihii hore waxaa lagu magacaabi jirey «Daljireyaal». Dhallinyaradaas oo tiradoodu ahayd kumanyaal, markii tababarradoodiis xaa fadda uga socday ay dharmaysteen, waxaa tababar midaysan oo 2 todobaad ah looga furay Xaafadda Waaberi ( oo haatan ah Degmada Waaberi ) ee Muqdisho, bishii Sebtember dabayaqa-deedii iyo bishii Agoosto horraantedii 1972kii. Marka ay tababarka u socdaan ama ka soo baxaan waxay wad-docyinka magaaladda ku dhexyaal ku mari jireen huu gun iyo heeso kacaan ah oo ay ku amaanayeen Kacaanka, kuna ballanqaadayeen itay difaaca kacaanka naftooda u hurayaan, iyo handadaad iyo guulguulid ay Kacaandiidka u jeedinayeen. Heesaha ay ku heesi jireen waxaa ka mid ahaa «Guulwade Siyaad», iyo heeska «Wahsan mayno ka waaban mayno hawsha warankaya-ga ka weecin meyno cacawga» oo markaas soo baxay.

Tababarkaas markuu dhamaaday waxaa lagu xiray Xaafadda Boondheere (haatan degmada Boondheere) ee Muqdisho, taariikhdu markay ahayd 19kii Agoosto 1972kii. Dabbaaldeggii lagu xiray oo ay ka soo qayba-leen in ka badan 20.000 oo ah dhallinyaradii «Daljireyaalka» ahaa, waxaa ka soo qaybgalay oo xiray Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Guddoomiyaha GSK, oo hal-kaas ka jeediye khudbad qimo weyn lahayd. Jaalle Siyaad, goobtaas ayuu ugu bixiyey Dhallinyarada Maga-ca la yiraahdo «Guulwade», ka dib markuu arkay iyagooy ku heesaaya heeska la yiraahdo «Guulwade Siyaad» islamarkaas ay yihii kuwii difaacyey guusha Kacaanka. - Diyaarinta Dhallinyaradaas guulwadaayaasha ah oo uu diyaariyey XXD, ma ahayn mid meel maran ka dhalatay, hase yeeshaa, waxay ahayd jawaab dhallinyarada Soomaaliyeed ay ka jawaabayso baaqaqii Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Hoggaamiyaha Kacaanku, uu u soo jeediye Dhallinyarada Soomaaliyeed bishii Disember 1971kii. markii uu calanka Kacaanka ku guddoonsiiyey garoonka Kubadda Cagta ee Banaadir dhallinyarada, baaqaas oo ahaa «Calankii Kacaanka waxan u dhiibnay dhallinyarada inay ka daafacaan kacaandiidka gudaha iyo Imberyaaliyadda».

Ka dib markii imberyaaliyadda iyo daba-dhilifyada guduhu dhawr jeer isku dayeen shirqollo ay kacaanka ku af-gembiyaa hase yeeshaa ay ku guuldaraysteen dhiifoomaanta xooggagga Kacaanka darteed. Isla waqtii-

gaas waxaa Golayaasha Hanuuninta laga aasaasay Ubax Kacaanka Oktoobar, oo ka kooban carruurta da'docda u dhexayso 6-14 sano. Guddiyadii waqtigaas dhashay waxaa ka mid ahaa wakiil siyaasadeed ee shaqaale oo lagu mageaabay shaqaalaha hay'ad kasta dhexdooda, wakiilkaas oo ku xirnaa XxD qaabilساناana arrimaha kicinta iyo hanuuninta Shaqaalaha. Kicinta, hanuuninta, iyo abaabulka dadweynuhu kuma koobnayn oo keliya magaalada Caasimadda ah ee Muqdisho, inkastoo xoogga kaadarka iyo qalabka borobagaandu iyada u badnaa, had iyo jeerna tijaabo iyo dhaqan gelinta qaababka cusub ee kicinta iyo abaabulka dadweynaha iyada lagu horraysiin jirey, ka dibna markay meel mar noqdaan waxaa loo gudbin jirey dalka intiisa kale. Kicinta iyo abaabulka dadweynuhu wuxuu ka socday dalka oo dhan inkastoo uusan u habaysnayn una xoog badnayn sida magaalada Caasimadda ah oo uu ka furnaa XxD, Xafiiska Xiriirkha Dadweynuhu laamo kuma lahayn Gobollada iyo Degmooyinka Dalka. Hawlaha kicinta iyo abaabulka dadweynaha waxaa hoggaamin jirey guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka iyo guddi hoosaadyo ay sameeyeen oo lagu magacaabi jirey Guddiyada Hanuunita Ummadda oo ka kooban shaqaale, Haween, dhallinyaro iyo odayaal. Guddiyada Kacaanka ee Gobolladu waxay tilmaamo iyo talooyin ka qaadan jireen sida XxD hawlihiisu uga waday Muqdisho, ka dibna sidaa si u eg bay u hirgelin jireen.

Iyadoo ay ugu wacnayd go'aamadii iyo tillaaboo yinka Kacaanka oo sida isdaba joogga ah uga soo baaayey GSK, Golaha Dawladda iyo Mashaariicda dib-udhisidda dalka oo si xoog leh u soeday, kicinta, xiisaha, xamaasadda iyo halganka dadweynuhu wuxuu gaaray heer aad u sarreya. 1971kii dabayaqaadeedii iyo 1972kii dhexdeedii, intii u dhexaysey kaasoo aan oran karno, waa heerkii ugu sarneeyey ee xamaasadda kacaaneed ee dadweynaha gaartay ilaa Maanta. Shucuurtas kacaaneed oo sarreysay darteed, waqtigaasu wuxuu ahaa waqtigii ay soo baxeen heesaha, gabayada, iyo halku-dheg-yada Kacaanka ah badankoodu. Waxay ahayd markii dadweynuhu wada bartay heesaha bulhaanka ama lagu wada heeso kuwaasoo ay ka mid yihjin, «Guulwade Siyaad» oo noqday baaqa kacaaneed oo laysku garto, «Dib haw laabarinay aan ubax dushiina ku daadinee Daa, in abidkayee» «Ka wahsan mayno hawsha, warankayaga ka weecin mayno cadawga». Halku-dheg-yada shaqada marka la qabanaayo «Daawanaayow waa dalkaagii»; «Waarimeysidee waddanka u dhimo», kacsanaanta iyo ficiladii kacaaneed ee dadweynuhu ku shaqaynaayey waxaa tusaale u ah oo si finean u fasiraaya ka qaybgalkii dadweynaha ee dhismihii Hoteelkii Jubba oo cadawgu gubay. Lacagtii loogu talogalay in lagu dhiso waxay

ahayd 32 Malyun oo shilin, hase ahaatee wuxuu ku kaceay markii la dhammeystiray 16 Malyun oo shilin. Mashaariicdaas kale oo tusaalada loo soco qaato, markaan ka hadlayno awooddii iyo wax qabdkii dadweynaha xoogsatada ahi muujiyey waqtgaas, wuxaa weeye dhismihii xarunta Carwada Wadcaniga ah, taasoo lagu dhisay 24 Maal mood keliya iyo Hoteelka Taleex. Mashruucaas oo haddii wax kasta loo dhammeeyo, oo si caadi ah loo dhiso qaadan lahaa ugu yaraan hal sano:-



Xilkii Xafiiska Xiriirkha Dadweynaha oo la kordhiyey

Bishii Maarsa 1972kii, waxaa GSK soo saaray sharci lagu kordhiyey xilkii iyo awooddii XxD. Sharciagaas wuxuu ugu daray xilkii xafiiska horay u saarnaa inuu u gogol xaaro sjidii loo labuuri lahaa ururro bulsko, (shaqaale, dhallinyaro, iyo haween), inuu hawlihiisa hanuuninta, kicinta iyo abaabulka dadweynaha wada gaarsiiyo dalka oo idil, iyo inuu tababaro kaadar siyaasadeed: Isla markaas waxaa la ballaariyey qaabkii dhismaha XxD, waxaana lagu kordhiyey waaxihii horey u jirey ee kicinta, shaqaalaha, xiriirkha dibedda, baarista iyo borobagaandu, waaxyo cusub sida waaxda dhallinyarada, Gulwadayaasha, Haweenka, Tababarrada iwm. Madaxda laamahaasi waxay hawsha u fulin jireen si guddi ahaan ah. Wuxaana la xoojiyey tababarradii kaadar siyaasadeed iyadoo lala kaashanaayo Dalalka Hantiwadaagga ah ee Midowga Soofiyetti iyo «GDR». Siidaas darteec, 1972kii dhexdiisii waxa suurtgalay in gobollada iyo degmooyinka dalka oo dhan (16 gobol, iyo 79 degmo waqtigaas) la geeyo wakiillo Xafiiska Xiriirkha Dadweynaha. Waqtigaasu wuxuu abaa markii kicinta iyo hanuuninta dadweynuhu ay ka gudubtay heerkii ti-jaabada oo caasimadda Muqdisho ku ekaa oo ku baahday dalka oo idil:-

Muddo sannad ah ka dib, gobollada iyo degmooyinka waxay soco gaareen Muqdisho xagga kicinta, iyo

abaabulka dadweynaha. Maadaama, ujeed dada kacaanku ka lahaa kicinta, kor u qaadidda garaadka siyaasadeed iyo abuubulka dadweynaha ay ahayd in maamulka dadweynaha lagu wareeqiyo. Sannadkii 1972kii bishii Juunyo, GSK wuxuu soo saaray sharci lagu magacaabo sharciga Dawladaha Hoose, sharcigaas oo dhaqan galay 21kii Oktoobar 1972kii, waxaa lagu dhisay guddiyo. Kacaan oo cusub oo gobollada iyo degmooyinka iyo Tuulocoyinka. Guddiyadaas oo xubnohoodu ka koobnaayeen shaqaale, dhallinyaro, Haween, beeraley, oo kooxaha kale ee bulshada ka tirsan. Guddiyadaasi waxay beddeleen guddiyadii gobollada iyo degmooyinka laga dhisay dhalashadii Kacaanka; kuwaasoo xubnohoodu ka koobnaayeen afar sarkaal oo Ciidammada qalabka sida ka tirsan kel.ya. Guddiyadaas xubnaaka ka qayb galay waxaa laga soo xulay dadweynaha xoogsatada ah kuwii ugu halgan dheeraa, ugu hawlalarsanaa, waddaninimo, kacaannimo iyo jacayl mabda'a hantiwadaagga ah muujiyey. Wakaana xulkaas soo samayn jirey oo u soo jeedin jirey GSK Xafiiska Xiriirkha Dadweynaha. Guddiyada Kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka iyo tuulocoyinka, waxaa gacanta loo gelyey awood dawladeed oo heerkooda ah, ha noqoto samaynta miisaaniyadda, qorshaynta mashaarijeda, arrimaha bulshada, nabadgelyada iwm. Guddiyadaas waxay lahaayeen guddi hoosaadyo u qaabilsan hawlaha kala duwan kuwaas oo kala ahaa guddiga Nabadgelyada, Guddiga dhqaalaha, Guddiga bulshada, Guddiga hanuuninta, Guddiga dhexdhexaadinta iyo Guddiga Hantidhawrka. Guddiyadaas kacaanka oo gobollada iyo Degmooyinku waxay dhisnaayeen Oktoobar 1972kii ilaa Sebtembar 1976kii. Mudadaas waxay soo qabteen hawl qimo leh in kastoo dhaliilo jireen, dhaliilahaas waxay ka iman jireen xubnaha aan xulashada ku imaan ee ku yimid xafiiskooda magaciisa. Taas maenahedu waxay ahayd in Maamulayaasha Laamaha kala duwan ee Dawladda ee Gobollada iyo Degmooyinka ay ka mid noqon jireen Guddiyadaas, iyadoon loo eegin keebaa kacaan ah, keebaanse ahayn. Taasina waxay keeni jirtey in hawlaha kacaannimadocda iyo hawlarnimadoodu lidato oo halkaas ku soo galay guddiyada, isagoo madaxa ku haya xilkii la saaray oo ahaa in loo gogol xaaro sidii ururro bulsho ku dhalan lahaayeen, X.X.D, wuxuu si gaar ah xoogga u saari jirey tababaridaa iyo xulidda kaadirka ururradaas iyadoo aqoon isweydaarsi, tababarro cilmi ah, kooqashooyin aqoon kororsi oo gobollada dhexdooda iyo gobollada caasimadda ah, iyo tababarro calalka Hantiwadaagga ah lagu siinaayo. Guddiyadii ku-meelgaarka ahaa ee shaqaalaha, dhallir-

yarada iyo haweenka oo ka dhisnaa meelaha degaanka 1973kii. 23kii Luulyo, Madaxweynaha GSK Jaalle Mamed Siyaad Barre wuxuu soo saaray wareegto awood u siinayk X.X.D inuu guddiyo shaqaale oo 7 xubnoood ka kooban uu ka dhiso meelaha wax soo saarka iyo hawlaha dawladda iyo shirkadaha gaarka ahba, kuwaas oo lagu beddelay wakiilladii hal-kalka qof ahaa oo horay uga dhisnaa hay'adahaas. Guddiyadaas cusub oo ahaa hal-kii uu ka soo unkamay xirijrka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Socmaaliyeed ee maanta dhisan, waxaa la siiyey waajibaad iyo xaqqaq ballaaran kuwaas oo ay ka mid ahaayeen u halganka tacab - kordhinta, difaaca kacaanka, ka qaybgalka maamulka iyo ilaalinta danaha shaqaalaha. Taas waxaa ku xigtey in guddiyada dha'linyarada oo iyaguna deggaanka ku koobnaa laga dhisoo goobaha shaqaada iyo waxbarashada. Arrimaha abaabulka Shaqaalaha, dhallinyarada iyo Haweenka iyo guddiyadooda waxaa hoggaamin jirey waexihii ururradaas qaabilsan oo X.X.D. Maalinba maalinta ka dambaysa kacaanku wuxuu sii ballaari-naayey dimoqraadiyeynayey Maamulka iyo Siyaasadda. 1974kii waxaa la dhisay guddiyo Garsoorka dadweynaha oo ka kooban Shaqaalaha, Dhallinyarada, Haweenka iyo kooxaha kale ee waddaniyiinta aki. Guddiyadaas xilkoodu wuxuu ahaa in ay garsoorayaal ka noq-Maxkamadaha dalka heer kasta. Looma baahnayn in qofku garyaqaan yahay, waxaa loo baalnayn oo keliya inuu kacaan iyo daazad yahay si uu ula dagaallamo eexda, laaluushka, iyo biroqraadnimada ka jirtety Maxkamadaha. Labo xubnoood oo garsoorayaasha dadweynaha ah iyo hal garsoore oo caadi ah ayaana garta qaada, go'aanka wuxuu u dhaca dhinaca inta badani isku raedo. Arrintaas waxay dhashay guul weyn, iyo kalsooni xagga caddaaladda. Garsoorayaasha dadweynaha waxaa dikreeto ku magacaaba Wasiirka Garsoorka, waxaa soo xula oo u soo jeediye X.X.D.

Waxa kaloo mudan halkan in lagu soo qaado, marka laga hadlaayo dimoqraadiyenta awoodda maamulka iyo Siyaasadda in GSK sharcii ka dhigay shaqooyinka aan u baahanayn shahaado dugsi iyo farsamo, kuwaasoo imtixaan loo galo, in guddiyada xaafadaha ee shaqaalaha, dhallinyarada, iyo Haweenku ay bixiyaan oo si caddaalad iyo abaalmarin ah ugu qaybiyaan dadweynaha kuwa ugu kacaansan oo shaqada la'. Waa laga maamnuucay hay'adaha Dawladda inay bixiyaan shaqooyinkaas. X.X.D ayaa ilaalii jirey in guddiyadu shaqo bixinta s' caddaalad aki u maamulaan. Arrintaas guul baa iyadana laga gaaray oo waxay baabi'isay Musuqmaasuqii, eexdii, iyo laaluushkii lagu maamuli jirey shaqo bixinta waagi hore.

Xafiiska Xiriirkha Dadweynaha magacii baa laga beddeley waana la xoojiyey.

Sannadkii 1974kii, GSK markuu arkay in hawlihii kicinta iyo abaabulka dadweynuhu ay sidaas u ballaarteen, Xafiiskii Xiriirkha Dadweynaha magaciisii waxaa loo beddelay Xafiiska Siyaasadda MGSK, waxaa la sii kordhiyey Masuuliyadiisii iyadoo xilkiisii hore loogu daraayo inuu diyaariyo kaadar Xisbi iyo kii ururrada Bulshada oo uu horay gacanta ugu hayey, xilkaas oo runtii ahaa mid aad u culus. Si xilkaas cu-



sub ,yo hawlihi hore oo aad u ballaartay Xafiiska Siyaasadda MGSK u guto, bishii Abriil 1974kii waxaa la xoojiyey dhismihiisii iyadoo lagu soo kordhiyey hawliwadeenno horusocod ah oo aqoon sare leh, islamarkaasna Madax loogo dhigay Jaalle Cabdulqaadir Xaaaji Maxamed, oo ka tirsan GSK. Magacaabidda Xafiiska loo magacaabay Xubin ka tirsan GSK waxay ka mid ahayd xoojinta iyo awood siinta XSMGSK si ay u fuliyan hawlihiisa oo had iyo jeer dibusocodka iyo biroqraadiyadda hor istaagayeen.

Xafiiska Siyaasaddu wuxuu bilaabay inuu xooj.yo qaababkii abaabulka iyo hanuuninta dadweynaha wuxuuna qorsheeyey tababarro fara badan oo isdaba joog ah oo u kala qaybsan kuwo lix bilood ah, iyo kuwo hal sano ah oo loo diri jirey dugsiyada Xisbiyada, Shaqaalaha, iyo Dhallinyarada ee Midowga Soofiyetti iyo Jarmalka Dimoqraadiga ah. Kuwo 3 bilood ah, 2 bilood ah hal bil ah, 15 beri , iyo 7 beri ah oo laga qabanqaabin jirey dalka gudihiisa. Intaas waxaa dheeraa hanuunin joogto ah oo toddobaad walba, iyo maalin walba la siinayey Shaqaalaha, dhallinyarada, Haweenka iyo dadweynaha. Tusaale ahaan, Shaqaalaha waxaa dersi Hanuunin ah lagu siinaayey meesha shaqada toddobaadkiiba maalinta Talaadada ah, maa-

ntuu dhashay Kacaanka. Sidoo kale meelaha deggaanka Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Haweenka mid waliba maalin baa la siinaayey hanuunintaas. Intaas waxaa weheliyey kulammada joogtada ah ee guddiyada shaqaalaha, dhallinyarada, haweenka, iskaashatooyinka, guulwadayaasha, ubaxa Kacaanka Oktoobar, Isboortiga, Fanka iwm ay had iyo goor yeeshaan oo ay uga doodaan arrimaha horumarinta dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshada ama ay ku qaataan aqoon-isweydaarsi iyo duruus hanuunin ah. Hawlahaa taariikhiga ah oo dadweynaha kacaameeyey, oo la oran karo dugsi kacaan ah bay u ahaayeen dadweynaha waxaa weeye hawlihii Iskaa-wax u qabso oo ay ka mid ahaayeen dhismayaashii faraha badnaas, ololihii ciribtirka qoris iyo akhris la'aanta iyo ololihii horumarinta reer-miiga oo aan dadweynaha Soomaaliyeed u kala harin Miyi iyo Magaalo, iyadoo la fulinaayo tusaalihii Macallinka Kacaanka, Jaalle Siyaad oo ahaa «Haddaadan aqoon baro, Haddaad taqaanna bar». Ololihii bacaad-celinta iyo kii raridda iyo dejinta dadweynihii abaarto waxyeellaysay sannackii 1974-1975kii. Ololayaashaasi iyu kuwa kale oo aan tiradooda la soo koobi karin waxay ahaayeen imtixaan adag oo Ummadda Soomaaliyeed la soo gudboonaaday oo caawdaga iyo kuwa niyaddodu dacifka tahay oran jireen «War waxaani ma suuragalayaane, yaan dadka la luggoyn», hase yeesh ee loogu guuleystay si fudud, islamarkaasna Ummadda Soomaaliyeed ay ku heshay ammaan iyo aqoonsi caalmi ah. Ololayaashaas waxay bisleeyeen dadweynihii waxay gaarsiiyeen heer aan qofku uusan dib uga soo noqon karin, heer uu aamminsan yahay in uu dhisay dalka heer uu sharaf gaaray, heer uu aqoon iyo waayo aragnimo helay, heer uu eed galay, heer uu kumanyaal tartankii la galay oo kaga badiyey, heer uu abaalmarin helay, heer uu goostay in uu ku socdo tubta toosan ee kacaanka. Halgankaas qaraar oo naf-huridda ahaa dadkii ka soo qaybqaatay, haatanna weli sidii uga qaybqaata waxay u badnaayeen Shaqaalaha, Beeraleyda, Dhallinyarada, Haweenka iyo Ciidamada Qalabka Sida. Kulligood marka laysku geeyo waxaa markaasta qaybta libaax qaadan jirey HAWEENKA. Haweenku qaybta ay ka soo qaateen dhismaha dhaqaalaha, siyaasadda, iyo bulshada mudadii Kacaanku jirey waxay ku qoran tahay, buugga kacaanka boggiisa koowaad. Marka aan ka hadlayno ololayaashii iyo hawlihi Iskaa wax u qabso ma jirto koox la tartami kartay Haweenka inkastoo kooxaha kalena ay qayb ammaan mudan ka soo qaateen. Taas waxaa muujinaaya billaddii qalinka ahayd oo Guddoomiyaha GSK, Jaalle Siyaad siiyey Haweenka, iyo hadalkiisii ahaa «Haweenku waa xoog aan maangaabku garan karin», goob kasta oo laysugu

yimaaddo shaqo ha ahaato, ama hanuunin ha ahaato, ama bannaanbax ama dabbaaldeeg ha ahaato mar kastaba waxaa ku badnaa oo ugu halgan diirranaa haweenka. Dibusocodku, waxay oran jireen, «kacaanku dad ma haysto ee wuxuu haystaa haween iyo carruur.» Ka qaybgalka dadweynaha ololayaashaas iyo hawlahaa Iskaa wax u qabso waxaa qorshayn jirey oo hoggaamin jirey Xafiiska Siyaasadda MGSK (markii horena XXD).

XSMGSK isagoo fulinaayey tilmaamihii GSK, wuxuu ku dadaali jirey in dadweynaha halgamaayey la kala aqoonsado qofka sida fiican u shaqeyey, qofka caadiga ah, midka aan shaqayn, kan kacaandiidka ah iwm. Isla markaasna la dhiirrigelinayo dadka mudan; dhiirigelintaas oo wajijo badan lahayd. Haddaba geesinnimo gelinta waxaa ka mid ahaa ammaan gaar, ammaan shir laga sheego qof, ammaan warqad loo qoro, shahaado sharaf heer degmo, shahoodo sharaf heer gobol, shahaado heer qaran, billado heer qaran ah ilaa dahab gaarta. Waxaa kaloo abaalmarintaas ka mid ahaa in shaqo la siiyo dadka tartanka halganka hawlahaa iskaa wax u qabso iyo abaabulka siyaasadda kacaanka ugu fiican oo aan shaqo hayn, kuwo shaqada haya oo qaarkood darajooqin la dallaciyo ama jago sare lagu magacaabo kacaannimadooda darteed. Ku manyaal qof baa sidaas abaalmarin ku helay, intii kacaanku jirey.

Hawlihii waaweynaa ee Xafiiska Siyaasadda GS-SK oo qabtay waxaa ka mid ahaa asaaskii Machadka Culunta Siyaasadda sannadka 1975kii, iyadoo lala kaashaday dalka Hantiwadaagga ah ee Midowga Soo-fiyeti. Abuuridda Machadka Culunta siyaasaddu waxay ahayd arrin muhiim ah marka la eego baahida weyn ee Dalkeennu u qabo kaadar ku hubaysan fikradka hantiwadaagga cilmiga ah. Boqollaal shaqaale, iyo dhallinyaro ah oo lagu tababaray Machadka ayaa hawlahaa Siyaasadda iyo dhaqaalaha maanta wax ka wada, kuwa kalena wax bay ku bartaan. Machadka waa lagu dhigaa Tabararro 6 bilood ah, kuwa hal sano ah, iyo kuwo labo sano ah, waxaana lagu dhigaa Hantiwadaagga Cilmiga ah. falsafadda Hantiwadaagga cilmiga iyo dhaqaalaha Siyaasadeed iwm.

#### HAWLIHII XSMGSK KA QABTAY XIRIIRKA DIBEDDA.

Xafiiska Siyaasaddu ilaa markii la bilaabay oo la oran jirey Xafiiska Xiriirka Dadweynaha, wuxuu uga wakiil ahaa GSK, xiriirka Xisbiyada iyo ururrada bulshada oo waddaniga iyo caalamiga ah. Bilowgii Xafiiska isagaa hawlahaa xiriirka dibedda ee axsaabta Hanti-

wadaagga, kuwa horusocodka iyo ururrada bulshada si toos ah u waday, hase ahaatee, markii ay dhismeen laamaha shaqaalaha, dhallinyarada iyo haweenku iyagaa xiriir iyo wax wada qabsi la yeeshay ururrada bulshada oo iyaga ku aaddan. Muddadaas gudaheeda Xafiiska Siyaasaddu wuxuu ka soo hooyey, dhinaca xiriirka iyo wax wada qabsiga ururrada bulshada aaduunka guul iyo is-afgarad wacan. Taas waxaa u tusaale ah in ururrada bulshada ee horusocodka ah iyo caalamiga ah oo ay ka mid yihij Xiriirka Ururka Shaqaalaha Aoduunka (WFTU), Xiriirka Dhallinyarada Dimoqraadiga ah ee Adduunka (WFDY), Ururka ar-dada Adduunka (IUS), Ururka Dhaqdhqaaqa Dhallinyarada Afrika (PAYM), Ururka Ardada Afrika (AASU), Ururka Haweenka Afrika, Ururka dhallinyarada Carabta, Ururka Ardada Carabta, iyo Ururka Haweenka Carabta, oo aan ka mid nahay guddiyadooda fulinta ama xoghayntooda joogtada ah. Waxaa kaloc-daliil cad ah ka qaybgalkii iyo kaalintii waacnayd oo ay dhallinyarada Soomaaliyec ee qaadatay festifaalkii 10aad oo lagu qabtay Baarliin, Dalka jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Jarmalka ah, sannadkii 1973dii, Shirki Xiriirka Dhallinyarada Dimoqraadiga Adduunka ee cambaareynta Midabtakoorka ee lagu qabtay Muqdisho, bishii Abril 1974kii; shirkaas oo Hoggaamiyaha Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Syaad Dhallinyarada Aoduunka, ku guddoosiiyey billado ururka iyo shirkii Ururka Haween Afrika oo lagu qabtay Muqdisho bishii Abril 1975kii. Waxaa intaas dheer in bisha Luulyo oo soo socota lagu qabandoono Muqdisho Shir Ururka Ardayda adduunka (IUS), oo ku saabsan dib u soo noolaynta dhankaa waddaniga ah, iyo in shir kale ee xiriirka dhallinyarada Dimoqraadiga Adduunka (WFDY) oo ku saabsan degaanka lagu qabandoono Muqdisho bisha Nofember 1977ka. Shirkaas oo daba jooga heshiisyadii Xafiiska siyaasadda MGSK, la galay ururradaas. Waxaa kaloo jirey in Xafiiska Siyaasaddu uu had iyo jeer uu ka qayb-geli jirey Shirka iyo kulammada caalamiga ah iyo wddaniga ee Dibedda, sidoo kale uu dalkeenna ku soo dhaweyn jirey wafuud iyaga ka soeda si talo iyo taageero markasta laysku weydaarsado.

#### DAGAALKII AYDOLOOJIGA AHAA OO KACAANDIIDKU KALA HORJEESTAY SOCODKA KACAANKA

Weli kama aynu hadlin dhibaatooyinkii ka horimaanayey isbeddel kacaan ah oo socdey, gaar ahaan xagga kicinta, iyo abaabulka. Wase hadal ma doonto, in dhibaatooyin badan; ay ka hor imaaneyeen hawshaas. Wax yar haddii aan ka taabanno, kacaan-diidka gudu-

hu isagoo cuskanaya imberyaaliyadda adduunka tab iyo xeelo, xoog iyo xoolo midna u lama har. n sidi uu dabka kacaanku oogay u bakhtiin lahaa. Shirqoollada habayasn iyo curyaaminta dhaqaale ka sokow, kacaandiidku wuu xuu isticmaalay kumanyaal wadiiqo oo brobagaando ah oo uu dadweynaha ku duufsanaayey ama ku shaki gelinaayey. Rajciyaada gudaha iyo imberyaaliyadda weligood hubka ugu waxtar roon oo ay isticmaalaan, gaar ahaan dalalka soo koraaya oo garaadkooda siyaasadeed ee dadweynuhu hooseeyo, waa diinta iyo qabiilk, iyagoo dadweynaha ku beer laxawsanaaya in Hantiwadaaggu yahay dijn la'aan, iyo in qabiilk yahay wax lagama maarmaan ah, sidaas darteedna aan qofku kacaanka faaiido ka heleyn haddii aan hoggaanka kacaanka qof qabiilkiiisa ahi ku jirin. Brobagaandada dibusocodka ah waxaa kaloo ka mid ahaa in dadka sida dheeraadka ah uga qayb-galayey hawlaho dhismaha dhaqaalaha iyo bulshada lagu oran jirey «Lacag siyaado ah miyaa lagu siinayaa, yaase kuu aqoonsan hawshaa aad qabanaysid, maxaad iswaal-ka iyo faataadhugta kugu wata». «Taas waa istus-tus iyo ha lagaa sii sheego». «Waa dambi in haweenku guri-gooda ka soo baxaan ama ragga dhex galaan». «Ninka waa ka furmaysaa haweeneydu haddii ay Iskaa Wax U Qabso iyo Hanuunin tagto». Waxay kaloo borobagaando xun ka fidin jireen GSK iyo Ciidammada Qalabka Sida, waxay oran jireen «Askar kacaan hantiwadaag ah dhali-ka lama arag, waa fashiisto dalka xoog ku qabsatay», «waa jaahiliin kabo weyn, si ay wax u wadaanna garan maayaan», iyagoo ujeedadoodu ahayd in GSK oo ka-caffa hoggaaminayey iyo dadweynaha ay isku diraan, oo Kacaanku kufo.

Hadalladaasi waxay ahaayeen borobagaandadii kacaan-iiidka. Kuwaas sidaas u hadli jirey oo had iyo jeer shaqada ka dhigan jirey la dagaallanka Kacaanka iyagoo daba jooga dhiigmiiradkii iyo sadkii dheeriga ahaa oo ay waayeen, ama imberyaaliyaddu u soo kirey-



satay waxa lagu magacaabay Afmiinshaar. Afmiinshaar radu waxay hor istaagi jireen, oo war ama fasi-raad xun ka faafin jireen go, aamada GSK, iyagoo leh: «Waar miyey waasheen, maantay ugu darrayeen wallee waa go'aankii ay ku kufi lahaayeen». «Lama fulin karo go'aankan», kaas markii la hurgeliyo, oo mid ka soobaxo sidoo kale bay oran jireen. Hase ahaatee, afmiinshaarradaasi marnaba kuma guuleysan dicaayaddii xumayd oo ay mar kasta faafin jireen. Dadweynaha Kacaanka ihi marna kama shakiyin dhabbaha kacaanku ku soeday, kalsooniidooda Kacaanka, kacaannimadooda iyo wax qabadkooduba maalinba maalinta ka dambey-sa waa sii xoogeysanayeen, maxaa yeelay waxay arkeen in Kacaanku dhab yahay, uuna samaynaayo isbeddel dhab ah oo dadweynaha dantiisa ah.

Rajciyaddu waxay kaloo dagaal mabaadi' ah ay kala soo horjeedeen hawlilhii Xafiiska Siyaasada iyo hawlwaadeenadiisii, iyagoo diiddanaa dadweynaha la ilbixinaayo iyo fikradaha horusocodka oo lagu dhex faafinaayo. Waxay ku eedayn jireen in Xafiiska siyaasadda doonayo awood dheeraad ah iyo inuu isagu wax kasta fara geliyo. Xafiisku markuu u tilmaamo qala-dka mabdi'iiga ah iyo maamulxumada biroqraadiyada, dibusocodku wuxuu oran jiray «Dadka Xafiiska Siyaasadda ka shaqeyyaa, ma dadka kalay ka waddanisan yihii maxay shaqada dadka kale u fara geliyan». Dagaalka & Dicaayadda kacaandiidka waxaa kaloo ka mid ahaa inay oran jireen «Wakiillada XSMGSK waa seef la boodyo aan waxba hubsan», «waa dad qiiq isku qarinaaya, oo magaca hantiwadaagga inay ku danaystaan raba», «waa dad fikrad shisheeye wata oo aan dhaqanka iyo caadooyinka Soomaaliyeed aan aqoon», «waxay neeb yihii askarta iwm».

Hadalladaas dicaayadda ah waxay ula jeedday rajciyaddu in hawlwaadeenada Xafiiska Siyaasadda iyo dadweynaha ay isku diraan. Xafiiska Siyaasadda MGSK iyo Hawlwadeenadiisa keliya wax kama sheegi jirin, ee waxay sidaas oo kale dicaayado aan sal lahayn iyo raad lahayn uga faafin jireen dadka kacaaminta ah, guddiyada ururrada bulshada, iyo guulwadayaasha. Hase yeeshii, taariikhda ayaa beenisay waxaas oo dhan Dadkii sidaas ku hadli jirey waxay noqdeen kacaandiidyo ka horyimid danaha Ummadda, kuwa badan oo iyaga ka mid ahna waxaa lagu xiray kacaandiidnimo, booli qaran ama dalka waa ka carareen iyagoo diiddan isbeddelka kacaanka oo ka socda dalka iyo inay imboaryaaliyadda ugu adeegaan cad quureed.

Dadkii kacaamiinta ahaa oo rajciyaddu eedaynay-say ayagu ma cararin, booli qaran iyo tuugo ma gelin, imbiryaaliyana uma adeegaan. Bal se, waxay weli u halgamayaan inay xaqiijiyaan dhismaha beesha cusub. Qaar badan baa ku dhintay ama ku lixaad iyo caafimaad beelay halganka kacaanka oo ay ku jireen dartiis. Geesiyaasha taariikhdu qorayso oo ku geeri-yooday iyagoo fulinaaya hawlaha kacaanka waxaa ka m.d ahaa Jaalle Laba Xiddigle Yaasiin Cartan, wakiikii XSMGSK ee Degmada Waaberi ee Muqdisho, iyo Jaalle Axmed Aw Aadan, Wakiikii XSMGSK ee Degmada Hargeysa. Jaallaha hore, Yaasiin Cartan wadnaha ayaa istaagay isagoo dhismo iskaa wax u qabso ah gacanta ku haya. Jaallaha kale, Axmed Aw Aadanna isagoo shir ka hadlaya xidid ayaa maskaxda ka go'ay. Tusaale ayaan u soo qaadannay labadan Jaalle hase ahaatee Jaallayaal kale oo badan baa ku geeri-yooday iyagoo fulinaya hawlaha kacaanka, boqollaal kalena caafimaadkoodii ayaa wax ku gaareen. Hase yeeshee, kacaanku isaguna uu sharfay kacaanyahan-nadii u geeri-yooday iyo kuwo kale oo badan. Shukina kuma jiro in dadka iyo dalku abaalmarinayaan qofkiil sidaas daacadnimo iyo naf-huridnimo ugu adeega.

### III. AASAASKII XISBIGA.

Sidaan horay u soo sheegnay hawlaha kicinta iyo abaabulka dadweynuhu waxay heer sare gaareen sannadkii 1972 ilaa 1974. Muddadaas intii ka dambaysay, inkastoo tayada iyo tirada kicinta iyo abaabulka dadweynuhu ay isbeddel horumar ah samaynaayeen, kaddana waxaad moodaysay in marka laga billaabo 1974kii, koritaanka iyo xamaaska hawlaha abaabulku yaraa. Taasoo ay u sabab ahayd xafiiskii Siyaasadda MGSK oo muggiisii iyo awooddiisii ku yaraadeen inuu hoggaamiyo ururrada bulshada iyo dadweynaha kacaamay oo u baahnaa in socoockooda kacaanka ahi aazu marna hakan ama dhutin. Waxaa halkaas markasta ka muuqatay in aan Xafiisku u hoggaamin karin dhaq-dhaqaqaas dadweynaha sidii habboonayd oo loc baahnaa Xisbi qaababkiisii dhammeystiran yihii oo barnaamij iyo Xeer l-h, sidii V.I. Lenin yirina «Kaalinta dagaalyahanka horseedka ah waxay hirgehi kartaa marka uu hoggaaminaayo Xisbi ku hubaysan aragtida ugu horusocodsan». 1974kii wixii ka dambeeyey hawlaha abaabulka iyo kicintu waxay gaareen heer koritaankoodii uu joogsado waxaanad moodaysaa inay ku wareegesyanayaan garangar. Xaaladdaas waxa kelyia oo lagu daweyn karay wuxuu ahaa Xisbi Kacaan oo hoggaamiya dadweynaha gorodda isla galay. Lagama maarmannmada Xisbiga waqtigaas oo kelyia ma muuqan-

Kacaanku arrintaas maskaxda ayuu ku hayey ilaa maa lintuu dhashay. Tillaabooyinkii faraha badnaa iyo hawlhi kala duwanaa oo lagu midaynaayey dadweynaha garaadkooda siyaasadeed kor loogu dhigaayey, lagu kicinaayey, lagu abaabulaayey, lagu hawlgelinaayey ujeeddadoodu waxay ahayd u gogol xaarid aasaaska Xisbi hoggaamiya iyaga iyo kacaankooda. Jaalle Siyaad, Guddoomiyaha GSK, wax badan buu xafiiskii siyaasadda ku guubaabiyey inuu diyaar.yo duriuftii Xisbigu ku dhalan lahaa. Marmar badanna, laga billaabo sannadkii 1973 ilaa 1975tii, Jaalle Siyaad wuxuu shaaca ka qaaday in dalka laga dhisi doono Xisbi kacaan ah.

Arrintaas waxay dhalisay dood iyo muran, sadex weji leh. Dad waxay ayidayeen Jaalle Siyaad, in Xisbi loo baahan yahay; weliba nooca cusub ah, kaasoc ah midka keliya oo kacaanka hoggaamin kara. Kooxda labaad oo ku hadlaysay afka dibusocodka, waxay qabeen inaan Xisbi loo baahnayn nooc cusub iyo nooc kale midnaba, ee lagu wada Kacaanka Xisbi la'aan. Iyagoo ulajeeddadoodu ahayd in Maamulka Kacaanku gacanta ugu jiro biroqraadiyadda u dhexaysay GSK iyo dadweynaba, ka dibna Kacaanku u baqtiyo si tartiib tartiib ah. Qolada saddexaad, oo ahayd dadweyne daacad ah, laakiin garaadkooda siyaasadeed hooseeysay waxay ku doodayeen «Xisbi looma baahna, maxaa yeelay waa kuwii horey noo qarribay, oo na kala qaybiyey oo dhiigga naga jaqi jirey», iyagoo moodaayey in Xisbiga laga hadlaayo uu yahay sidii kuwii dalka ka jirey Kacaanka ka hor. Dadka diiddanaa Xisbiga waxay oran jireen, «Kaadar lama hayo, ee marka hore kaadar badan ha la diyaariyo». Laakiin doodaas waxaa hortiil mid kale oo leh «Kaadarka laguma diyaarin karo xafiis gudiihiis iyo hawo maran, ee kaadarka waxaa lagu diyaariya Xisbi halgamaya dhexdiis, sidaas darteed, waa in Xisbi nooca cusub ah la dhiso, laguna bilaabo kaadarka j.ra». Dooddaan dambe oo ku dhisnayd fikraddii Jaalle Siyaad, waxaa si xoog leh u taageeraayey Xafiiskii Siyaasadda iyo hawladdenadiisa iyo dadka horusocodka ah. Inkastoo doodaasi socotay, dhawr sababood oo kale ayaa dib u dh.gay aasaaska Xisbiga. Sababahaasu waxay ahaayeen:

1 — Abaartii kululayd ee dhabadheer oo dalka ku habsatay sannadhihi 1974-1975kii.

2 — Xafiiskii Siyaasadda oo kaadar, qalab iyo waayo-arag yari dartood awoodi kari waayey inuu diyaariyo xulkii iyo diiwaangelintii loo baahnaa oo caawin lahaa aasaaska Xisbiga. Ugu dambayntii 1975kii

GSK, wuxuu u xilsaaray guddigiisii u qaabilساناا Arrimaha Siyaasadda iyo Bulshada inuu darso habkii Xisbi Kacaanka hoggaamiya lagu dhisi lahaa ayna soo diyaariyaan dokumentigiisii, sida Barnaamijka, Xeerka iyo IWM. Bishii Juunyo 1976, GSK isagoo tixgelinayey arrimaha kor ku xusan oo idil, wuxuu go'aan ku gaaray in la dhiso Xisbi nooca cusub ah. Waxaan loo xilsaaray Xafiiska Siyaasadda MGSK inuu diyaariyo xubnihii ka mid noqon lahaa, isagoo la kaa-shaanaayey hawlihii iyo xulkii uu horay u sameeyey. Waxaa kaloo durbadiiba la qabtay Guddi qabanqaabinta Shirweynaha Aasaaska Xisbiga. Su'aal adag oo halkaas ka dhalatay waxay ahayd, ayaa ka mid noqon kara Xisbiga? Dadka qaar waxay yiraahdeen, «waa in xubnaha Xisbiga noqdaan dad aqoon leh oo aammin-san mabaadiida Hantiwadaagga Cilmiga ah». Laakiin dadka noocaasi haddii la yiraahdo ha la xusho, waxay noqon lahaayeen tiro aad u yar. Wuxuu talo kale ahayd in loo qaato xubnaha Xisbiga dadka waddaniyiinta ah oo xamaasadda kacaaneed ay ku jirto, oo aan dalka horay eed uga gelin, si buuxda oo aan leex-leexad lahaynna Kacaanka u taageeray. Fikradda saddexaad waxay ahayd in qofkastaba soo galo Xisbiga. Iyadoo la tixgelinaayo duruufta dalka jirta, iyo xeeladaha ay u baahantahay, GSK wuxuu go'aan ku gaaray in ra'yiga labaad la qaato, kuwaasoo ah in waddaniyiinta Kacaanka taageersan loo oggolaado Xisbiga inkastoo uu yahay Xisbi nooca cusub ah.

Ugu dambayntii, waxaa la qabtay Shirwenihii Aasaaska Xisbiga 26kii Juunyo ilaa Kowdii Luulyo; Magaala-Madaxda Muqdisho, Akademiyadda Ciidama-dha Qalabka Sida, halkaasoo ay ka soo qaybgaleen 3000 oo qof, oo ka kala socday 16ka Gobol iyo 82ka Degmo oo dalku ka kooban yahay, iyo hayadaha kala duwan ee dhaqaalaha iyo bulshada. Ergooyinkaas badidoodu waxay ahaayeen dad XSMGSK uu ku soo xulay halgan kacaan, hawlarnimo, daacadnimo iyo jacayl horumarka dalka iyo siyaasadda Hantiwadaagga ah. Waxaa halkaas xilkii ku wareejiyey dadweynaha GSK, taasoo ahayd arrin taariikhii ah oo aan adduunka saddexaad horay uga dhicin. Wuxaa halkaas lagu oggolaaday Barnaamijkii iyo Xeerkii Xisbiga, oo magaciisa loo bixiyey Xisbiga Hantawadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, la doortayna Gole Dhexe oo ka kooban 74 qof, Guddiga Siyaasadda 5 xubnood, iyo Guddiga Dhexe ee Baarista oo 3 xubnood ah.

Shirweynuhu wuxuu u siiyey abaalmarin ahaan xubnihii GSK oo abaabulay Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii, naftoodana khatarta u geliyey danta dadweynaha, si hufanna u soo maamulay, kuna wareejiyey

xilkii dadweynaha billado waddanninimo oo dahab ah. Jaalle Siyaad oo ahaa abaabulaha iyo hoggaami-yaha Kacaanka, oo ummadda u soo qabtay hawl aan cicina la tartami karin, waxaa si gaar ah shirweynuhu ugu gartay in la siiyo billadda geesinimo waddanka, iyo derejada Mileteriga ugu sarraya ee Marshalka. Hase ahaatee wuu diiday darajadii Marshaaalnimada isagoo yiri Anigu Kacaanka uma abaabulin inaan de-rejoojin kororsada». Golaha Dhexe ee Xisbigu kalfadhiisii ugu horreeyey wuxuu ku doortay 17 Hogaan iyo Guddi Kormeer. Kuwaas oo hawlaha joogtada ah ee Golaha Dhexe fulinaaya. Maadaama, Xisbigu kor ka soo dhismay tallaabadii ku xigtey waxay ahayd in bishii Agoosto 1976kii gudiyaal Golaha Dhexe ka socda loo kala diray Gobollada iyo Degmooyinka si ay u qabanqaabiyaan una qabtaan shirarkii aasaas-gamay oo u qalma in xisbiga lagu daro si xubnaha Xisbiga ee Degmooyinka iyo Gobollada joogaa ay u gaaraan tiro urur Xisbi ka dhismi karo.

Ka dib markii loo qaataay Xisbiga dadkii la soo xulay, waxaa mar labaad Guddiyadu laftoodii bishii sebtember 1976kii loo diray Gobollada iyo Degmooyinka si ay u qabanqaabiyaan una qabtaan shirarkii aasaaska ururrada Xisbiga ee Degmooyinka iyo Gobollada. Shirarka marka hore waxaa lagu soo qabtay degmooyinka, waxaana ka soo qaybgalay ergo ahaan xubnihii xisbiga oo degmada joogay, shirarkas waxaa lagu doortay guddigii xisbiga ee degmada. Guddiga Xisbiga ee Degmadu wuxuu ka kooban yahay 8-9 xubnood, wuxuuna leeyahay xafiis fulin oo ka kooban Xoghayaha Guddiga iyo labo Kaaliye. Kaaliyaha 1aad wuxuu Xoghayaha ugu hooseeyaa arrimaha Xisbiga, kan labaadna wuxuu ugu hooseeya arrimaha Maamulka Dawladda. Guddiga Degmadu wuxuu kaloo leeyahay 5 waaxood. Waaxda Abaabulka iyo Aydoloojiyada oo kaaliyaha 1aad ka masuul yahay, waaxda Xoghaynta, waaxda dhaqaalaha iyo iskaashatooyinka, waaxda arrimaha Bulshada iyo waaxda Nabadgelyada iyo Caddaaladda.

Ururrada Xisbiga ee Degmooyinku markay sidaas u dhismeen waxaa la qabtay shirarkii aasaaska ururada Xisbiga Gobolka, shirarkas waxaa ergo ahaan uga soo qaybgalay ergooyin shirarkii degmooyinka laga soo doortay, waxaana lagu doortay guddiyadii Gobollada. Guddiyada Gobolka waxay u dhisan yihii sida kan degmada. Wuxuu keliya oo uga duwan yahay xubnihiiisa caadga ah oo ka badan kan degmada. Xubnaha guddiga Gobolka waa 18-24 meesha ay degmada ka yihii 8-9.

Xubnaha Guddiyada Xisbiga ee Gobolka iyo Degmada, waa dad shaqaale ah oo ku shaqeeyaa aktifiiste, xataa kuwa haya waaxaha guddiga, marka laga reebo Xoghayaha iyo labada kaaliye oo iyagu ah hawladeenno waqtii buuxa shaqeeyaa.

Durbadiiba markii la dhisay ururrada Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka, waxaa lagu xigsiiyey dhismihii unugyada iyo gucunnada, oo laga dhisay meelaha shaqada iyo degaanka. Unuggu wuxuu ka dhismaa meeshii ay joogaan saddex xubnood iyo ka badan. Unugga saddexda xubnood ilaa 50 xubnood ah wuxuu yeeshaa Xoghaye iyo Kaaliye. Unugga xubnihiisa yihii 51 iyo ka badan wuxuu yeeshaa Guddi shan xubnood ka kooban oo leh Xoghaye, Kaaliye, Laan-abaabul, laan Aydoloojiyo, laan Xoghayn ah. Gucunka waxaa laga dhisaa meeshii ay joogaan xubin ilaa laba xuennood oo ay weheliyaan amase ayan wehelin xubin-sugayaal. Unugyada dhismahoodii iyagan a waa la dhaammeystiray.

Dhismaha Xisbiga haddii aan tirakoob ku muujinno waa sida hoos ku qoran:

Tirada Guud ee Xubnaha Xisbiga	Tirada Shaqaale (tacob & hawlahaa labada)	Tirada Beeraleyda dhulka fasha	Tirada Kooxaha kale (dadka aan shaqayn, Ganac. yar iwm.)	Tirada Ragga	Tirada Haween	Tirada Gucumada	Tirada Unugyada	Tirada Guddi Degmo	Tirada Gobol Guddi
12,330	7,896	735	3,699	8,265	4,005	328	487	82	16

#### Sida Guddiyada Gobollada iyo Degmooyinka u fuliyan hawlahaa Xisbiga iyo Maamulka

Guddiyada Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka markii la dhisay bishii Sebtembar 1976kii waxaa la baabiiyey Guddiyadii hore ee kacaanka ee Gobollada iyo Degmooyinka oo ka masuul ahaa hawlahaa dawliga ah ee xagga dhaqaalaha iyo bulshaaca. Kaadarka oo yar dartiis hawlahaa dawliga ee gobollada waxaa loo dhiibay guddiyada xisbiga ee Gobollada iyo degmooyinka. Sidaas darteed, guddiyada xisbiga waxy hayaan labo xil mid xisbi iyo mid dawladeed. Shaqada maamulka dawladda ee Gobolka ama Degmada waxaa ka masuul ah Guddi maamul oo la yiraahdo Guddiga Maamulka ee Gobolka ama Degmada. Guddigaas wuxuu ka koobmaa Xoghayaha Guddiga Xisbiga, Kaaliyaha 1aad oo qaabilsan arrimaha Xisbiga, iyo Kaaliyaha 2aad

oo qaabilsan arrimaha Maamulka, saddexdaas oo marka dhinaca kale laga eego ah Guddiga ama Xafiiska fulinta ee Xisbiga. Waxaa kaloo jira guddiyo hoosaad-  
yo loo magacaabo arrimaha maamulka oo kala duwan.

Beddelaa la beddelay guddiyadii horee kacaanka oo maamulka wadi jirey, waxaa keenay labo sababood. Tan koowaad waa hawladeennada oo yar, taas oo keentay in Xisbiga Madaxdiisii islamarkaa maamulka loo dhiibbo. Tan labaadna waxay tahay, qaabkii hore oo dhismaha guddiyadaas oo ay maamulyaasha laama-ha dawladda oo idil ay ka mid noqon jireen, iyadoon loo fiirin ma kacaanbaa mise maaha, qaabkaas oo dhalliilo yeeshay oo shaqayn waayey, ka dibna la beddelay.

Xisbigu muddadii uu dhisnaa oo ah hal sano, inkastoo uu dhisme ku jirey muddadaas, ha noqoto urur-radiisa gobollada iyo degmooyinka, unugyada iyo gucumada, iyo ururrada bulshada, una la soo kulmay dhibaatooyin badan oo ay ka mid yihii waayo-arag

yari iyo is-hortaag iyo dicaayad dibusocodka gudaha iyo imbiryaaliyadda uu ka dab qaato, haddana Xisbigu hawlo badan buu dalka ka soo qabtay. Maamulkii Gobollada iyo degmooyinka wax badan baa iska beddelay intii Xisbiga la dhisay ka dib, Guddiyada Xisbiga ee Gobollada iyo degmooyinka fadhiyadooda waxay had iyo jeer ku falanqeeyaan oo go'aamo kaga gaaraan arrimaha la xiriira horumarinta dhaqaalaha dalka iyo danaha dadweynaha. Tusaale waxaa u ah abaabulka Iskaashatocyinka iyo tacab kordhinta beeraha oo kor u kacay sannadkii xisbigu dhisnaa. Dagaalka aydoloojiyada ee kacaan-diidku xisbiga ku dicaayadeeynayaan waxa ka mid ah inay yiraahdaan «Guddiyada xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka waxay is-ka gaaraan go'aamo aan sharci ahayn; qofka ay doonaan bay xiraan, ama magaalada baabuur ka saaraan, Xubnaha Guddiyada Xisbigu, waa dad aan waayo-arag

ahayn oo aan aqoon sare lahayn, iyo waxyaalo la mid ah.

Ujeeddada dicaayaddaasi, waa maxay? Ujeeddada keliya oo ay leeyihiin waxaa weeyey in aan waxba isbeddelin, in musuqmaasaqu socdo, in dhagaaluhu fariisto si kacaanka u kufo, hase yeeshee xisbiga, ururada bulshada, eejdamada qalabka sida iyo dadweynaha kacaanka ah ee hakeerihiisa ku wareegsan marna hadal iyo shaki gelin mayso dicaayadda iyo dagaalka naaska ah ee dibusocodku, waana ka lib keeni doonaar dhismaha bulshada cusub ee hantiwadaagga u hayaanka ah.

### Tababarka Hawlwadeennada iyo Xubnaha Xisbiga

Muddada sannadka ah ee xisbigu dhisnaa, arrimaha muhimka ah oo lagu dadaalay in wax laga qabto waxaa kaloo ka mid ahaa Tababarka hawladeennada xisbiga, iyo hawladeennada ururka bulshada. Si kor locgu qaado aqoontooda xisbiyeed, aqoontooda mabda'a, Golaha Dhexe ee xisbigu wuxuu go'aan ku gaaray in bilawgiiba markii la dhisay, hawladeennada & xubnaha waxbarashadaas oo ka kooban duruus jooqto ah iyo tababarro gaagaaban oo dalka gudhiisa iyo dibeddiisaba lagu siiyo. Toddobadii bilood ee dambeysay waxaa la siiyey seminaaro 20-30 berri ah oo ku saabsan waxbarasho xisbiga ee Gobollada 98%, Xoghayeyaasha Degmooyinka 100%, kaaliyeyaasha koowaad ee Gobollada 100%, kaaifiyeyaasha koowaad ee Guddiyada Degmooyinka 30%, Ururada bulshada 60%, iyadoo lala kaashanayo axsaabta dalalka hantiwadaagga ah ee Midowga Soofiyeti, Jamhuuriyadda Jarmalka Dimoqraadiga ah, Jekoslafakiya, Yogoslaasiya, bulgaariya, iyo jamhuuriyadda shiinaha dadka. Intaas waxaa raaca in dhammaan xubnaha xisbiga khasab looga dhigay inay si joogto ah uga qaybgalaan waxbarasho ku saabsan aasaaska iyo tiirarka hantiwadaagga cilmiga oo soconaysay muddo 7 sano ah. Xubnaha xisbiga oo heerkooda tacliintu ka hooseeyo dugsiga dhexe, iyagan waxaa khasab looga dhigay in ay ka qaybgalaan dugsiyo waxbarasho caadi ah oo si gaar ah loogu furay xubnaha xisbiga oo loogu tala galay in tacliintooda la gaarsiyo heerkooda Dugsiga dhexe muddo saddex sano gudaheed ah. Arrintaas waxay na tusinaysaa in Golaha Dhexe ee xisbigu uu garwaaqsan yahay in ay lama huraan tahay in xubnaha xisbiga nooea cusub ihi leeyihiin aqoon fiican, islamarkaasna ay aqoon iyo aaminaad u leeyihiin Mabaadiida Hantiwadaagga Cilmiga ah. Waxbarashada iyo tababarrada noocaas ihi waxay noqon docnaan kuwo joogto ah si xubnaha xisbigu ay u helaan shuruuadaha looga baahan yahay xubinta xisbiga nooqa cusub.



### IV. DHISMAHA URURADA BULSHADA

Sida aan kor ku soo sheegnay, ururrada bulshada, shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Haweenka, dhismahoodu waa ka horreeyey kan xisbiga inkastoo uusan ahayn mid dhameystiran oo xeeraysan. Sannadkii 1975kii iyo 1976kii waxaa la qabtay shirweynayaal shaqaalaha, dhallinyarada iyo Haweenka, guddiyadooda gobollada iyo degmooyinka ay ka soo qaybgaleen oo mid waliba gaarkiisa u yeehay shirakaas waxay ururahu kaga doodeen qaababkooda dhismaha, kor u dhigidda garaadkooda siyaasiga ah, dhaqaale u gaar ah sidii ay ku aburi lahaayeen. iyo siaii ay uga qayb geli lahaayeen dhismaha iyo difaaca kacaanka, hase yeeshee shirarkaas guddiyo dhexe laguma dooran, barnaamijyo yo xeeranna laguma oggolaan, taasoo ay sabab u ahayd xisbigii oo aan weli dhismin. Abaabulka ururrada bulshada heer fiican ayuu joogay xisbiga ka hor, waxayna xiriir iyo iskaashi jaallenimo iyo walaalnimo la lahaayeen ururrada bulshada oo heerkooda waddaniga, gobollada iyo caalamiga ah. Kuwaas oo ay ka mid yihiin Ururka Shaqaalaha Adduunka (WFTU), Dhallinyarada Adduunka (WFDY), ururaka Midowga shaqaalaha Afrika (OATUU), Ururka Ardada Aduunka (JUS), Ururka Haweenka Dimoqraadiga (WIDF), Uururka Dhallinyarada Afrika (PAYM), Ururka Ardada Afrika (AASU), Uururka Haweenka, Afirka, Uururka shaqaalaha Carabta, (ICATU), Uururka Dhallinyarada Carabta, Uururka Ardada Carabta, Uururka Haweenka Carabta iyo Ururrada waddaniga ah ee dalalka hantiwadaagga, kuwa horusocodka dheddooda, Ururrada bulshada oo horusocodka ah oo ka halgamaysa dalalka hantigoosiga ah dheddooda. Ururrada bulshada soomaailyeed door weyn bay ka soo qaateen halganka siyaasadeed ee caalamiga ah, waxaana u tusaale ah inay ka mid yihiin Guddiyada fulinta iyo xoghaynta ururradaas heer Gobol iyo heer Caa-la-ahba.

Iyadoo, la fulinaayo go'aankii kalfadhigii saddexaad ee golaha dhexe XHKS, oo la qabtay 4-16 janaayo 1977ka oo ku saabsan dib u habaynta dhismaha ururada bulshada, waxaa dhaqso loo abaabulay shirweynayaashii ururradaas lagu dhisi lahaa. kuwaas oo u dhacay sida soo socota..

Guddigii sare ee qabanqaabada oo loo xilsaaray dib u habaynta dhismaha ururada bulshada, oo ka koonbaa xubno Dhexe, wuxuu goostay in dhismaha ururadu ka hormaro maalmaha dabbaaldeegga ee ururradaas, oy u dabbaaldeegayaan munaasabahooda iyagoo dhisan, maalmaha oo ah 8da Maarso, Maalinta Haweenka Adduunka, oo Haweenka Soomaalyeed iyo bulshada dhanba ay si weyn oo xoog leh ugu dabbaaldegaan, maalinta 1da Maajo, oo ah Maalinta Shaqaalaha Adduunka, iyo Maalinta 15ka Maajo oo ah Maalinta Dhallinyarada Soomaalyeed (SYL), iyadoo lagu maamuu-saayo markii la aasaasay xisbigii Gobonnimadoonka, dhaliyeyna gobannimada oo la oran jirey Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed oo ay aasaaseen 13 dhillinyaro ah..

Sidaas darteed, waxa lagu heshiiyey in shirweynaha haweenka la qabto 4-8 Maarso, kii shaqaalaha 27-30 Abriile, kii dhallinyarada 12-14 Maajo oo giddi sanadkan 1977ka ah.



Shirweynayaashaas waxaa lagu magacaabay iney yihiin shirweynayaashii laad, inkastoo urur kasta laba shirweyne hore u soo yeeshay, maxaa waeay, kuwaani waxa weeye kuwii dastuuriga ahaa oo barnaamijyada iyo xeerarka lagu oggolaaday laguna doortay Guddiyada

Dhexe ee ururrada..

Inkasta oo waqtiga lagu qabanqaabiyyey shirweynayaashaas uu gaabnaa, iyaguna aad isugu dhawaayeen, haddana waxay u dhaceen si heer sare ah oo bisayl siyaasadeed, disibiliin, habsami, abaabul iyo dimoqraadiyad ay ka muuqatay, sidii uu qiray Xoghayaha Guud ee XHKS, Maqaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, oo furay saddexdaas shirweyne, kana jeediyey khudbado furitaan iyo xiritaan ah oo qiime weyn lahaa, una ncqonaaya ururrada shidaal iyo iftiin ay ku hawlgalaan.

Xoghayaha Guud ee XHKS, Jaalle Siyaad, iyo xubnaha Golaha Dhexe waxay shirweynayaashaasi siinayeen ahmiyad weyn, waxaana marag u ah sidii ay ula socdeen uga qaybgalayeen ama ay goobjoogga uga ahaayeen shirweynayaashaas. Waxaa kaloo shirweynayaashaas ka soo qaybgalay oo qiimahoodii sii xoojiyyey wafuud ururrada bulshada adduunka oo heer wadani, heer Gobol, iyo heer Caalami ah, kuwaasoo ay ka mid ahaayeen Xisbiga Shuuwiga ee Talyaaniga (PCI), Ururka Shaqaalaha Adduunka (WFTU), Ururka Dhallinyarada Aduunka (WFDY), Ururka Ardada Adduunka (IUS), Ururka Haweenka Dimoqraadiga. Ururka Midowga Shaqaalaha Afrika (OATUU) Ururka Dhallinyarada Afrika (PAYM), Ururka Shaqaalaha Carabta (ICATU), Ururka Dhallinyarada Carabta, Ururka AAPSO, Ururada Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo Haweenka ee dalalka Midowga Soofiyeeti, Jarmalka Dimoqraadiga ah, Bulgaariya (Shaqaalaha iyo Dhallinyarada) Jekoslafaakiya (Shaqaalaha iyo dhallinyarada), Kuuba (Haweenka keliya), Romaaniya (Shaqaalaha), Hungari, (Dhallinyarada), Korea (Dhallinyarada), Ciraaq (shaqaalaha iyo Dhallinyarada), Yementa Dimoqraadiga (Shaqaalaha iyo Dhallinyarada), Tansaaniya (shaqaalaha iyo dhallinyarada), Masar (Shaqaalaha), Ururka Shaqaalaha Faransiska (CGT), Ururka Shaqaalaha Talyaaniga (CGIL), Ururka Shaqaalaha «ANC», Ururka waaddaniyiinta Reer Jili, Jabhadda Xoreynta Falastiin (PLO).

Qaabka dhismaha ee ururrada bulshadu waxay ku dhisanyihijin meel shaqo, waxbarasho iyo deggaan marka laga reeto Ururka Haweenka oo ku chisan degaan keliy. Ururka Shaqaalaha iyo Haweenka mid waliba wuxuu leeyahay Barnaamij iyo Xeer u gaar ah. Ururka Dhallinyaradu isagu wuxuu leeyahay Xeer keliya, wuxuuna si toos ah u fuliya Barnaamijka Xisbiga. Ti-rada hay'adaha sare ee heer qaran ee ururrada bulshadu waa sidatan:-

Ururka	Tirada Guddiga Dhexe	Tirada Xubnaha Xoghaynta	Tirada Xubnaha Guddiga Dhexe Baarista
Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed	86	12	3
Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed	112	13	5
Ururka Haweenka Dimoqraadiga Soomaaliyeed	157	11	3

Ururrada Bulshada Soomaaliyeed waxaa loo xulay hawlkaareendada kuwii ugu fiinnaa iyadoo la tiixgeliinaayo ahmiyadda ay leeyihin waxaana guddoomiyayaal looga dhigay Xubna Golaha Dhexe ee Xisbiga. Hawlkareennada Xoghaynta sare ee ururrada bulshada waa la dhammeystiray min heer qaran ilaa Gobel, degmo, Xaafad, Waax, Tuulo, meel shaqo, meel waxbarasho iwm. Tirakoobka xubnaha urur kasta weli lama diyaarin oo gacanta ayaa lagu hayaa. Ka mid moqoshada ururrada dhallinyarada iyo haweenka waxaa la soo qortaa arji iyadoo la raacaayo Xeerka Ururka. Ururka Shaqaaluhu isagu waa ka duwan yahay. Shar-ciga lacagta dhigaalka ah ee Ururka Shaqaalaha, oo dekreeto ahaan ku soo baxday, shirweynihii ka hor, Shirweynuhuna uu sidiisii u oggolaaday, wuxuu dhigayaa in qof kasta oo ah Shaqaalaha joogtada ah ay ku khasab tahay inuu bixiyo lacagta dhigaalka ee Sanduuga Shaqaalaha, sidaas darteed, qof kasta oo Iaag bixiyyaa waa xubin Ururka Shaqaalaha. Tirada Shaqaalaha bixiya lacagta sanduuqa shaqaalaha ilaa haatan waa 147.000 kuwaasoo intooda badani ay yihiin shaqaale dawladeed. Shaqaalaha ka shaqeeya qaqyabta dhaqaalaha ee Dawladda tiradoodu waxay gaaraysaa 260,000 oo isugu jira shaqaale joogta ah iyo kuwa ka shaqeeya Mashaariieda aan joogtada ahayn.

Hawlaha Xisbigu qabtay muddadii uu dhisnaa barnaamijka iyo xeerka ka sokow waxaa saldhig u ahaa go'aamadii kalfadhigii saadexaad ee Golaha Dhexe. Kalfadhigaas oo lagu gaaray go'aamo qiimo weyn leh, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen in dib loo habee-

yo dhismaha ururrada bulshada lana waafajiyo dhismaha Xisbiga, in iskufillaansho laga gaaro badarka ama haruurka sannadka 1980ka, in magaecdhebbidda jagoc-yinka muhimka ah ee Dawladda Xisbigu sameeyo,, in xubnaha Golaha Dhexe ayan wax hanti gaar ah yee-lan karin, qofkii lihina ku wareejiyo Xisbiga, iyo kuwo kale oo muhim ah oo ku saabsan daryeelka nolosha dadweynaha shaqeeya.

Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed oo dhalashadiisu la timid, markalad tayadeed cusub sida barnaamijkiisu dhigaayo waxaa horyaal xil culus kaasoo ah in uu xaqiijyo ujeedadii uu u dhashay Kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii, taasoo ahayd in bulshada Soomaaliyeed waqtii gaaban kaga gudubto dib u dhaca dhaqan-dhaqaale oo ay hababkii gumeysga iyo gumeysga cusub ka dhaxashay, ayna gaarto nolol horay u martay oo aan dhiigmiirad iyo dabaqado lahayn. Inkastoo saldhigga iyo saynsaabka bulshadeemu ay heer hoose joogaan, isla markaasna dibusocodka gudaha iyo imberyaaliyadda adduunkuna ay da-gaal qallafsan kala horjeedaan horumarka ummadda, haddana shaki kuma jiro in Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, iyadoo ay ku hareraysan yihiin Xoogsatada, Beeraleyda, Xoolo dhaqatada, in-dheer-garatada, Ciidamada Qalabka Sida iyo dadweynaha Kacaanka ah oo idil, kuna xisaabtamaya taageerada xoogagga horusocodka ah ee Adduunka uu ku guuleysan doono halganka uu ugu jiro dhismaha beel cusub ee Hantiwadaag ah.



# WAAJIBAADKA DEG-DEGGA AH EE XHKS

Dhawaan Ummadda Soomaaliyed oo idil: gaar ahaan xoogsatada waxay u dabaaldegaayaan sannad guuradii 1da Luuliyo ee aasaasidda Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed. Sannad waa muddo aad u gaaban haddii loo eego taariikhda axsaabta, hase yeeshay XHKS wakhtigaas yar wuxuu ku kasbaday waayo-aragnimo, wuxuu si habsami ah u gutey kaalintiisa ah hoggaaminta, abaabulidda iyo barbaarinta xoogsatada Soomaaliyeed, waxaa arrintaas Shirweynihii 1aad ee Xiriirkha Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed si qumman ugu soo bandhigay Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre:- 1) «XHKS waxaa ku xira dadweynaha oo uu u sii marayaah ururada bulshada iyo xoogagga horusocodka ah ee kaleba waxay ku jirtaa kaalinta horseednjimo ee XHKS dejinta istraateejiyadda muddada dhow iyo tan fog ee dalka, iyadoo Xisbiga ku hayo abaabul, hubin kormeer iyo hoggaamijin dhab ah fulinta howlaha qaranka ee ina horyaal».

Waxay kale oo kaalinta Xisbigu si fiican ugu caddahay barnaamijka XHKS «Waxaa suura gelin kara oo qudha bisaylka, iskaashiga iyo shaqada garaadka ku fadhiba ee dadweynaha, ee gebi ahaan aamijnsan aragti kacaan ah, meel iyo si qudhana u dhaqaqaqaqaya, ujeeddo qudhana leh. Ma suurtoodo, mana dhici karto in la fuliyo xilkaas haddii uusan jirin urur siyaasi ah oo waddani ah, hanta hirgelinya qawaanijinta mowduuciga ah ee horukaca bulshada, oo ay u muuqato ujeeddo end, oo dareemi kara waxna ka qaban kara danaha xoog-

Axmed Maxamuud Faarax X.G.DH. XHKS

satada, awoodna u leh inuu ayaga abaabulo oo kiciyo, si ay u guutaan waajibaadkii in Kacaanku shaacea ka qaaday».

Halkaas waxaa lagala soo dhexbixi karaa kaalinta laxaadka iyo qitimiga leh ee Xisbigu ka qaato horumarinta nolosha dadweynaha. Maalin walba maalinta ka dambaysa oo xilalka iyo waajibaadku badanayaan, waxaa sii ballaadhannaaya, xoogaysanaayana dowlka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed. XHKS wuxuu leeyahay barnaamijkiisa shaqo ee si gaaban, cad, kooban, muglehna ay ugu qee-xanyihiin waajibaadka saaran marxaladda foodda inagu soc haysa ee lagu dhammaystiraayo, adkaynaayona dhismaha hantiwadaagga. Taas oo dulucdeedu tahay:-

— Tirtiridda dib-u-dhici iyo dhbaatooyinkii laga dhaxlay gumeysiaga iyo imbriyaaliyadda.

— Abuuritaan saldhig maaddi iyo takniko ee hantiwadaagga.

— Kor-u-qaadidda heerka nolosha (dhinaca siyaasadeed, dhaqaale, iyo hiddaha iyo dhaqanba) Xoogsatada.

— Xoojinta diimuqraadiyadda.

Iyadoo la tixgelinaayo arrimahaas, fiiro gaara la siinaayo qorsha-ha shanta sanno ee dabayaqaadiisi: lagu jiro, la euskanaayo go'aannada kal-fadhiyada iyo fariimaha Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, ayaa XHKS muddadii sannadka ahayd si dadaal iyo xamaasad leh, xilkaanimo fiiro dbeeri ku dheehanlahay ku fuliyey hawlihiisa. Sannadkii 1976 — 1977

shaqada Xisbigu waxay lahayd astaan gaara, waxaana saarnaa xil la xiriira dabeeqadda abuurintaanka Xisbi siyaasi oo nooc eusub.

Ugu horraynta, ka hor aasaasidda XHKS, dalka waxaa maylka u hayey Golikii Sare ee Kacaanka, waxaana barnaamij u ahaa labadii waraaqood (1aad, 2aad) ee kacaanka. Hase yeeshay waxaa waqtigaas G.S.K, u ku diyaariyey duriuftii xilka siyaasiga ah ee dalka ay iskaga wareejin lahaayeen, waxayna islamarkaana carbiyeen, barbaariyeenna xoogaggii awoodda iyo kartida u lahaa ee la wareegilaha hoggaaminta siyaasadda dalka. Taasaana sabab u ahayd abuuritaankii XHKS.

XHKS, sidii Jaalle Siyaad yidhi waxay kaalintisa taariikhiga ahi soo shaac baxday ka dib marka dalka Soomaaliyeed galay marxalad tayeed eusub, oo leh astaamaheeda u gaarka ah. Haddaba waxaa iswaydiin leh sideebaa XHKS iyadoc-aanru lahayn khibrad ku filan Xisbinnimo u gutay hawlihiisa sannadkaas uu jirey?

Fulinta hawlaha Xisbiga muddada hore ee la xiriirta aasaasiddiisa, waxay leedahay dabeeqadd u gaara, oo lagu tilmaami karo waxyaalaha soo socda:-

— Xisbiga oo aan lahayn' waayo-aragnimo Xisbinnimo iyo howleed. Arrintaasna kasbashadeedu waxay u baahan tahay wakhti, dadaal, karti iyo xoojinta aqoon xisbiyedka.

— Xisbigii oon si fiican, buuxdana u dhammaystirsanayn dhismihisu (dhismaha hay'adaha hoggaaminta ee Xisbiga laga bilaabo unugga ilaa hay'adaha hoggaaminta ee Gobolada iyo degmooyinka).

— Saykoolejiyaddii dadka oon weli u baran hoggaaminta cusub.  
 — Hawlwadeennadii Xisbiga oo u lahayn khibrad dhaqan gelinta siyaasadda Xisbiga.

— Xubnaha Xisbiga oo ay ku cusub tahay xisbinimadu iwm.

Haddaba iyadoo la tixgolinaayo sababhaas ayaal XHKS lagama maarmaan ay ku noqotay inuu ka daaallamo laba jabhadoo:

— Habaynta dhisma — abaabuleedkiisa;  
 — Fulinta waajibaadka hoggaaminta, abaabulidda iyo barbaarinta.

Xisbigu arrimaha uu sida habسامدا iyo xeeldheernimada uu isu waafajiyey waxaa ka mid ahaa inayan labadaas arrimood midna midaa kale wax u dhimjin, ee mid waliba tan kale, hore-u-waddo, kaalmana u noqoto. Sidaasi daraaddeed ayaal Xisbigu, isagoo dhamaystir-aayaa Hay'adhiiisa heer kaastaba ha jocgaanee xaddidaaya xilka hay'ad walba tilmaamaaya isku xirnaanta iyo kala maarmaan la'aanta hawla-ha hay'adaha Xisbiga iyo dawladda, ayaal Golaha Dhexe iyo Xoghayaha Guudba ee XHKS ay ka shaqeyeen, noloshana ku rumeyyeen sidji loo hoggaamin lahaa howlaha wax-soosaarka, maamulka, hiddaha iyo dhaqanka.

Kaalinta hoggaminta ee Xisbigu waa mid si joogto ah u koraysa. Muddada hore koritaanka kaalinta Xisbigu waxaa saldhig u ah isbeddel tayeedka ka dhaca bulshada, dhaqaalaha, iyo hiddaha. Markii dal dhaqaalihii suu hooseeyo, si adag oo dhib leh ayaal isbeddeladu uga dhacaan, taas oo keenta, soona saarta baahida loo qabo xisbiga Nooca Cusub iyo kaalinta uu ka qaadan karo dedejiska horukaca la higsanaayo.

Wakhtiga dhismaha hantiwadaaga waxaa dhasha dhibaatooyin fara badan oo hakin kara socodka dhismaha hantiwadaagga haddii aan laga hor tegin, oo xisbigu qaadan kaalintiisa taariikhiga ee ah ka bedbaadinta Ummadda jabka hakiska, isla markaana ilaalinta ku socodka majaraha dhabta ah ee kaacaanka.

XHKS, isagoo ka shidaal-qadaanaaya waayo-aragnimadii sannadkii uu jirey, tan dhismaha hantiwadaaga, barnaamijka xisbiga, go'aan-nada kal-fadhiyada iyo tusaalooyinka Xoghayaha Guud wuxuu waajib deg-degga ahaan isu hor dhigaayaa qodobhada soo socda:-

— Xocjinta dhaqaalaha dalka iyo kor-u-qaadidda nolasha dadweynaha;  
 — Xocjinta kacaanka hiddaha iyo dhaqanka;  
 — Xoojinta dowlka Xisbiga;  
 — Adkaynta xidhiidhka Xisbiga, dawladda iyo ururrada shaqaalaha;  
 — Adkaynta xiriirkha Xisbigu la leeyahay dadweynaha.

*Xocjinta dhaqaalaha dalka iyo kor-u-qaadidda Nolasha dadweynaha*

Go'aannadii kal-fadhiigii saddexaad ee Golaha Dhexe waxaa ku jirrey in mudnaanta 1aad la siiyo xocjinta dhaqaalaha iyo nolasha daalka gaar ahaan cunto soo saarka waxaa go'aanada ku dhignaa; sida uu tilmaamaayo barnaamijka XHKS, marka la fulinaayo barnaamijyada mashaarieda dhaqaalaba la xirijra waa in mudnaanta 1aad la siiyo wax-soo-raaka. Dhinaca waxsaaridda waxaa ahmiyad gaara leh tacab kordhintabeeraha, khaasatan cuntada dadweynhu quuto» Si waa jibaadka loo guto, Golaha Dhexe wuxuu go'aan ku gaadhad in loo

baahan yahay in hadda la dejijo qorshaha barnaamijka isku fillaanshada ee le higsanaayo 1980ka. Arrinta kale ee taa la xiriirta ee Golaha Dhexe ku gaadhad go'aan waa xocjinta kaalinta Iskaashatocyinku ka qaataan horukaca dalka, gaar ahaan xaqijinta barnaamijka isku fillaanshaha.

Sannadka 1978ka waxaa dhamnaya qorshihii shanta sano ee dhaqaale (1974-1978). Sidaasi dar-aadeed, iyadoo ahmiyad la siinaayo go'aankii kal-fadhiiga saddexaad, gabegabayntii qorshaha dawladda ee (1974-1978), ayaal XHKS u saaran yahay xil culisi, adag, qiimi doorna u leh horumarka iyo aayaha damee ee Ummadda Soomaaliyeed.

Waxaa lama huraana in Xisbigu si firfireeoon iyo hal abuuro uga qayb qaato hirgelinta labadaa arrimood, laba daraale in Xisbigu ku dadaalo sidii loo kabi lahaa waxyaalaha qabyada noqda ee wakhtigoodii loogu tala galay aan ku dhammaan. Sida uu arrinta ku gudan kaaraana waa iyadoo lagu shaqeyeo farrimihii Jaalle Siyaad ka soo jee-diyey xiritaankii shirweynaha 1aad ee Xiriirkha Ururrada Shaqaalaha ahaa:-

— Kordhinta tacabka iyo jaangointa qorsha cilmi,  
 — Tartanka hantiwadaagga,  
 — Adkaynta anshaxa iyo asluubta shaqada  
 — Kormeerka iyo hubinta fulinta shaqada  
 — Ka qayb qaadashada xooq-satadu ka qayb qaadato abaabulka iyo maamulka shaqada.

Qodobhadaasi oo idili waxay si toos ah waxtar ugu yeelnaayaan horumarinta dhaqaalaha iyo fulinta barnaamijka deg degga ah ee Xisbiga. Haddaba waxaa halkaasi ka soo

dhex baxaayaa qaanuunka ah kori-taanka kaalinta Xisbiga xilliga gu-da gal ka arrimaha aasaasiga ah ee saameeyaa nolosha iyo horukaça xoogsatada. Taas oo uu ku gudan karo — isagoo aan ka go'in, kana go'doomin dadweynaha — cilaaqad-da la leh tacab - soo - saarka. XHKS waa inuu si joogta ah u kormeeraa hawlaha, taas oo ay tahay inuu noq-do mid faa'iido u leh wanaajinta tayada iyo kordhinta tirada tacabka.

Haddaba sida loo taabbo — geliyo qorshaha dawladda ayay ku xi-chantahay isbeddelka san ee ka dha caaya nolosha bulshadu. Sannadka 1977ka - 1978ka sannad tijab-bo ayuu u yahay XHKS, sannad u baahan naf-u-kurid, dadaal iyo hind-dise. Wuxaa hubaala oo aan mar-naba shaki ku jirin in XHKS kaalintisaas si habsamj ah u gudanayo iyadoo uu ku shaqeynaayo riuxii barnaamijka Xisbiga, iyo qawaan-nijinta Guud ee dhismaha hantiwa-daagga.

#### XOOJINTA KACAANKA HID-DAHA IYO DHAQANKA.

Ujeeddada weyn ee laga leeyahay kacaanka hiddaha iyo dhaqanka waa kor-u-qaadidhaa heerka garaad-ka siyaasiga iyo aqoonzed ee xoog-

satada. Abwaankii weynaa ee han-tiwadaagga Cilmiga K. Maarks, wuxuu yiri:- afkaartu iyo araada marka ay gaadhaan, kuna dheeh-maan maskaxda dadweynaha waxay isu beddelaan xocg maaddi ah, oon la loodin karayn. Sidaasi awgeed ayaa waajibaadka aasaasiga ah ee kacaan iyo xisbi walba oo hantiwa-daagga uu Kacaanka dhaqanka uga mid yahay (Cultural Revolution). Kacaanka 21kii Oktobar 1969kii tallaabooyin waaweyn oo dhaxal gala ayuu ka qaaday arrintaas, kuwaas oo u sahlay XHKS, inuu muddadii yarayd ee uu dhisnaa si wanaagsan u sii wado. Barnaamij ka XHKS waxaa ku jira qodob ka hadlaaya Kacaanka hiddaha iyo dhaqanka iyo lagama maarmaani-madiisa.

Qodobkaasi wuxuu tilmaamayaa lama huraanimada in la soo nolay-iiyo hiddihii iyo dhaqankii dadka Soomaaliyeed, iyada islamarka laga faa'iidaysanaayo ilbaxnimada uu-manaha gaar ahaan kan hantiwa-daagga ee muddo badan soo taxnayd, heerarka kala duwanna soo martay. Waxaa kale oo barnaamijka ku xusan in loc baahan yahay in lala dagaalamo raa-dakii iyo hadhaagii gumaysiga ee

ina markiyey dib - u - dhaca; in la-la dagaalamo aqoondarrida, korna daagga uu kacaanka hiddaha iyo loo qaado heerka tacliimeed ee bul-shada.

Tallaabooyinka aasaasiga ah ee la qaaday si loogu guulaysto kacaanka hiddaha iyo dhaqanka waxaa ugu muhiimsanaa qoridda Far-Soomaaliga iyo Ololoyaashii eidhibtitiridda aqoondarrida.

XHKS si uu waajibkaas u guto, hirgeliyana waxaa loo baahanyahay muddada inagu soo fool leh inuu: Saldhig ka dhigto mabaadiida aasa-siga ah ee kacaanka hiddaha iyo dhaqanka; inuu ku dhaqmo tusaa-looyinka Xoghayaha Guud, inuu ka faa'iidaysto waayo-aragnimada Caa-lamiga ah ee horusocodka ah; sii faafinta iyo baahinta eidhibtitiridda aqoon-darrida; dhiirrigelinta baahinta tacliinta; xoojinta kaalinta qalabka borobogaandada (sida Raadiyaha, Wargeysyada, Riwaayada-ha, Fanka iwm);

Si aan garaadka iyo aqoonta dadweynuhu dib-u-dhiciin, ugana dambayn horumarka maaddiga ah oo la gaadho, waxaa khasab ah in la fuliyo waajibaadka kacaanka hid-daha iyo dhaqanka.

## MAALMO LIBINEED

26kii Juun:

26kii Juun, oo ah Maalintii go-bollada Waqooyi iska tuureen heeryadii gumeyisiga Ingiriiska ayaa laga xusay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ah ee Soomaali-yeed. Maalintas oo ahayd 17 guuradii xornnimada si weyn oo wadaninimo iyo qiraba ku dhee hantahay ayaa looga xusay. Xaf-ladaha xuska kuwii ugu mud-naa waxaa lagu qabtay magaa-lada Xamar iyo Hargeysa.

Xamar, Xafladdaa waxaa la-ga qaban-qaabiyey degmada Boondheere, waxaana ka soo qaybgalay guddoomiyayaasha Hoggaamada Abaabulka, Shuruucda iyo Caddaaladda, Iskaashatooyinka; ku-Xigeenka Guddoomiyaha Hoggaanka Abaabulka, Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Benaadir, God-doomiyaha Jaamacadda Ummadda, Guddoomiyaha U.D.H.-K. Soomaaliyeed, Ururrada Bul-shada iyo dadweyne fara badan.

Waxaa halkaa hadal xafla-daa xuska maalintaa weyn ka jeediye Jaalle Warsame Cabdu-llaahi Cali, Guddoomiyaha Hog-gaanka Iskaashatooyinka. Jaalle Warsame wuxuu khubbaddiisaa ku guud maray halgankii dhee-raa ee Ummadda Soomaaliyeed u soo gashay gobannimadeeda, iyo tallaabooyinkii kacaanku ka qaaday soo-noolaynta taariikhda Ummadda Soomaaliyeed.

Xaflad maalintaa lagu xusa-yay ayaa lagu qabtay «Beerta

Xorriyadda» ee magaalada Hargeysa. Xuskaa waxaa ka soo qaygalay Wasiirka Ciyaaraha Jaalle Faarax Wacays Duulle, Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka W/Galbeed Jaalle Biile Rafle Guuleed, madaxda iyo shaqaalaha Dawladda iyo kumentaal qof oo u soo baxay daa-al-degga maalintaa weyn.

Xafladdaa waxaa lagu bandhigay ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka, heeso, maawelo iyo madeysyo. waxaana ka qayb-qaatay Fannaaniinta Waaber, Halgan, barbaarta kacaanka iyo xaafadaha Guryo-samo iyo 26ka Juun. Xoghayaha Xisbiga ee Gobolka Waqooyi Galbeed oo xafladdaa hadal ka jeediyay wuxuu guud maray halgankii dheeraa ee Ummadda Soomaaliyeed u soo martay Gobannimadeeda.

#### 1da Luuliyo:

Gobollada iyo Degmooyinka dalkoo idil waxa laga xusay 1da Luuliyo oo ah maalintii xornimada gobollada Koonfureed ee Jamhuuriyadda. israacii labada gobol ee xoroobay iyo sannad guuradii 1aad ee XHKS. Si maalintaa Ummadda Soomaaliyeed ku dheer loo xishmeeyo, 14ka degmo ee gobolkan Benaadir waxaa laga qabanqaabiye Xafaldo, halkaasoo ay ka qaybqaateen Xubno ka tirsan Golaha Dhewe iyo dadweyne fara badan. Xafladaha degmooyinka lagu qabtay waxaa khubdado ka jee-diyay xubno golaha Dhewe ka tirsan oo ka warramay taariikh-dii Ummadda Soomaaliyeed. Subaxnimadii Ubax ayaa la dhigay taallooyinka geesiyaashii gobannimada u qudh-baxay. Ubax-dhigiddaa waxaa ka qaybqaatay kooxo ka tirsan ururrada bulshada, iyo ubaxa kacaanka

oo ay hoggaaminayeen Jaalle Cusmaan Maxamed Jeelle, Gudoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda iyo Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Benaadir Jaalle Yuusuf Ibraahim «Abuu-raas», kana tirsan Golaha Dhewe XHKS.

1da Luuliyo oo ah maalin libin saddexan xambaarsan si weyn ayaa Jamhuuriyadda oo idil looga xusay. Waa maalintii xornimada, midnimada iyo aasaaska Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed. Jaalle Siyaad, Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyeed isagoo munaasabaddaa weyn ka hadlaya wuxuu yidhi, «Kowda Luuliyo waa maalin qaayo iyo qiimo weyn u leh shacbiga Soomaaliyeed, waa maalin ku tilmaaman iska rogidda heeryadii gumeysiga iyo go-yntii siliggii isticmaarku ku kala qoqobay shacbiga Soomaaliyeed» Jaalle Siyaad munaasabaddaa wuxuu hambalyo ugu gudbiyey dadka Jabuuti oo xornimadoodii hantiyey 27kii Juunyo.

Jaalle Siyaad khubbadii uu Ummadda u jeediyey maalintaa weyn wuxuu ku caddeeyey in munaasabadii hore ee dalka soo maray, iyadoo ku soo beegantay xuskii koowaad ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed. Xoghayaha Guud ee XHKS wuxuu khubbaddisa ku sheegay in muddadaa sannadka ee uu Xisbigu soo jiray la qabtay hawlo aad u farabdan oo qiimo weyn u leh nolosha bulshada Soomaaliyeed. wuxuuna sheegay in hoggaanka dhewe ee Xisbigu uu aad isugu taxalujiyey inay dhisaan asaas-

ka uu Xisbigu ku fariisan la-haa, taasoo ah dhismihii laama-ha Xisbiga Gobollada iyo Degmooyinka, Unugyada iyo Gud-diyyada Xisbiga iyo dejinta Shuruucdii Xisbiga iyo dawladdu ku dhaqmi lahaayeen iyo abuuriistii Ururrada Bulshada.

Madaxweynaha J.D.S Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu sheegay in waajibaadka Xisbiga horyaal uu aad u ballaaran yihii, taasoo aan sano iyo labo lagu dhammays karin. waxaase hubaal ah in Xisbiyiintu ay soo qaateen wax badan. Jaalle Siyaad wuxuu u rajeeyey Xisbiyiinta inay sannadguurada labaad noqdaan kuwii guul iyo baraare ka gaara himiladooda, guul halhays u noqota taariikh-da Soomaaliyeedna ka gaaraan xilkooda.

Habeennimadii 1da Luuliyo Golaha Murtida iyo Madadda-lada waxaa lagu qabtay xaflad lagu soo bandhigay riwaayad hobollada waaberi ay si hu-fan ugaga sheekeeyeen halgankii dheeraa ee Ummadda Soomaaliyeed ay u soo gashay xornimadeeda iyo midayteeda. Riwaayadaa waxaa daawaday Xoghayaha Guud ee XHKS, Xubno ka tirsan Golaha Dhewe, Ururrada bulshada iyo dadweyne fara badan.

Markii ay riwaayaddu dham-aatay, khubbad qaayo badan oo Xoghayaha Guud halkaa ka jee-diyay wuxuu ku sheegay in arrinta RAAMU oo lagu eedeyay in Soomaaliya 3,000 oo askari u soo dirtay dalka Kenya halkaana lagu dilay 3 Askari oo kenya u dhashay ay tahay dhaleeco Qaranka Soomaaliyeed loo gaystay.

Xoghayaha Guud wuxuu ca-ddeeyay in arrinta Raamuu ay la mid tahay tii Berbera, rajci-yadda iyo Imberyaaaliyadda ca-alamiga ihina weli durbaankii

beenta ahaa tumaayso.

Jaalle Siyaad wuxuu khud-baddiisii ku soc gunaanaday in Soomaaliya aanay cidna weera-rin, diyaarna ay u tahay in si

Afrikaannimo iyo darisn.maba-ku dheehantahay u dhammayso mushkiladda dal iyo dadba leh ee Soomaaliya iyo Kenya dhex-taal.

# Wafdi ka socda XHKS oo booqday Jekoslafaakiya

Wafdi 40 qof ah oo ka koo-ban hawladeenno Xisbi, urur-rada bulshada, Ciidammada Qa-labka Sida, Xoghayaasha Gobol-lada iyo Degmociyinka qaar-kood iyo hawladeenno dawla-deed ayaa bishii Maajo 4dii ka dhoofay magaalada Xamar oo booqasho aqoonkorodhsii ah ku tegay dalka Jekoslafakia. Wa-fdigaa waxaa hoggaaminaayay Jaalle Cabdullaahi Cobsoble Si-yaad Wasiirka Boostada iyo Is-gaarsiinta iyo Jaalle Faadu-mo Cumar Xaashi oo ah Guddoomiyaha Ururka Ha-weenka Dimoqraadiga Soo-maaliyed isla markaana ka tir-san Golaha Dhexe ee XHKS.

Aqoon-korodhsiga wafdigaa si ku tegay Jamhuuriyadda Han-

tiwadaagga ah ee Jekoslafakia; waxaa saldhig u ahaa ujeeddooyinka Xisbigu ka lahaa:-

1) Kor u qaadidda aqoonta xubnaha Xisbiga xaggaa barashada Cilmiga Hantiwadaagga ah.

2) Wada shaqaynta iyo hog-gaamjinta Xisbiga, dawladda iyo ururrada bulshada;

3) Ka soo faa'iidaysiga waaya-ha dhismaha Hantiwadaagga ee dalka Jekoslafakia.

Wafdigu intii uu dalkaa jek-oslafakia joogay oo ahayd 45 beri wuxuu qaata tababar fal iyo fiiraba isugu dhafnaa. Dhi-naca fiirada duruustu waxay u badnayd casharro ku lug leh: waayaha dhismaha bulshada Hantiwadaagga ah, socodsinta

hawlaho xisbiga, wada shaqayn-ta xisbiga iyo dawladda iyo hog gaaminta xisbiga ee ururrada bulshada iyo dadweynaha; xag-ga falka ama baraatiikada wa-xaa wafdigla la geyn jiray: Wer-shadaha, Iskaashatooyinka, gu-ryaha lagu kaydiyo dhaqanka iyo taariikhda Jekoslafakia. Wa-xaa kale oo wafdigu booqasho 3 maalmoor ah ku tegay Jam-huuriyadda Slofakia.

Wafdigu intii uu dalkaa joo-gay wuxuu u gudbiyay dadwey-naha Jakoslafakia waayaha Um-madda Soomaaliyed. Wafdigu waxay dadweynaha tuseen fili-mmo ku saabsan J.D.S iyagoo isla markaa qaybinayay buug-aag iyo qoraallo kale oo ku saabsan Soomaaliya.

## WAFDI XHKS KA SOCDA OO BOOQASHO AQOON-KORODHSI AH KU TEGAY YUGOSLAFIYA

Wafdi uu hoggaamnaayo Gu-ddoomiye ku-Xigeenka Hogga-anka Aydolojiyada Jaalle Maxa-med Cabdi Dhunkaal, oo ka so-cda XHKS ayaa bishii Maajo 27dii booqasho aqoon-kordhsii ah ku tegay dalka Yugoslafia. Wafdigaa oo dalkaa Yugosla-fiya joogay 23/5/77 ilaa 15/6 /77 ;baraamijka booqashadoodu wuxuu ka koobnaa: Kulammo ay la yeeshen madaxda Xisbi-ga Shuuciga ah, Dawladda Dhe-

xe iyo Ururrada Bulshada wa-xayna soedaallo ku tageen sad-dex Jamhuuriyadood oo ka mid ah Jamhuuriyadaha ku bahoo-bay Xariirka Yugoslafiya ku-waasco kala ah Jamhuuriyadda Hantiwadaagga ah ee Serbiya, Islofeeniya, Bosniya iyo Hesogofniya.

Wafdigu markii uu ka degay Xarunta Yugoslafia, Belgrade, waxaa halkaa kaga hor-yimid

oo gegida dayuuradaha ku soo-dhaweyey Xubin ka tirsan gu-ddiga Siyaasiga ee Xisbiga iyo hawladeenno ka tirsan kogg-aanka Arrimaha dibadda ee Xisbiga Shuuciga ee dalka Yugos-lafia

Wafdigu intii ay dalka Yugoslaafiya joogeen waxay u ahayd aqoon iyo waayo-aragnimo korodhsii ay kaga baaraandegayeen xaqiiqada hantiwadaagnnimada

ee dalka Yugoslafia. Fal iyo fiirabo waxay indha-indhayna-yeen sida dalka Yugoslafia u hirgeshay dhismaha hantiwad-wadaagga. Wuxuu kale oo waf-digu soo arkeen habka dhismaha ururrada bulshada ee dalka Yugoslafia waxyaabaha waf-digu soo arkeen waxaa ugu mudnaa habka Ismaamulka shaqaalaha (self-management) oo gaar u ah dalaka Yugoslafia.

Dawladda federaalka ah ee dalkaa Yugoslafiya **waxay ka** kocban tahay 6 Jamhuuriyadood iyo laba gobol oo madax bannaan

Jamhuuriyad walibana waxay leedahay dawladdeeda u gaarka ah. Mabaadiida sinaanta ah ee ka dhexaysa Jamhuuriyadaha iyo gobolladaasi waxay ka muu-qataa dhammaan wejiyada Siyaasadda iyo maamulka ee Dawladahaas.

Ujeeddada socdaalka Wafdi-gu ma'ahayn keliya inay aqoon iyo waayo-aragnimo ka soo koro-dhsadaan Yugoslafia keliya, hase yeeshay waxay u gudbiyeen dadkan iyo **ururradaa** ay la kul-mayeen taariikhda, halganka iyo horumarka Ummadda Sooma-

liyed. Wuxuu wafdigu dadka Yugoslafiya ka dhaadhicisay si-dii Ummadda Soomaaliyeel Gu-meysiga u kala qaybiyey, xorni-madii Soomaaliyeed iyo is-raa-codii, xilligii musuq-maasuuq iyo **Gumaysiga** cusub iyo curashadii kacaanka Hantiwadaagga 21kii Oktoobar 1969kii, oo dalka barwaqaqo iyo badhaadhe u horseeday.

Waxaa kale oo **wafdigu** dad-weynaha Yugoslafiya tusay filim ay sideen oo ku saabsanaa rari-dii iyo dejintii dadkii abaartii Dabadheer ku tabaalooobay.

## XUSKA DHALASHADII

### GEORGI DIMITROV

Dadyowga horusocodka ah ee adduunku bishii Juunyo 18dii waxay u dabbaal-degeen 95 guu-radii ka soo wareegtag dhalashad-dii halyaygii xoogsatada adduunka, Georgi Dimitrov; oo ku dhashay Degmada Radomir oo ku taal dalka Bulgaariya; Dimitrov wuxuu dhashay 1882kii.

Hanweynida iyo tixgelinta caalamiga ah ee loo qabo, Dimitrov wuxuu ku mutaystay daa-facaaddii ashkatadii Reichstag. Dimitrov fashiistadu waxay ku ashkataysay inuu gubay xarunta taliskii Hitler — Reichstag. Se-btember 23dii, 1933kii aaya Dimitrov la soo taagay Maxkamad ku taal magaalada Liepzing. waa maalin saddexaaddii intay max-kamaddu socotay, waxaana goob joog ahaa 82 weriyaaal shishee-ye iyo 42 weriyee oo Jarmal ah. Ashkatadaa oo lagu soo oogay Jaalle Dimitrov iyo dad kale oo



horusocod ah waxaa looga dan lahaa in lagu hakiyo halganka xaqaa ah ee xoogsatada ka gilgil-atay dhiigmiiradka iyo dibind-aabyada gumeysiga iyo Hanti-goosiga.

Dimitrov wuxuu ahaa nin u dhashay dalka Bulgaariya, hase-yeeshay naftiisa u huray xoraynta xoogsatada adduunka, dhaq-dhaqaaqii caalamiga ahaa ee xoogsatadana qayb libaax ayuu.

ka soo qaatay. Dimitrov wuxuu magac ku mutaystay halgankii iyo kaalintii uu ka galay ururka Xoogagga Hantiwadaagga ah (Comintern). Arrintii ugu mudnayd ee lagu soo qaaday shirweynihii «Comintern» ka ee 7aad waxay ahayd sidii loo midayn lahaa xoogagga horusocodka ah si la isaga caabiyo weerarka faashiistada. Warbjinta shirweynaha waxaa soo jeediyay Jaalle Dimitrov oo ahaa curad u hana-qaaday xoraynta xoogsata da adduunka.

Dimitrov, shirweynaha wuxuu ku qaawiyey fool-xumada iyo waxshnimada fashiismada, isa-

goo ku baaqay midaynta xooga ga dimograadiga ah iyo kuwo hantiwadaagga ah. Jaalle Dimitrov wuxuu ka digay kala-jab ku dhaca jahbada ballaadhan ee xoogsatada.

Dimitrov si aan la qiyaasi karin ayuu uga qayb qaatay (Comintern) ka iyo jabhaddii iskaabbiga fashiismada.

Dimitrov si firfircoon ayuu uga qayb qaatay dhaqdhaqaqii xoogsatada Bulgaariya; isagoo Xisbiga shuteiga ah ee Bulgaaria ku tanaadshay waayo-aragnimadii uu ka soo korodhsaday intuu ururrada caalamiga ka sha-

qaynayay. Jaalle Geogri Dimitrov, wuxuu ku barbaariyay Xisbiga Shuuciga ee Bulgaariya mabaadi'ida caalaminimada, taasoo la'aanteed aanay waddannimo jirin. Inkastoo Dimitrov u dhashay dalkaa Bulgaariya, haddana wuxuu ka mid ahaa helyeyadii ugu door-roosmaa ee caynaanka u qabta dhaqdhaqaqaaqa xoogsatada adduunka.

Dimitrov, dadyowga horusocoda, ururintii iyo isku xidhkii jahbaddii balladhnayd ee ka soc hor jeedday fashiistada. da, ururintii iyo isku xidkii jahbaddii balladhanayd ee ka soc horjeedday fashiistada.

## TASS oo ka faallootay sannadguuradii 1aad ee XHKS

Bishii Juun 28dii ayaa Jaalle Sergei Kulik oo ka mid ah qora-yaasha Siyaasadda ka faallooda ee Wakaaladda TASS, qorey faallo dheer oo uu kaga hadlayay Sannadguurada 1aad ee XHKS. Faalladii oo qodobbo ka mid ah idin soo qaadnay waxay leedahay:

Maalmahan dadka Soomaaliyeed waxay isu diyaarinayaan dabbaal-degga Sannad-guurada kowaad ee ka soo wareegtay maalintii la aasaasay XHKS, taasoo suntaysa dhalangaddoona ka kacaameed ee dalkaa iyo Afrika guud ahaanba. Banrnaamijka XHKS wuxuu dhigayaa in xisbigan, oo ah hormuudkii shaqaalaha iyo beeraleyda, loo aasaasay inuu kaalin mudan ka qaato dhismaha bulsho hantiwadaag ah. Ugu horraystiiiba XHKS wuxuu iska takooray hantiwadaagyadii Waddaniga» iyo «Afrikaanka» ahaa, waxaanu ku

dhaatay ku dhaqanka aragi-cilmiyeedka qudha-marxism-leninism. XHKS wuxuu u arkaa himiladiisa, ku hoggaaminta dalka dhabbaha hantiwadaagga si loo dhammaystiro xornimada siyaasadzed iyo dhaqaaleba loona hantiyo midnimo, sinnaan iyo horumar.

Xisbigu isagoo tallaabooyinkii-sii ugu horreyay qaaday wuxuu dhexgalay dadweynaha isagoo ku boorrinaya inay si firfir-coon uga qaybqaataan Xisbiga iyo dawladdaba. Xisbiga hawlihiisa mudanka ah waxaa ka mid faafinta mabaadiida Hantiwadaagga ah iyo ku baraaru jinta dadweynaha daafacaadda guulaha kacaanka. Xisbigu hal-ku-dheg wuxuu ka dhigtay: In xilka xubnuhu aan noqon keliya hawl karnimo, hase yeesh ee xubin walba waajib ay ku tahay fidjinta iyo baahinta aragtida markisimada Borobgaandada laxdadka

leh ee Xisbigu hayaa, waxay keentay in guulo dhaxal gal ah laga gaadho dhaqangelinta qorshaha dhaqaale ee Xisbigu is-hordhigay.

Tacob kordhinta oo ay ka simanyihii xubno dhaqaale oo badani waxay dhalisay in waxsoo-saarka Wershedaha Soomaaliyeed kordho 40%. Dhulka la jilay wuxuu gaadhaya laba jibhaar — 350,000 ilaa 700,000 oo hektar. Beeraleydu aad ayay ugu dheganuglaatay baaqii Xisbiga ee ahaa inay mijoobaan maantana waxaa jira in ka badan 120 iskaashato.

Xisbigu, siyaasaddiisa dibadda wuxuu ku ballan qaaday wax la qabsiga beesha Hantiwadaagga. Isku-mid-ahaanshada ama isudhowaanshaha aragiyeed ee labada xisbi iyo labada dawladood ee J.D.S. iyo Midowga Soofiyeeti waxay ka dheehnaayeen

heshiiskii la kala saxeexday 11kii Luuliy 1974kii. Leonid Breshnev, war-bixintii uu ka jee-diyey shirweynihii 25aad ee X. SH.M.S. wuxuu ku mutjiyey in heshiiskaasi sii adkeeyay xi-dhiidhkii Midowga Soofiyeti iyo Soomaaliya ka dhxeeyay.

«Dadka Soomaaliyed illaabi maayaan kaalmadji hagar la'aaneed ee Midowga Soofiyeti mar walba heeganka ula ahaa si ay u gaadhaan xornimo bulsho, u tirtiraan dib-u-dhaca qarniga jiray una dhisaan bulsho fayow. «Xidhiidhka aan Mi-

dowga Soofiyeti la leenahay wuxuu ku qotomaa mabda' na middeeyay iyo ahdaafta aanu ka si-mannahay oo ah u halganka nabadda, dimuqraadiyadda iyo Hantiwadaagga», ayuu yidhi Maxamed Siyaad Barre.

## LISBON MIN XARUNTA GUMEYSIGA ILAA HIILKA GOBANNIMADA IYO DIIDMADA MIDABTAKOORKA

Bisha Juun 16. 1977 Magaalada Lisbon magaalo Madaxda dalka Burtuqaal waxaa ka dha-cay shir caalami ah oo lagu cam-baarraynayo Siyaasadaha Talis-yada Midabtakoorka, jinsi faq-uuqa iyo gumeysiga ee dalalka Afrikada Koonfureed.

(INTERNATIONAL CONFERENCE AGAINST APARTHEID, RACISM AND COLONIALISM IN SOUTHERN AFRICA).

Shirka waxaa wada jir u wada qabanqaabiyyey Ururka Isbahay-siga dadyowga Afrika iyo Aasiya (A.A.P.S.O.), majliska nabadda adduunka iyo Axsaabta iyo Uru-rada horusocodka iyo kuwo dimo-qraadiga ah ee dalka Burtuqaal. ugu horraynna xisbiga shuuciga iyo midka hantiwadaagga ee dal-kaasi. Wuxaana isla markii ka dambeeyey si weynna xaqijintii-sa uga qayb qaataay guud ahaan xoogagga nabadda jecel ee dunida oo ay safafka hore ka-ga jirto Jamhuuriyadda Demo-qrada Soomaaliya. Shirka wa-xa ka soo qayb galay ergooyin ti-rsigoodu gaarayo laba kun oo qof kana kala socda shanta qaa-rrood ee dunida, kuwaas oo mesilaya 73 urur oo wadani ah (73 dal), lix wafdi oo kala me-telaya laamaha kala duwan ee

Jamciyada Qaruumaha midoobey (N.U.O.) iyo lix iyo tobani ka kala soeda ururro caalami ah, kuwo gobol ama kuwo qaarradeed. Wafdiyada shirkaa ka soo qayb galay, kuwa qaban-qaabiisa ka qayb qaataay dirkuba waxay kala metelayeen xoogag-ku kala geddisan xagga asalka bulshanimo, aragtida siyaasa-deed iyo Aydolojiyadaha, wa-xaana ka mid ahaa koox mesila-ya ururro iyo jimciyado diini ah. Waxaa kale oo ka mid ahaa koo xo ka tirsan axsaabta Sooshiyaal-Dimoqoraatika ee dalalka YU-RUBTA GALBEED. Dhinaca kalena dalalka hantiwadaagga Axsaabta Shuuciga, dalalka horusocodka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Amerika.

Xoogaggaas oo ay kulmisay diidmada iyo naceybka siyaasa-daha gumeysiga iyo imberyaali-yadda ee gaar ahaan sida foosha xun looga fuliyo waqtiga haatan dhinaca koonfureed ee Qaaradda Africa.

Sidaas darteed shirku wuxuu ahaa muddaaharaad caalami ah, aadamiyadda jecel nabadda iyo dimoqaraaiyada ay ku muujisay ciidmada iyo neceybka talisya-da midab takoorka dalalka Afrikada Koonfureed.

Shirka ahmiyaddiisu waxay kale oo ay ku jirtaa waa iyada oo la dhigay laguna beegay maalin Koonfur Afrika caanka ku ah-16ka Juun oo ah maalin ay ka-ceen dadweynaha shaqalahay iyo dhallinyarada magaalada SWE-TO, halkaas oo taliska midabta-koorku ku galay dhagar aan taariikhdu illaawi karin, markii rasaas la marshey boqollaal qof oo si nabad-gelyo ah u mud-daaharaadayey. Sano kasta bisha Juun 16da waxay noqotay maal-maha sida tiiraanyada leh looga xuso dunida horusocodka ah.

Shirka waxaa ka soo baxay go'aanno dhaxol gal ah waxaana ka mid ah mid ku saabsan qorshaha arrimaha la xiriira sida loc hirgelinaayo taageerada loc fidin doono dhaqdhaqaqaq gobannimo doonka, iyo isku habaynteeda, waxaa kale oo ka soo baxay go-aan lagu taageerayo dalalka horusocodka ah ee Afrika, laguna cambaareenayo siyaasadaha gumeysiga iyo imberyaaliyadda caalamiga, oo had iyo jeer lagu duminyo laguna hakinaayo dalalka horusocodka ah ee Afrika. J.D.S. waxaa shirku uga qayb galay wafdi uu hoggaaminaayo Jaalle Warsame Cali Faarax oo Xubin ka ah Golaha Dhexe ee X.H.K.S. ahna guddoomiyaha

Guddiga saaxiibtinimada iyo Iskaashiga dadyowga.

Wafdigu isagoo ka faa'iideysanaaya kulankaas caalamiga ah, wuxuu qaabilay ergooyinka ururrada caalamiga ah, kuwo waddani ah, madaxda dhaqdhaqaqyada gobannimo doonka iyo shakhsiyad caalami ah. Waaanu uga warramey guulahay J.D.S. ka gaartey dhinacyada dhaqaalaha, Bulshada iyo gaar ahaan dhismaha Xisbiga iyo ururrada bulshada, dhinaca klena diceayadaha gumeysigu ku hayo J.D.S. iyo arrimo kale oo dan u ah gobannimo doonka Afrika iyo la dagaallanka

gumeysiga caalamiga ah.

Ugu dambaystii shirka caynkaas ah oo lagu dhigay LISBON ayaa iyada nafteedu ahayd guul istaahisha in loo dabbaaldego.

Run ahaantii geediga ay qaaday LISBON muddo 3 Sano ah kana guurtey min Xarunta gumeysiga faashistaha ilaa xarunta hiiinka iyo taageerada dhaqdhaqaqyada gobannimo doonka iyo diidmada midabtakoor ma ahayn mid sahlan ama sijaayo do ku goglanyihiin. Wuxuu ahaa mid adag oo dhibaato iyo turxaan badan, hase yeeshay waa jidkaas jibaaxay kana soo gudbey xoogagga horusocodka.

kuwa dimoqraadiga iyo waddaniga oo hormood u yihiin dabaqaadha shaqaalaha iyo xisbigeeda horseedka ah, iyagoo iskaashanaya dhaqdhaqaqyada gobannimo doonka ayey rideen faashistadii dabadhilifka u ahayd imberyaliyadda caalmiga, arrintaas ayaa suurto gelisay in LISBON uu ka soobaxo baaqii lagu camhaareynayey gumeysiga imberyaliyadda iyo siyaasadaha kala duwan ay ku adeegato.

Sidaas awgeed ayaannu dareensannahay jirista kacaanka Bortoqaal oo meel kala soo jeeda xoogagga horusocodka adduunka.

## WAFDI XHKS EE KA QAYBGALAY KULAN SAAXIIBTINIMO

Wafdi ka socda XHKS oo uu Hoggaaminayo Jaalle Warsame Cali Faarax xubinna ka ah Golaha Dhexe isla markaana ah ku-xigeenka Guddoomiyaha Hoggaaanka Arrimaha Dibedda XHKS ahna Madaxweynaha Golaha Saaxiibtinimada iyo isbahayisiga ayaa ka qayb galay shirkii Ururka Saaxiibtinimada Caalamiga (International Friendship League) ee J.J.D. iyagoo ay kala qayb galeen Madaxweynayaasha iyo Xoghayayaasha Guud ee Ururrada Saaxiibtinimada ee Qarameed ee Dunida oo dhan.

Shirkas oo lagu qabtey Barliin, Magaalo Madaxda J.J.D wafdi loo aqoonsaday si caalamii ah Dalkaa J.J.D. taas oo ka dambeysay markii ay gaareen chismo Hantiwadaageed; waxaa mahad mutesystay halganka dadka shaqaalaha ah ee ay hoggaamiyayaasha ah Maarkismo-Liinsiimo ee Xisbiga Mindnimada Hantiwadaagga (Socialist Unity

Party) oo kaalin weyn kaga jira horukaca dunida Hantiwadaagga xag dhaqaale, xag dhaqan iyo xag milatarinimoba, shirkasii wuxuu fursad wanaagsan u ahaa xidhiidhka wanaagsan, khibradeha, iyo horukaca dalalka Saaxiibka ah.

Wufuuddii ka qayb gashay shirkas intooda badani waxay ahaayeen Guddoomiyayaashii iyo Xoghayayaashii Guud ee ka qayb qaatey aqoonsigii caalamiga ahaa ee J.J.D. Wafdigii X.H.K.S. waxay halkaa ka cadeeyeen horkicci Kacaanka Hantiwadaagnimo ee ka socda iminka J.J.D. wafdigaa ka socdey X.H.K.S. waxay si cad u muujiyeen dhismihii X.H.K.S. taariikhdiisa, barnaamijkiisa iyo go'aannadii Kalfadhigii saddexaad ee Guddiga Dhexe, isla markaana waxay wax ka sheegeen abuuritaankii Ururrada. Bulshada ee ka danbeeyey XHKS.

Wafuuddii kasoo qayb gash-

ay shirkas oo dhami waxay la socdeen heerka siyaasadda dhaqaalaha, dhaqanka iyo himilooinka J.J.D. taas oo hore loogu sharxey shirweynihii 9aad ee Xisbiga Midnimada Hantwadaagga, kaasoo lagu qabtey Baarliin, Magaalo Madaxda J.J.D. sannadkii 1976dii. Nolosha J.J.D. waxa lagu yaqaan daganaanshaha siyaasadda; korinka suggan ee dhaqaalaha iyo horukaca xagga sayniska, waxbarashada, dhaqanka iyo Tiknoolooyiada. Wuxuu cad in cadowga Hantiwadaaggu aanu sinaba isu horraagi kareen Kerriinka Hantiwadaagga ee J.J.D.

Intii uu wafdigu joogay J.J.D waxay aqoon-isweydaarsi iyo warar la yeeshay Madaxweynaha J.J.D kan guiddida Isbahaysiga Afrikaanka iyo Aasiya iyo madax kale oo ka tirsan Gudciga Dhexe ee X.M.H. kuwaasoo warbixin ka siiyey wafdigaa waayo aragtinimada J.J.D. una fidiyey taageero dadka hal-

gamaya ee J.D.S. si ay u xaqiijiyaa himiladooda iyo teennaba. Intii uu Wafdigu joogey J.J.D. wuxuu arkay horumarka uu gaadhay dhismaha hantiwadaagga ee dalkas waxaanu booqday laba gobol oo ka mid ah : Liibsik iyo Haalie waxaanay wada hadallo la yeeshen ururro badan oy ka mid yihin kuwa shaqaalaha iyo warshadaha. Wafdigu wuxuu ka dhergay xaaladda dhaqaalaha iyo ijtimaaqiga. Shaqaalaha saneada ee magaalooyinka iyo iskaashatooyinka dibedaha, dhammaan kasoo qayb galayaashii shirku waxay u bogen heerka nolosha shaqaalaha J.J.D. kaasoo aan la gaadheen hantiwadaagga la'aanti. Ka dib markii ay wareysi la yeeshen qof qof iyo kooxba waxay kaaso qayb galayaasha qaaradaha oo dhami aqoonsadeen jiritaanka dimoqraadinimaada Hantiwadaagga J.J.D.

Wafdigu waxa kaloo uu fursad u helay inuu la kulmo Jaalle Heermaan Aksan oo xubin ka ah Golaha Siyaasadda ahna Guddoomiyaha Guddida Xiriir-

ka dibedda ee SED, isagoo ka siiyey wafdigaa war cad oo ku saabsan xiriirka X.M.H. iyo X.H.K.S.waxaa kale oo uu ka hadlay Siyaasadda dibedda ee J.J.D., taas oo ah mid u haboon dhismo Hantiwadaageed, taageerada dadka u halgamaya xornimada iyo xaqiijinta mabaadii da nabadda iyo wada-jiritaanka. Jaalle Warsame Cali wuxuu mahadnaq u jeediyey Ururka saaxiibtinamada iyo SED fursadda ay u siisay inuu la kulmo Jaallayaasha badan ee mas'ulinta ah ee ku jira Xisbiga ee uu la yeeshay is wareysiga ku saabsan horukaca Afrika iyo kan dunida guud ahaaneed iyo kan Geeska Afrika gaar ahaanba ee ku fadhiba mabaadii'da caalamiga ah, waxaanu ku nuuxnuu-xasaday faa'iidada kaalinta jabbadda ka horjeedda imberyaaliyadda iyo dagaalka dhaqdhaqaaqyada xornimoddoenka ahi ay kula jiraan monobooliga caalamiga ah, gumeysiga, gumeysiga cusub, faashiiisimada.

Waxa kale uu sheegay in X.H.

K.S. kasoo horjeedi doono xoggagga dibusocodka ah, xoojinna doono isbahaysiga walaalitinimo ee midowga Soofiyetiga iyo dalka kale ee hantiwadaagga ah.

Markii wafdigu kasoo laabtay J.J.D. wuxuu soo maray Midowga Soofiyetiga halkaasoo uu ka la kulmay wakiilka Ururka saaxiibtinimada Soofiyetigu la leeyahay dalalka dibedda iyo Ururka isbahaysiga Soofiyetiga-Afrika Aasiya waxaanu la yeeshay wada hadallo khuseeya labada urur iyo labada dalba.

Wafdigu waxay soo mareen Room, Magaala Madaxda Talyaaniga, halkaasoo ay kula kulmeen madaxda Guiddida Dhexe ee Xisbiga Shuuciga ee Talyaaniga, gaar ahaan Jaalle Giancarlo Pajetti oo xubin ka ah Guiddiga Siyaasadda iyo Jaalle G. Giadresco kuwaasoo oy la yee sheen wada hadallo ku saabsan Xaaladda Iminka jirta Afrika iyo tan Geeska Afrika gaar ahaan, iyo heerka uu maraayo xidhiidhka labaada xisbi ee PCI iyo XHKS.

## BISHII TAAGEERADA EE HALGANKA DADKA KUURIYA

Bishii Juunyo 25dii ayaa Guriga Shaqaalaha lagu qabtay xafilad lagu maamuusayay 27 guuradii ka soo wareegtay weerarkii Imberiyaaliyadda Maraykanku ku soo qaadday dalka Kuuriya. Xafladdaa oo ku aaddanayd bishii taageerada dadka Kuuriya oo ah 25ka Juun ilaa 27ka Luu- liyo (maalintii dagaalku bilaabmay iyo maalintii uu dhammaad) waxaa ka soo qaybgalay Guddoomiyayaasha Hoggaam-madu Abaabulka, Shuruueda iyo Caddaaladda, Goddoomiyaha U.D.H.K. Soomaaliyeed, Danjiraha Dalka Kuuriya u fadhiya


J.D.S, madax ka tirsan ururada bulshada iyo dadweynaha fara badan.

Jaalle Maxamuud Cali Axmed Guddoomiyaha Xiriirka Guud Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, oo halkaa khubbad ka jee-diyay wuxuu guud maray taariikhdi iyo halgankii dheeraa ee shachiga Kuuriya u soo mareen madax bannaanidoo iyo dagaalka ay maanta ugu jiraan sidii mar labaad ay u midayn lahaayeen dalkooda.

Danjiraha Kuuriya u fhadiya Soomaaliyeed, Jaalle Swak Chel

Su oo isna munaasabaddaa ka hadlay wuxuu wax ka taabtay xiriirka wanaagsan ee ka dhexeeyaa labada dal iyo labada shaabi ee Soomaaliya iyo Kuuriya, kaasoo uu sheegay inuu ku dhisanyahay saaxiibtinimo, mabda' iyo aragtii labada shaabi ay ka wada simman yihin xagga nacaybka gumeysiga iyo xoojinta nabadda adduunka.

Kuuriya wuxuu soo weeraray Maraykanku 25kii 1950kii, dagaalkaana shaebiga Kuuriya wuxuu ku guulaystay 27kii Luul iyo 1953kii.



# Arrimaha Siyaasadda, Dhaqaalaha iyo Bulshada ISBEDDEL KACAANEEDKA

## WAX-BARASHADA SOOMAALIYEED

Yuusuf Xaaji Xirsi

Si weyn ayay waxbarashadu isu beadeshay Soomaaliya tan iyo intuu kacaanku curtay. Isbeddella-daaasi waxay u badan yihii dar tiro oo saameeya waxbarashada tooska iyo ta dadbanba, inkastoo isbeddello tayo-ahaaneed jireen oo badiba ku dheehan Soomaaliyeentii waxbarashada. Dhaqangelintii far-Soomaalida ee 1972kii ayaa si weyn u suuragelisay isbeddella-daa.

Gumeysiga, qaabka waxbarasho ma aha mid aqoon iyo dhaqanba gudbiya si uu u barbaariyo xeeladaha qofku ku doorinayo waayihiisa: dhaqaaleed, dhaqaneed siyaasadeed iyo bulsheedba, kuna sugayo mid ka horumarsan kana barwaaqaysan hadba kuu gudbaayo. Waxtar daaye, gumaysiga waa-bu liidaa dhaqan iyo garasho waxay ummadduu markaa gumeystaa ka dhaxashay fac intii ka horreysay. Markuu ugu roonaa gumeysiga aqoon-sooc dhillowyahana (parasitic clite) ayuu ku abuuray dhismo bulsheedkii taagnaa, aqoon-soocaa oo aan wax horumar ah horseedi karin sidaa awgeed ayuu Walter Rodney u yidhi, «Dulucdii wax-barashada gumaysiga waxay shayd tab Afrikaanka loogu tababaro maamulka gudaha oo ay wad-aan iyo shaqaale u abuuridda xub-nihii dhaqaale ee Hantigoosiga ee caddaanku lahaa. Isku soo wada duuboo, waxbarashadaa waxaa looga dan lahaa in koox yar oo Afrikaan ah laga qayb geliyo dhigmi-

radka iyo cadaadiska lagu hayo qaaradda. Waxbarashadii gumaysigu waxay ahayd: cadaadis, dhiig-miirad, abuuridda jahawareer maskaxeed iyo dib-u-dhac dhaqaale».

Sidaa ayuu gumaysigu Soomaaliya kaga xaraantimeeyey waxbarashada. Sarkaal Ingiriisa oo Gobolkaa Waqooyi joogay xilligii gumaysigu, wuxuu yidhi: «Iyadoo ay aad halis u tahay in Soomaalida wax la baro iyo waddanka oo aan qaadi karin ardayda dugsiyada ka soo baxda, waxaa ku filan 8 Dugsi oo hoose iyo hal dugsi dhexe; si loo buuxiyo heerarka hoose ee maamulka».

Waagii Fashiistada Sarkaal Talyaaniya ayaa qoray warqad sir ah, taasoo uu ku hor-istaagay fidinta dugsiyada Hoose iyo afka tal-aayniga oo arday badan la baro. Wuxuu Sarkaalkaasi ku dooday in afka Talyaaniga la baro oo keliya carruurta Ugaasyada iyo Laandheerayaasha, waayo kuwaa ayaa berri aabbayaashood dhaxli doona, turjubaanno noqon doona, berri buuxin doona maamulka. Waa fikrad habow ah inaynu meelo aqoonta lagu xanraaneeyo abuurraa, waayo waxaynu siinaynaa wax qabilkoodu aanu lahayn ama kooxdooda bulsho.

1934kii ardayda Soomaaliyeed ee dugsiyada Talyaaniga wax ku baranaysay waxay ahayd 1,265. Kulligood dugsiga hoose ayay wax

ka baranayeen. 1945kii-1955kii qabytii Soomaaliya ee Talyaanigu gu-meysanayey waxaa ka dhisnaa 96 dugsi oo hoose oo ay ku jiraan 5,863 oo wiil iyo 727 Gabdhood; 6 Dugsi oo Dhexe oo ay wax ka bartaan 459 wiil iyo 42 gabdhood, 2 dugsi oo Sare oo ay wax ku bartaan 55 wiil. Geesta Waqooyi 1953kii waxaa ka dhisnaa 19 Dugsi oo hoose oo ay ku jiraan 1,021 will iyo 29 gabdhood, 3 dugsi oo dhexe oo ay wax ka bartaan 345 wiil, 1 dugsi oo Sare oo ay ku jiraan 16 wiil iyo dugsi farsamo.

Markii gobannimada la helay wax aan sidaa u sii ridnayn ayaa isbeddelay; hase yeesh ee curashadii kacaanka ayaa is-beddel weyn la timid. Siyaasadda waxbarashada ee dawladda kacaanka ihi waxay ku qotontay:

B) Ballaadhinta waxbarashada iyadoo la dhaqan-gelinayo siyaasadda waxbarashada qasabka ah (6 jir ilaa 14 jir);

T) Dimoqraadiyadeynta waxbarashada iyadoo qof walba kaansho la siiyay uu wax ku barto, iyadoon loo eegin awooddiisa dhaqaale sidii dhici jirtay kacaanka hortii oo carruurta maalqabeenka oo keliya waxbarasho la siin jiray.

J) Soomaaliyeeynta waxbarashada, waayadii hore af-qalaad iyo dhaqan shisheeye ayaa sal u ahaa, had-dase af-Soomaali ayaa wax lagu

bartaa, buugaagta iyo qoraalladuna waxay sawiraan dhaqanka iyo degaanka Soomaaliyeed.

X) Hantiwadaagaynta waxbarashada, taasoo ku timid dugsiyada heer kastoo ay yihinba oo lagu dhigo mabaadiida hantiwadaagga. Kh) Farsamaynta waxbarashada taasoo ahayd dugsiyada oo lagu dhigo farsamada gacanta. Qorid-dii Af-Soomaaligu waxay aad u fududaysay higsadkii ahaa kacaan-maynta waxbarashada.

Sannadkii waxbarasho ee 1969-kii-1970kii ardayda dugsiyada wax ku barataa waxay ahaayeen 55.021. Shantii sannadood ee xigay 1971kii — 1976kii, tiradii ardayda dugsiyada ku jirtaa waxay gaadhaday 240,550. Taasi waxay muujinaysaa in shantaa sannadood tira-da ardaydu korodhay 337.2%. Af-ar sannadood, 1969kii — 1970kii iyo 1973kii — 1974kii ardayda dugsiyada Hoose waxay kordheen 128.2%, haddii kale sannadkiiba waxaa ku kordhayay 32.1% ; dugsiyada dhexe waxay kordheen 51% ama sannadkiiba 12.8% dugsiyada Sarena waxay kordheen 63.8% ama sannadkiiba 16% 19-69kii — 1970kii dugsiyada Sare waxa ku jiray 6.412 oo arday, 737 ka mid ihi gabdho ayey ahaayeen. 1973kii — 1974kii ardayda dugsiyada sare waxay gaadheen 13,500 oo 1,773 gabdho ahaayeen. Markaynu hablaha soo qaadanno, muddadaa afarta sannadood ahayd waxay kordheen 140.6%

Kacaanka hortii, waxaa jiray saddex dugsi farsameed iyo laba dugsi xirfaddeed. Maanta waxaa dhisan 4 dugsi farsameed 2 boliteknik (oo la furayo 1977ka), 2 dugsi karraaniyeed, 1 dugsi oo ka badda ah, 1 dugsi oo beeraha ah, 1 dugsi oo Xoolaha ah, 3 dugsi oo kalkaliyayaasha Caafimaadka lagu carbiyo, 1 dugsi oo daaqa ah

yo dugsi lagu carbiyo farsamo-yaqaannada is-gaarsiinta. Xilli aayaynu joognaa horumar bilaabmay, waxaana loo baahan yahay in ka-caanka farsameed iyo mid cilmi-yeedba la sameeyo. Mar waa in-aynu kordhinnaa dugsiyada farsa-mada iyo xirfadaha, marna waa in-ynu manhajka waxbarashada ee dugsiyada Sare ku darnaa aqoon xirfadeed iyo mid farsamaba. Mustaqbalka fog taasi waxay ku soo ururaysaa isku dheellitirka falka iyo fiirada, waxbarashada iyo wax-soo-saarka. Diyaarinta qalabka wa-xbarashada ee dugsiyadaasi waxay af-Soomaaliga ku soo kordhinaysaa ereyo cusub oo afka cilmiyeeyntiisa wax weyn ka tari doonta. ka sokow erayada qalaad ee la Soomaaliyaynaayo, waxa fiiro loogu noqonayaa aqoon Soomaaliyeddi iydoo magacyadaa duugoobay si cu-sub oo waqtiga la socota loo istic-maali doono.

1969kii — 1970kii, tirada Macallimiinta Soomaaliyeed waxay ahayd 1,873 dugsiyada hoose, 1,542 dugsiyada dhexe, 252 dugsiyada Sare, 79 dugsiyada farsamada iyo 10 dugsiyada tababarka macallimiinta. 1973kii — 1974kii, tirada macallimiintu waxay u korodhay 3,826 dugsiyada hoose, 437 dugsiyada Sare, 159 dugsiyada farsamada, 44 dugsiyada tababarka macallimiinta ah, 20 dugsiyada xanna-nada carruurta ah, wadartooduna 4,486. Tirakoobaasi waxay ina tusaysaa in macallimiinta dugsiyada hoose korodhay 148.1%, dugsiyada farsamada iyo kuwa sare oo kordhay 84% iyo kuwa dugsiyada tababarka macallimiinta oo kordhay 340%.

Soomaaliya, iyadoo gumaysigii uu uga danbeeyay talis dib-u-socod ihi, kamay suurto-gelin in Jaamacad laga dhisaa. Xil gaar ah ayay dawladda kacaanka ihi iska saar-

tay sidii loo dhisi lahaa Jaamacad Waddaniya 1972kii shan Kulliyadood ayay Jaamicaddu lahayd: Waxbarashada, Shariciga, Dhaqaa-la, Beeraha iyo Culunta. 1974 kii waxaa lagu daray kulliyadaha daawada, xannaanada Xoolaha iyo Culunta dabeecadda (Xisaabta, Injiyeeriya iyo Jiyoalajiyada). Maanta Jaamacadda Qaranka waxaa ku jira 2,500 oo arday oo 10% ay ka yimaadeen xoogsatada oo waxbarasho Jaamacadeed deeq loo sii-yey. Tirada gabdhahu Jaamacad-da ku jiraa waxay ku gaadhad 10% muddo afar sannadood ah. Kulliyadda waxbarashada, oo diyaarisa macallimiinta dugsiyada Sare, sannadkiiba waxa gala 500 oo arday barnaamijka labada san-nadood ah ku qalin jebiya. Haatan Af-Ingiriisi iyo Talyaani ayaa Jaamacadda wax lagaga bartaa; hase yeeshii 1981ka hormadii ugu ugu horreysay ee Af-Soomaali wax ku barta ayaa irridaha Jaamacadda loo furi doonaa. Qaban-qaabadii ayaa la wadaa Jaamacadda lagu Soomaaliyeyn lahaa. Maanta xataa waxaa jira duruus Af-Soomaali lagu bixiyo. Tallaabooyin waxa laga qaaday tarjumadda buugaag-ta Jaamacadda, tusaale ahaan wa-xaa imminka faraha laga qaaday tarjumad buug Kimika ah oo In-giriisi laga tarjumay oo ahaa 623 bog.

Soomaaliyeentii waxbarashadu waxay kalliftay in la diyaariyo buu-gaag badan oo Af-Soomaali ku qoran sida: Aljibrada, Artimati-kada, Joometeriyada, Kiimikada, Biyoalajiyada, Fisikada, Taariikh-da, Juqraafiga, afafka, Suugaanta iyo buugaag la xidhiidha dugsiyada farsamada iyo kuwa xirfadaha. Hawsha ugu weyn waxay ka soco-taa xagga qoraalka buugaagta. Xisaabta, Fisikada, Biyoalajiyada iyo Kimikada, 1972kii ka hor buu-

gaagta oo dhan af-qalaad ayaa lagu qori jiray, shisheeye ayaana qori jiray, wax xidhiidh ahna lama la-hayn degaanka iyo dhaqanka ilma-ha Soomaaliyeed. Si loo Soomaali-yeeyo waxbarashada Wasaaradda waxay hawlgelisay 203 macallin oo Soomaaliyeed oo loo kala qaybi-yey 15 guddi baadhdeed si ay u diyaariyaan buugaagta heerarka dugsiyada oo dhan haatanna ah 6 Sannadood oo dugsi hooseedyo ah iyo 4 Sannadood oo dugsi Sare ah. Cuulaha qoraallada buugaagtaa laga gaadhad waxay dhan yihiin iyadoo la dhammaystiray 135 buug oo Af-Soomaali ku qoran:-

Heerka	Tirada	Buugaagta
Dugsiyada Hoose	70	
Dugsiyada Sare	40	
Dugsiyada Farsamada	5	
«« Dhaqaalaha Guriga (Sare	4	
«« ««Guriga (Dhexe)	2	
«« Xannaanada Carruurta	1	
Wax. Dadka Waaweyn	10	
Dugsiyada Beeraha	1	
Dugsiyada Kalluumaysiga	1	
«« dhaqmaatinka Digaagga	1	
		Wadar 135

Intii u dhaxaysay 1973kii iyo iyo 1976kii, Wasaaradda Waxbarashadu waxay soo saartay 6.2 malyuun oo buugaag Af-Soomaali ah. Daabacaadda buugaagta iyo Soomaaliyeenta waxbarashada waxa sii fududaysay siyaasaddii ahayd qaramaynta dugsiyad khaaska ahaa iyo madbacadihii ay dadku lahaa-yeen.

Isbeddelka kacaaneed, tiro iyo tayaba ee waxbarashada saameeyaa kama leexan karo habka horumarka ee Hantiwadaagga ah. Waxa taa ina tusaysaa sida hagar baxa ah ee dadweynaha Soomaaliyeed uga qaybqaatay ballaadhinta dugsiya oo iskaa-wax-u-qabso lagu hirgeshay. Waagii gumaysiga, dadka

Soomaaliyeed uma dhega-nugleyn waxbarashada gumaysiga hase yee-shee xilligan kacaanka dadweynaha Soomaaliyeed heegan ayay u yihiin ka qayb-qaadashada dhismaha dugsiyada qasabka ah. 2,154 qol ayaa dugsiyada hoose ku kordhay, 1180 qol oo ka mid ah baa 1975kii lagu dhisay iskaa-wax-u-qabso.

Si weyn horumarku wuxuu uga muuqdaa waxbarashada dadban oo intii af-Soomaaliiga la qoray aad u ballaadhatay. Waagii gumaysiga ma jirin waxbarashada dadka waaweyni, waxay ahaayeen 18.056, oo 3,188 ka mid ihi ay dumar ahaayeen. Dugsiyadaa waxaa lagu baran jiray Talyaani, Carabi ama Ingiriisi. waxaa la aqoon-saday inaanay waxbarashada dadka waaweyni si fiican u hirgelayn had-daan la dhaqan gelin far-Soomaali-da. Bishii Maarso 8dii, 1973kii, markii la qoray Af-Soomaaliiga ayaa lagu dhawaaqay in la qaado olole far-barasho. Ololaha waxaa lagu hirgeliyey magaaloyinka iyadoc lagaga qayb qaatay iskaa - wax-u-qabso. Wasaaradda Waxbarashadu sida ay diiwaan-gelisay ololahaan waxaa ku far bartay 400,000 oo qof.

Agosto 1dii, 1974kii waxaa bilaabmay ololihii Horumarinta Reer Miyiga. Olole wuxuu ahaa ku mudan taariikhda Ummadda Soomaaliyeed. Wuxuu ahaa mid loogga dan lahaa in lagu awdo kala durugsananta miyiga iyo magaalada. Ah-miyadda ololaha la siiyay waxaa u daliil ahaa dugsiyadii oo sannad irridaha loo xidhay si loo hawlge-lio ardayda iyo macallimijintaba. Ololahaasi meelaha uu taabanayay waxay ahaayeen:

- 1) Dadka Miyiga oo jahliga lagu tirtiro
- 2) Daryeelka Caafimaadka Dadka

- 3) Xannaanada Xoolaha
- 4) Tirakoobka Dadka iyo Xoolaha.

Mugga iyo baaxadda ololahaasi lahaa waxaad ka garanaysaa mar-kaad dhugato dhulka J.D.S. ku fadhidoo iyo tirada dadka ku dhaqan. Soomaaliya waxay ku fadhidaa dhul dhan 650.000 Mayl oo wa-reegsan, dadkuna waa 4.5 Malyan. Miyiga degsijimadu waa qubane dadkuna had iyo jeer waa guurguura oo meel qudha ma deggana. Is-gaarsiinta baadiyuhu aad ayey u xun tahay, jidadka gaadiidkuna si-daa uma fijena. Run ahaantii tuu-looyinka intooda badani waddoc-yinba ma lahayn ololaha hortii. Ololaha Horumarinta Reer Miyigu intuu socday waxaa la daweeeyey 1.4 Malyan, oo qof waxaa la talla-alay 1.4 Malyan oo qof 19 Malyan oo xoolo ah ayaa la daweeeyey, 2.3 Malyan oo neef ayaa la tallaalay, gebi ahaan 1.757,779 oo 597,665 haween yihiin ayaa ka qeybqaatay Ololayaashaa. Maanta dadka Soomaaliyeed 70% ayaa wax qora waxna akhriya. Haddaan af Soomaaliigu qornaynna taasi ma suro-gasheen.

#### Gunaanad

Isbeddelka ku dhacay waxbarashada Soomaaliyeed ee kor aynu ku soo sheegnay wuu dhumuc weynaa, hase yeeshii bilow ayuunbuu ahaa, wax weyn in la qabto ayaa inala gudboon mustaqbalka si aynu u gaadhno ujeeddocyinka fog ee aynu waxbarashadeenna ka leenahay meelaha qaarkood waa inaynu si qota dheer uga fiirsannaa, kuwaas oo ay ka mid yihiin:-

— Waxa inala gudboon inaynu horre u marinno waxbaarshada xirfa-deed iyo ta farsamaba, kuna dadaal lo inaynu xidhiidh fiican u yeello, waxbarashada iyo wax-soc-saarka.

- Waxaynu u baahannahay inaynu xidhiidhino falka iyo fiirada.
- Inaynu dhammaystirno dhismaha heerka sare ee waxbarashadeen, innagoo fiiro gaar ah siinayna dhamaystirka Jaamacadda Qaranka.
- Inaynu habaynno dugsiyada oo lagu barto hantiwadaagga cilmiga ah.
- Inaynnu isku dheellitirno dad-

ka dugsiyada inooga soo baxaya iyo baabideenna dhaqan-dhaqaaleed.

Dawladdu dhallinta dugsiyada dhexe dhammaysay shaqo ayey sii-saa, haddaba iyadoo dhallintaasi waxbarasho guud keliya soo qaadatay miyaanay Xafiisaya dul buutxin doonin maamulkuna sidaa ku hafan doonin? Arrimaha iyo kuwola xidhijda ayaannu tirsiyada dam-

be ee HALGAN ku soo qaadi doonaa.

Raadraac:

1. Walter Radney, «How Europe underdeveloped Africa» P.264.
2. C.R.U. Bell, cited in Helen kit chen.
3. Gen.Gug — liems nasi cited in E. Silva Bankhurst, Ex Italian co-
4. See Robert Hees, Op. Cit;P. 170



## Dhibaatooyinka Maalmahan

# SHILALKA WADDOOYINKA

Intee arday yar intuu gurigoodii ka soo kallahay, isagoo duhurkii qado doonaya jidka baabuur ku dardaray aan hooyadiina dib u arag? Intee Aabbo talax-gabay oo gabogu haleelay isagoo tukubaya inkaar qabe meel baas ku ordayaas qudhaka jaray? Intee hooyo agoon kornaysay oo kaalmo adeerkood oo Xamar degganaa uga soo doontay dhexda baabuur kula gaddoomay halkaana ku nafweyday? Shil... shil baabuur weeye, idaaqadda ayaynu ka maqallaa, jidka intaynu maraynana waynu aragnaa. Shilalka waddooyinka ama baabuurtu waa wax nolosheenna ku cusub waayo nolosheen ni raacatannimo awr ayaa gaaciid inoo ahaa, lugta ka sokowna faras ayuu ahaa wixii la fulaa. Horumarka ayaa ina gaadhiiyay inaynu maanta jidad iyo baabuurba yeellanno. Hase yeeshee, taasi ina geysiinayso inaynu haaraanno jiritaanka baabuurtu iyo makiinadaha innagoo ka dibaaqaynaa dadka ay inaga laynayaan. Mar walba waa inaynu maanka ku haynnaa in haddii sida sharcigu yahay, habboonaantuna ku jirto gaadiidka loo wado, dadkuna is-xilqaamo laga baaqsan karo shilalalkan badan ee ina dhammeyay.

Meelaha shilalku ay ka dhacaan laba aan u kala qaadno: Xamar oo ah magaalo madaxdii J.D.S oo dad iyo baabuurba lagu badan yahay iyo gobollada Jamkuuriyadda. Shilalka labadaa meelood ka dhacaan way kala duwanyihiin. Marka aynu Xamar soo qaadanno shilalku waxay u badan yihiin laba baabuur oo is-duqeyay, baabuur qof jidka ka tallaabaya jiidhay iyo baabuur meel (derbi, tirarka korontada iwm) duqeyay. Dhaawac ayay shilalkaasi u badanyihiin. Tiro ahaan shilalka caynkaasi way badanyihiin hase yeeshee shilalkiiba qof, laba ama saddex ayaa wax ku gaadhaan. Shilalka gobollada ka dhacaan way ka geddisan yihiin. Baabuurtii ayaa gaddoonta, halkaana dad badan ayaa ku qudh baxa kuna dhaawaema. Shilalku ma badna waayo baabuurtu ayaa yar, hase yeeshee rakaab badan oo baabuurtaa raacda iyo xamuulka ayaa keenna dhimasho iyo dhaawac badanba.

Maxaa keena shilalka? Way fiicantahay inaynu su'aashaa jawaab inta qaneisa u hello, cudurna dawadiisa waxa la helaa marka jeermiga curiyay la takooro. Dad dhowr ah ayaannu arrintaa weydiinnay oo ku lug leh hawlaha la xirriira baabuurtu

yo jidatka. Aan ku horreynno Dhamme Siciid Caddib Gaateeye oo ah taliyaha Booliiska Waddooyinka Dhamme Siciid markaannu su'aasha weydiinnay, wuxuu yidhi, «shi lkii dhaacay 1976kii aad ayay u bad naayeen, sannadkan sidii hore maha waa se u dhowyihii, markaannu eegno lixdii bilood ee ina dhaafay». Halkaa Jaalle Siciid wuxuu uga gudbay inuu tiriyo sababaha shilalka keena oo uu ku soo ururiyay:-

- 1) Magaalo-socod-xumada dadka. Waa dadweynaha magaalada Xamar deggan (dad badan oo dhawaan soo gal ah) oo aan dhowrin habka iyo nidaamka jidka looga tallaabo.
- 2) Baabuurtii oo badatay, taasoo keentay jidkii oo yaraaday.
- 3) Xilkasnimo-darrada dadka baabuurtu wada.
- 4) Liisannada baabuurtu oo si xun loo qaato.
- 5) Qorshaha jidatka oo aad u xun;
- 6) Baabuurtu oo rarka lagu badiyo, waxaaney badiba ku eg tahay baabuurtu goballada u kala socota.

Shilalku aad ayay magaaladan Xamar uga dhacaan. Haddii aanay

maalin dhiein, maalinta dambe way dhacaan. Mar aannu Sadex Alifle Booliska Waddooyinka ah waydijinnay jidodka ugu shilalka badan, wuxuu noogu jawaabay, «Waa jidka: Makal — Mukarrama, jidka Ummadda, Jubbada Sare, Lenin iyo jidka Jamhuuriyadda».

Waxaa kale oo aannu wareysanay G/Sare Maxamed Yuusuf oo taliye ka ah Hawlgelinta Cijdam-mada Booliska. Jaalle Maxamed isagoo aan waxba ku diiddanayn Dhamme Siciid marka laga hadlayo sababaha shilalka keena wuxuu ku daray, jidodka oo aad u xun iyo baabuurta oo aan u kala qaybsanayn wax dadka qaada iyo wax rarka qaada, taasoo keenta marka baabuurku gaddoomo in rarku dad badan laayo ama dhaawaco. Wuxuu G/Sare Maxamed yidhi, «Degsii-mada ayaa horreysay, taasoo la ti-

mid in marka jid la rabo in la sameeyo la dumyo guryo, hase yeeshee jiíku aad u yaraado. Marna jidkii loo baahnaa lama heli karo, waayo taasi waxay inagu khasbay-saa in guryo badan la dumyo».

Bal aan u gudubno waaxda Farsamada ee Dawladda Hoose. Jaalle Abuukar Aaden (Cagabuur) oo Waaxdaa maamule ka ihi wuxuu noo sheegay in Bawladda Hoose sannadkiiba 50,000/ = ku bixiso habaynta jidodka. «Ayaan darro waxay tahay,» ayuu yidhi, Jaalle Abuukar «dadkii oo birihii iyo tabbeeloooyinkii fuqsanaya aannu ugu talo gallay jidodka in lagaga tallaabo.»

Intaan haddaan ku soo dhaafno sababaha shilalka keena, bal aan eegno sannadihii 1975kii iyo 19-76kii shilalkii dhacay.

Sannadka	Tirada shilka	dhimasho	dhaawac
1975kii	3,968	313	2,901
1976kii	3,911	410	2926

Haddaan mugga shilalka mid tu-saale u soo qaadanno, sannadkii 1976kii 3 shill oo qudha waxa ku dhintay 44 qof, dhaawaca hadalkoodaba daa, waanu ka xunnahay inaaney tirakoobtu mid tifaftiran ahayn.

Waxaa jirá xeer khuseeya shilalka waddooyinka, hase yeeshee waa mid aad u jilicsan una baahan in dib loogu noqdo, sida naboo sheegayna mid eusub ayaa gacanta lagu hayaa. Taas maenaheedu maaha inaanu jirin sharci lagu qaadasa dalka baabuurta wada ee shilalka keema. G/Sare Maxamed Yuusuf

wuxuu noo sheegay in qodobka 445aad oo ah kuwa Xeerka ciqaabta Soomaaliyeed uu dhigayo in qofka shilka curiya la xidhi karo 6 bilood ilaa 5 Sanno haddii shilku mid fudud yahay, hadduu mid culusc yahayna ilaa 12 Sano.

Waxaa isweydiin leh inta shil dhacaysay ee qudhbax iyo dhawaac ba aynu arkaynay ma aragnay dirwal la xukumay, intii la doonaba ka la xidhee? «Booliiska wixii gef ugu muuqda wuu soo qabtaa, markaa Maxkamad ayuu u gudbiyaa», ayuu yidhi G/Sare Maxammed Yuusuf.

Haddaynu eegno meesha B/weyne iyo B/Barde u dhexaysa ee inta badan shilalku ka dhacaan guddi ayaa 75kii loo saaray. Go'aannadii iyo taloooyinkii ay guddidu soo jee-disay waxaa ka mid ahaa in darbi loo sameeyo meelo ay is-yidhaa-deen baabuurta ayaa ka dhaeda «Weli waxba lagama qaban sidii ayaanay shilalkii u dhacayaan», ayuu yidhi ninka noo waramayay.

Booliiska waddooyinku dadaal ayay hayaan ay ku yaraynayaan shilalka marka aynu eegno waaya-dan dambe sida jidodka qaar badan oo ka mid ah looga dhigay qaar baabuurta dhan keliya u socoto-Waxaa kale oo jirta in ardayda dugsiyada loo carbiyey inay ka çay-bqaataan hawla hjidodka (kala horidda baabuurta iyo dadka.) Wuxuu noo sheegay taliyaha Booliiska waddooyinku in ay haddana ku talo jiraan inay shaqaale u tababaraan.

Arrinta shilalku ma ah mid ay dhammayn karaan Booliiska waddooyinku, hase yaaeeshee waa hawl dad weyne. Dadweynuhu waa inuu ka qayb qaataa sidii shilalka loo baajin lahaa. Siyaabo badan ayaa dadweynuhu uga qaybqaadan karaa: jidodka oo ay ka tallaabaan meelaha loogu tala galay, astaama-ha (tebbeeloooyinka) jidodka oo aanay goyn, dadka baabuurta wada oo isxilqaan iyo feejignaan kordhi-ya.

Waxaa kale oo lama huraan ah in baabuurta loo kala çaybiyo kuwo dadka u gaar ah iyo kuwo xam-uulka qaada. Waa in la adkeeyaa liisan qaadashada oo aanay noqon wax qof waliba heli karo. Waxaynu joognaa xilli laga fiirsado ciqaabta la siinaayo nimanka shuferrada ah ee sida xilkasnimmo-darrada ah u wada baabuurta ciqaabtaasoo xadhib iyo liisanka oo laga qaadaba leh mid dambena laga xaraantimeeyo.



Arrimaha Dunida

# NABAD RAADINTA BARIGA DHEXE MAXAA KU CUSUB ?

M.A. Cashuur

Dhibaatada Bariga Dhexo waa mid khatar ah, halisna gelinaysa nabadda adduunka. Sidaas daraadeed waa arrin hoggaan kasta oo siyaasadeed ee dalalka adduunka ka taagani miisaan gaar abaaoneed siyo, golayaasha adduunkana si joogto ah loogu lafaguro sidii dhihaatadaas xalli nabadeed loogu heli lahaa.

Waxaa jirta in ay tahay lagama maarmaan si arrinta Bariga Dhexe looga gaadho nabadjelyo waarta in dulucda dhibaatada la garto, oo aan la iska indhaturin, markaasna loo maro jidka ead ee arrinta dawo u noqon kara.

1948kii, Imberyaaaliyadda Caalamiga ahi waxay Sahyuuniyadda garab ku siisay inay xoog ku abuurto dawladda loo yaqaanno «Israa'iil», halkaas oo dadkii Falastiin ee dhulka u dhashay xoog lagaga muquuniyey dalkoodii, lagana dhigay badh la dilo, badh si dujlinimo ah dalkoodii hooyo loogu gumeysto iyo badh dalkoodii laga irdheeyo oo ilaa iyo maanta caydhnimo iyo silic xeryo ugu nool dalalka Bariga Dhexe.

Ujeeddada ka dambeysay abuuritaanka dawladda Sahyuuniyadda ah ee Israa'iil waxay ahayd inay iisaalo danaha Imberyaaaliyadda Caalamiga ah, madaxana ka jebiso dhaqdhaqaaqa gobannimo-doonka Carabta ee halista gelin kara danahaas.

Siyaasadda dawladda Israa'iil si ay ujeeddadaas u fuliso waxay weligeed ku dhisnayd fidmo iyo qalaanqal ay abuerto iyo dhulballaadhsi joogta ah. 1948kii ayaa dhul badan oo kii dadka Falastiin loogu talagalay ah qabsatay, iyadoo ka faa'iideysatay kaalmadii Imberyaaaliyadda gaar ahaan Maraykanka iyo khiyanadii dawladihii daba dhilifka ahaa ee waagaas dalalka Carabta ka dhisnaa (hubkii faasidka shaas ee cilammada Carbeed la siiyey).

Kacaankii 1952kii dalka Masar ka curtay, wuxuu halganka gobannimo-doonka Carbeed siieyey horucak iyo xoog hor leh Kacaankaas isbeddellada bulshannimo uu keenay oo dhinaca hantiwadaagga u janjeera, una daneynaya dadweynaha xoogaatada ah, iala markaana wuxuu medaxa ka jebiyey kaalintii siyaasiga ahayd ee dibusocodka dhulgoosatadii iyo burjuuwasiyaddii gumeysiga ku xirneyd. Halkaas waxa ka dhashay in kacaanka Masar uu hoggaamiyo dhaqdhaqaaq siyaasi ah oo ka soo horjeeda imberyaaaliyadda, gumeysiga iyo gumeysiga cusub, Sahyuuniyadda iyo midabtakoorka, taageereysana halganka gobannimo-doonka oo garabsanaya Adduunka hantiwadaagga ah iyo xoogagga horusocodka ah ee dunida.

Isbeddelladaas kacaanka Masar dhaliyey iyo jidkaa siyaasiga ee cusubi wuxuu xoojiyey halganka dadyowga Carbeed guud ahaan, halkaas oo kacaammo horsocod ahi ka dhasheen dalalka ay ka mid yihiin Ciraaq, Aljeeriya, Suuriya iyo Jabada Yamen.

Falaceliska imberyaaaliyadda iyo Israa'iil waxay noqotay in si ay mowjaddaa horusocodka ah ee waddammada Carbeed saameysay, halisna gelinaysay danaha hantikoobadka shirkadaha dawladaha galbeed ee macaashka faraha badan ka hela bensiinka Carabta u horjoogsadaan ay dagaal hor leh ku qaadaan dalka Masar 1956kii kaas oo loo yaqaanno dagaalkii gardar-rada ahaa ee saddexnaa (Ingiriis, Faransiis iyo Israa'iil). Dagaalkaas waxaa fashiliyey dadweynaha Masar iyo adduunka horusocodka gaar ahaan Midowga Soofiyeti oo si qumman isu barbartaagay dawladda Masar.

Mar kale 1976kii ayaa Israa'iil weerar burcadnimo ku soo qaadday dalalka Carbeed ee Masar, Suuriya iyo Urdun hajkaas oo ay saddexdaas dal ka qabasatay dhulal ka weyn saddex jibaar dhulkiid Falastiin 1948kii laga siiyay.

Wax baan waxaa lagaga dooday Golayaasha Qarammada Midoobey dhibaatada Bariga Dhexec, waaana lagu cambaareeyey dawlad ku sheegga Israa'iil iyo siyaasaddeeda dhulfiisiga iyo gumeyisiga ah, waaana laga soo saaray go'aanno taariikhii ah, gaar ahaan in dawlaadha Israa'iil ay dhammaan ka kacdo dhulalkii ay ka qabsatay dalalka Masar, Suuriya iyo Urdun 1967kii, dadka Faasliinna helaan xuquuqda ah in ay ku noqdaan dalkoodii hooyo, kana taliyaan aayahooda dambe isla markaasna helaan gobannimo waddani ah iyo madaxbannaani buuxda.

Waxaa kale oo guul weyn u noqotay dadyowga Falastiin aqoonsiga siyaasaddeed ee ay ka heshay adduunweynaha Ururka Xoreynta Falastiin «P.L.O.», aqoonsigaas oo ah in «P.L.O.» iyo xaquuqda sharciga ah ee dadka Falastiin ay dhammaan aqoonsadeen Ururka Midowga Afrika, dawladaha ku jira Ururkaa siyaasaddoodu dhexdhexaadka tahay; waxaa kale oo ka mid ah aqoonsiga iyo guusha siyaasaddeed ee uu halganka Falastiin gaarey in Ururkooda P.L.O. ka noqdo Qarammada Midoobey goobjoog rasmi ah. Hal kaasna siyaasadihii Israa'iil iyo Imberyaaaliyadda Caalamiga ah go'doon fool xumi ku chacay, go'aanno fara badan oo cambaareynaya siyaasadda ay Israa'iil waddana ka soo baxeen Qarammada Midoobey iyo Ururada Caalamiga ah sida UNESCO, WHO, Ururka daryeelka Xaquuqda aadamiga iwm.

Aqoonsigaas ururka xoreynta Falastiin wuxuu ku soo hooyey dagaalkii qaraaraa ee dhinac millatari iyo siyaasadba ahaa uu nala galay Israa'iil, Sahyuuniyadda iyo imberyaaaliyadda caalamiga, guulaha waa-weynna ka soo hooyey taasoo keentay in kacaanka Falastiin noqdo xoog aan cidina iska indha-tiri karin.

Sidaas daraaddeed arrinta fure nabadeed u noqon karta dhibaatada Bariga Dhexec ee ay imberyaaaliyadda Caalamiga ahi iska indhatiraysaa waa: Iyada oo la aqoonsado xuquuqda shareiga ah ee dadka reer Falastiin oo ah in ay xaq u leeyihin in ay yeeshaan dawladnimadooda iyo madaxbannaanidooda buuxda.

Dagaalkii 1973kti dhexmaray dawladda Israa'iil iyo Masar iyo Suuriya wuxuu isbeddel ku riday tabihii Imberyaaaliyaddu ka lahayd goobtaas, waayo waxaa muuqday inaan Israa'iil mar kasta suuragal u ahayn jebinta xoogagga Carabta, gaar ahaan markii ay jirto midnimo Carbeed oo dagaalka si xoog leh uga qayb gasha iyo markii xoogga Carabtu ku tiirsan yahay kaalmada hagar la'aanta ah ee dalalka hantiwadaaggaa ah iyo adduunka horusocodka ah.

Waxyaabihii dagaalkaas ka soo baxay waxaa ka mid ahaa in la arkay in Batroolku noqon karo hub siyaasaddeed oo qayb weyn ka qaadan kara halganka Carabta xoogna siin kara. Waxaa kale oo muuqday in arrinta dadka Falastiin tahay xudunta dhibaatada Bariga Dhexec, taasoo aan marnaba la dhammayq karin haddii aan xal loo helin dhibaatada dadka Falastiin. Waxaa intaa raaca in si caddaan ah loo wada arkay xoogga halganka dadka Falastiin, taasoo ay muuqatay in Ururka xoreynta Falastiin yahay xubin aasaasi ah oo aan marna ka maqnaan karin meel kasta oo dhibaatada Bariga Dhexec lagaga xoojoonaayo.

Dagaalkii 1973dii iyo waxyaabihii ka soo baxay ka dib, Imberyaaaliyadda iyo Sahyuuniyaddu, iyaga oo aan marna beddelin istraatijiyadoodii iyo ujeeddooyinkii joogtada ahaa ee ku dhisnaa ilaalinta gacan sareyn ta Israa'iil iyo madax-jebinta halganka Carabta, gaar ahaan halganka dadka Falastiin iyo horusocodka Carabta, waxay dejisteer siyaasad cusub oo saldiggedu yahay in si deg deg ah loo baabi'yo midnimada Carabta, dawladaha Carabtana is-afgaranwaa joogta ah loogu dhex dhalayo, in la baabi'yo awoodda xoogagga horusocodka ah oo hoggaanka waddamma Carabta gacanta dib-u-socodka lagu soo celiyooyiyo in markaa ka dib halganka dadka Falastiin iyo horusocodka Carabtaba lagu jebiyo gacanta dibusocodka Carbeed.

Siyaasadoasu waxaa fulitaankeedu ku bilowday wixii lagu magacaabi jirey siyaasadda tallaabo - tallaabada ah ee uu Henry Kissinger garwadeenka u ahaa, waxay ku dhaqaqaqday in marka hore la dumyo xiriirka saaxiibtinimo ee ka dhexeeya dalalka Carabta iyo adduunka Hantiwadaaggaa iyo xoogagga horusocodka ah, taasoo ujeeddadeedu ahayd in horusocodka Carabeed waayo xooggii iyo kaalmadii saaxiibtinimo ee xoogagga Hantiwadaaggaa, marka labaadna wa xaa siyaasaddaasi awooddeedii isugu geysay in isbeddello lagu sameeyo dhismaha bulshadeed ee si horusocod ah ugu abuurmay dalalka Carbeed qaarkood, dibna loo soo nooleeyo awooddii dhaqaale iyo siyaasadeed ee dib-u-socodka.

Intaas waxa siyaasaddaasi uga tallaabsatay in dharbaaxo aan laga soo waaqsan karin lagu dhufto xoogagga horusocodka ah ee Carabta iyo halganka xoreynta dadka Falastiin, tallaabadaasi waa tii lagu fuliyey Lubnaan markii xoogagga fashistada go'doonka ah ee Lubnaan iyagoo kaalmeysanaya hubka Israa'iil iyo Maraykanka iyo eiddii la halmaasha ay dagaalka foosha xun kaga oogeen horusocodka dadka Lub-

naan iyo dadka Falastiin. Waxaa xusuus mudan in dadweynaha Falastiin lagaga dilay dagaalladaas in ka badan 25 kun oo qof. Haddii lagu daro 25 kun oo 1970kii dalka Urudun lagu qur gooyey, waxaa inoo muuqanaysa in 50 kun oo dadka Falastiin ahi gacan Carbeed ku dhinteen.

Ujeeddada arrimahaas ka dambeysay waxay ahayd in loo gogol xaa xalka dhibaatada Bariga Dhexe si uu u noqdo mid ay rabaan Imberyaaaliyadda iyo Sahyuuniyadda. Xalkaasi wuxuu ku fadhiyaa inaan Israa'iil ka wada kicin dhulkii dalalka Carabta ay ka qabsatay 1967kii iyadoo ku dacwooneysa inay hesho xuduud nabadgalyo, inaan dadka Falastiin xuquuqdooda marna loo soo celinnin dal iyo dawlad midna loo oggolaan, lana aqoonsan Ururka Xoreynta Falastiin iyo in dawladaha Carabtu aqoosadaan Israa'iil.

Sida Imberyaaaliyadda iyo Israa'iil u arkaan waxa keli ah oo xalka hortaagani waa kacaanka Falastiin iyo xoogagga horusocodka ah, sidaas darbeed bey ugu kacaan tallaabada ah tirtiridda xoogaggaas.

Sida xaaladdu hadda tahay waxaa muuqata in Imberyaaaliyadda, Sahyuuniyadda iyo gacantooda Israa'iil mawqifkoodu yahay midaan waxba iska bedelin, inkasta oo dunida nabadda jeceli dalbeysio in dhibaatada Bariga Dhexe laga gaaro nabad caddaalad ku dhisan, oo tixgelineysa xuquuqda sharciga ah ee dhinacyada is haya, gaar ahaan xuquuqda dalalka Carabtu u leelihii inay soo ceshadaan dhulkooda dhacan iyo in dadka Falastiin helo xuquuqdooda waddaniga ah, hase yeeshi Israa'iil halkeedii hore ayay taagan tahay, ilaa tan iyo haddana shirka Jineefa waxaa hortaagan mawqifka Imberyaaaliyadda iyo Israa'iil oo diiddan iney aqoonsadaan Ururka Xoreynta Falastiin iyo in Ururkaasi si xubinnimo buuxda ah uga soo qaybgalo shirkas. Waqtii aan fogeyn ayaa madaxdiin Wasaaradda Israa'iil ee hore Mr. Raabin wuxuu cadeeyey inaan xuduudda nabadgelyo ee Israa'iil dalbeysana marnaba ayna ahayn tii jirtay 1976kii iyo iaan Israa'iil marnaba oggoleyn iney ku noqoto xuduuddii

jirtey dagaalkii 6da maalmood ka hor, taasoo uu ku tilmaamay ineyahayd xuduud aan la daafici karin.

Hadda oo taliska dalka Israa'iil oo ku wareegay gacanta isu taagga «Likuud», oo lagu yaqaan inuu yahay argagaxiso garabka midig oo fog ah, waxaa muuqata in mawqifka Israa'iil sii qallafsanaaday, ninka isu taggaas ka madax ah, Menachem Begin, wareysi uu la yeeshay Wargeysyo «Maraykan». wuxuu ku sheegay inay daanta galbeed ee webiga Urdun ay tahay dhul Israa'iil leedahay oo ay xoreysay, marnaba ayan oggoleyn iney gacan Carbeed ku noqoto. Waxaa kale oo uu sheegay in Israa'iil oo ku noqota xuduuddii 1967kii ay tahay gaarwaayo. Wuxuu yiri «Cadawgu wuxuu soo joogsanayaa meel u jirta 4 km Xeebta Qalqaliya, taasina waa dhimasho», waxaa kale oo uu wareysigaa ku sheegay in sababta Israa'iil Maraykanku u kaalmeeyaan ahayd kaalinta weyn ee ay Israa'iil ka qaadato difaaca danaha Mareykanka; wuxuu iyana sheegay in haddii Israa'iil ka kacdo Yu-huudda iyo Saamira (Quodus iyo daanta galbeed ee wabiga Urdun) ay ka dhismeyso dawlad Falastiin ah taas oo noqoneysa saldhig Soofiyeteet ah, sidaas darteed waxaanu horjoogsaneynaa, buu yiri, in shuuciyaddu qabsato gobolkaas.

Sidaas buu u cad yahay mawqifka Imberyaaaliyadda iyo Sahyuuniyaddu, waxayna rabaan iney khasab ku fuliyaan xalka danahooda ilaalina.

Haddaba xalka caddaaladda ku dhisan, nabad waartana keeni kara, wuxuu u baahan yahay midnimada quwadda Carabta, xoog iyo xoolaba, isla markaasna ku soconeysa aragti istraatijiyadeed oo ah in la helo midnimada xoogagga horusocodka ah, xoojinta halganka dadyowga Falastiin «P.L.O.», xoojinta bahaysiga adduunka horusocodka ah iyo in intaa oo dhanba looga tallaabsado fieil dhinac, diblomaasiyad, siyaasad, dhaqaale iyo wax alla wixii kale ee loo baahdo. Taasi waxay dhallin kartaa in Imberyaaaliyadda iyo Sahyuuniyaddu oggolaadaan xal nabadgelyo iyo wada hadallo dhinacyada oo dhammi ka qayb galaan, laguna gaaro nabadgelyo waarta.



# DALALKA ADDUUNKA SADDEXAA IYO XIRIIRKA

## DHAQAALEED EE CAALAMIGA AH

Saciid Jaamac

Arrinta xiriirka dhaqaalaha adduunka waa mid ay sannadahan dambe si aad ah ugu faaganayeen dawladaha hantigoosadka ah ee horumarsani (Maraykanka, Yurubta Galbeed, kanada iyo Jabbaan) iyo dawladaha adduunka saddexaad ee soo koraya.

Arrintaasi waxaa maanta siinaya ahmiyad gaar ah oo koox waliba keli uga shirto, ama wadajir looga wada hadlo, iyadoo xaaladdii xiriirka dhaqaalaha labada kooxoed ka dhaxyeysey aanay maanta sidii hore marna ku socon karin. Waa khasab in dib loo habeeyo.

Labaatan sano ka hor dalalka soc koraya waxay ku hoos jireen gumeysi toos ah, ama kan cusub aye suryo ugu jireem. Tijaabada dalalka hantiwadaagga iyo awooddooduna halka ay maanta marayso ma joggin. Sidaas awgeed dalalka adduunda saddexaad ay ku dhaqmaan ama si toos ah ama si dadban u dejin jirey dawladaha reer Galbeed ee hodonka ah ee xagga warshadeynta hore uga maray, kuwaasoo Siyaasaddoodu ku urursanayd in xiriirka dhaqaaleed ee lala yeelanayaa dawladah aduunka sadexaad uu ku qotomo in hore dalalkaasi reer Galbeedka u noqdaan meel sahal looga soo daldasho wixii qalab ceeriin warshadahoodu u baahan yihiin, marka labaad noqdaan suuq furan bedeecdadda wershadaha Galbeedku soo saaro, tan saddaxaad inay ka dhigaan meel laga heli karo shaqaale jaban. Siyaasaddaas iyada ah dawladaha reer Galbeedku in muddo ah way ku caana maaleen. Hase ahaatee, waxaa arrintaas ka dhalatay in

dadyowgii xaqooda la duudsinayey ay gadoodeen oo halgan qaraar u galeen sidii ay xornimo buuxda xag siyaaso iyo xag dhaqaaleba u hantiyi lahaayeen. Maanta haddaan eegno in yar ma'ahee dalalka aduunka saddexaad dhammaan way madax-bannaan yihin.

Khibrad yari, ku xirnaan gumeysi, iyo dib-u-dhacsanaan awgeed ay aa keentay in dalalka soo koraya badidood ku dhaceen shabaakkaddii gumeysiga Cusub (neo-colonialism) xiriirkii dhaqaaleed ee ay la lahaayeen dalalka hantigoosadka akina aan wax wax-ku-ool ahi inna iska beddelin. Dawlad waliba waxay isku dayday inay dhabbo gooni ah u marto sidii ay u adkayn lahayd istaqlaalkeeda, una gaari lahayd dhaqaale korreyya. Mabda'a ugu weyn ee arrintaasi xukumaase wuxuu yahay hadba habka siyaasadeed ee korriinka dhaqan-dhaqaalaha dalka loo dejyo.

Si kastase ha u kala dhantaalante, waxay dhammaan dalalka soo koraya isku raacsan yihiin in xiriirka dhaqaaleed ee ay la leeyihiin dawladaha hantigoosadka uu yahay mid dhac iyo kala sarayn ku dhisan. Waxay kaloo meel isla dhigteen in qaabka ugu habboon ee arrintaas looga bixi karaa ay tahay iyadoo wada-jir meel looga soo wada jeesto. Taas ayaa keen-tay in dawladaha Carabtu iyagoo isku duuban dawladaha yurub gorgortan la galaan; kuwa saliidda soo saara ee loo yaqaan (OPEC) ay si le'eg siyaasaddooda isla habeeyaan. Tallaabadaan meel-markeeda iyo dhaxal wanaageedu wuxuu ku cad yahay go'aannadii ka soo baxay shi-

rweynihii 4aad ee ay dawladaha dhedhexaadka ahi ku yeeshen dalka Aljeeriya Sebtember 1973kii. Halkaas oo laga gudbey heerkii ah-aa gumeysi-cambarayn keliya ee loo gudbey in la dejyo tallaabooyin cad oo lagu camal-falo dheelli-tirka uunka saddexaad la leeyihiin kuwas xiriirka dhaqaaleed ee dalalka ad-hantigoosadka ah. Xiriirkas oo la damacsan yahay in uu ku dhisnaado waxtar loo siman yahay, wax-wadqabsi labada dhinac, iyo iskaashi.

Labada qodob ee ku-hakad gaar ah mudani waxay ahaayeen in shirkii Aljeeriya dawladaha dhedhexaadku isku raaceen in dawladaha soo koraya u fara baxsanaadaan ku-tagar-falka alaabtooda ceeriin (natural resources) si ay u debbar-gooyaan kadeedka imberyaliyadda una adkeeyaan xornimadooda siyaasiga ah, iyo tan labaad oo ah inay si siman uga qayb qaataan dejinta siyaasadda ku saabsan xiriirka dhaqaaleed ee dhexmaraya iyaga iyo dawladaha Hantigoosadka ah ee hodanka ah, taasoo looga gol leeyahay inuu xiriirka dhaqaaleed noqdo mid di-muqraadiyad ku dhisan.

Shirkas Aljeeris ee dawladaha dhedhexaadka ah ka sokow, waxaa iyana xus gaar ah mudan in ay dhammaan dawladahaasi meel uga soo wadaa jeedeen shirkii Qarammada Midobey ee ku saabsanaa Ganacsiga iyo Horumarinta (UNCTAD) ee 1976kii Nayroobi lagu qabtay ee lagaga wada hadlayey xiriirka dhaqaaleed ee caalamiga iyo iskaashiga, iyo shirkii 6aad ee gaar ahaan loogu qabtay Qarammada Midobey Golahaeda caamka ah ee sida

dheer ee xiisaha leh loogaga hadlay sidii dawladaha soo koraaya ay uga qayb qaadan lahaayeen dejinta xiriir dhaqaaleed oo noloshooda kor u soo dhiga. Waana markii ugu horreysay ee arrintaas la soo hor dhigo Golaha Qarammaada Midoobey iyadoo mawduucaas si khaas ah looga wada hadlayo. Waxaa intaas soo raage fadhiyada ururka Midowga Afrika (UMA), iyo kuwa Carabta iyo Afrikaanka oo aan marna lagu soo qaadi waayin sidii iskaashi adag oo dhaqaaleed u dhex mari labna si ay ciriiriga gumeysign (imperialism) uga baxaan.

Waxaa arrintaas qaaya gaar ah sii siinaya, mid xasaas ahna ka dhigaya iyadoo maanta dalalka adduunka Saddexaad ay 90% wax alliyo wixii maedan ah (soo xadiid ahayn), 80% wixii Saliid ah, 80% rabberka dabiiciga ah, 50% wixii Suuf ah, 50% wixii Sonkor ah iwm ee dawladaha hantigocsadka ee Wershedaha hodonka ku ahi u baahdo ay u diraan.

Isla markaasna wixa taas barbar yaal in dalalka soo koraya Qarnigan dhammaadkiisa gaari doonaan 80% tirada adduunka ku nool, oo sidoodii hore ku jira faqri, silie iyo saxariir. Haddii xaal sida uu yahay uu ku soedana in mashaqa weyni dhowaan adduunka hor iman doonto. Masal ahaan dadka Afrika iyo Aasiya tarsi ahaan waxay dhan yihiiin 1,250 malyuun tobankii sano ee u dambeeyey nolosha qofka caadiga ah (waa marka inta soo gashay dadka oo idil madax tarsi loo qaybiyo) waxaa u kordhay 20 Doolar keliya (min 130 ilaa 150 Doolar).

Dawladaha Hantigocsadka ah oo Siyaasaddoodu ku dhisan tahay isku kor noolaad u soo xereeya fan-

iido, malafsina ku nooclaa muddo dheer, marna ma oggola inay si dimuqraadi ah dib u habeeyaan dawladaha soo koraaya xiriirkha dhaqaaleed ee ay la leeyihii, Waxay ku dadaalayaa inay leexleexin, khiyaamayn, kala firdhin, laaluush, daba-meertayn iwm ku la dhaqmaan dalalka soo koraaya si ay u waariyaan hantigocsadka. Haddii ay arrintu qaraaraato sidii 1973kii markii dawladaha Carabtu Saliiddoodii Galbeedka ciiriiriga ka geliyenna waxay imberyaaliyaddu diyaat u tahay inay handidaad iyo duulid ku kaedo.

Dawladaha soo koraya waxay soo jeediyeen barnaamij midaysan oo ay ku xasiliyaan asceerta badeecadda ay dhoofsiyaan iyo tan ka soo gelaysa badeecaddaas, iyo sidii dhibaatooyinka dhaqaale barraka iyo sicirkorka habka hantigocsadku caamka ku yahay ay uga sabato bixi lahaayeen. Taasoo lagu qeexay barnaamijkaas isaga ah. Intaas waxa weheliya inay kaloo soo dejiyeen in hab sieir-gooyn ah loo sameeyo badeecoyinka lays dhaafasado oo idil iyo in la habeeyo sidii badeecadaha dalalka soo koraaya ay u gaari lahaayeen Suuqyada dalalka hantigocsadka ah. Dalalka soo koraya waxay u baahan yihii in xagga teknoolojiga laga kaalmeeyo si ay warshadaynta barwaqadooda (resources) u gaaraan.

Barnaamijkaasi wuxuu noqday mid marna u cuntami waayey dawladaha Hantigocsadk ah. Waana tan keentay shirkii wal ee laysugu yimaadaba ay arrintaas ku farsayraan kii u dambeeyey wuxuu ahaa kii bishan Juun 2dii laysugu yimid magaalada London iyadoo isla mawduucaas laga wada hadlayo, waxse lays lama gaarin sababta oo ah macangagnimada iyo xaqdarra-doonka dawladaha hantigocsadka oon marna rabin inay

boobka ay ku jiraan ka tanaasulaan.


Sannadaha soo soedana waxay la imanayaan in baahida dawladaha hantigocsadka ahi ay u qabaan alaabta ceeriin ee dalalka soo koraaya aad u weynaato; gaar ahaan Saliidda oo shidaalka casriga ah tan ugu xoog weyn ah dawladaha Galbeedku waxay u arkaan inay dhaqaalaha wadne u tahay. reasriga walee haiig

Loolankaas ka dhix taagan dalalka soo koraaya iyo dawladaha hantigocsadka ee waaweyn; ee kuwa horena u hanqal taagayaan siyaasadda iyo dhaqaalaha dalalkooda oo madax-bannaanaada, kuwa dambena ka fuqi la'yihii barwaaqabobkii ay u barteen, loolankaas waxa jira xoog saddexaad oo si weyn u saameeya. xooggaaasi waa beesha hantiwadaagga oo awoddeedu dhinac kastaba si weyn isu soo taray rubuc-qarnigii u dambeeyey. Beesha hantiwadaaggu waxay kol walba taageeraan wax alaaliyo wixii go'aan ay gaaraan dalalka soo koraya ee dantoodu tahay sidii uu dhaqaalahoodu u madaxbannaanaan lahaa una kobei lahaa. Intaas ka sokow dalalka hantiwadaaggu waxay la yeeshaan dalalka soo koraya xiriirkha dhaqaale oo aanay innaba ku jirin hagardaamo, gaena maroojis, iyo kala sarrayn. Xiriirkha noocaa ahi kaalin weyn ayuu ka ciyaraa soofaynta garaadka iyo waaya-aragnimada dalka soo koraya.

Habka xiriirkha dhaqaalaha adduunku (International Economic Order) u dhisan yahay waa mid adag. Ma suuqobi karto in muddayar dalalka soo koraya ku burburiyaan, hase yeeshie, mida maanta la garwaaqsan yahay waxay tahay in dalalka soo koraya

Eeg bogga 54aad

## WARBIXINTA BISHA



SANNADGUURADII 6aad ee

UBAXA KACAANKA OKTOOBAR

OO LA XUSAY

Kooxo ka tirsan Ubaxa... caanka Oktoobar ee Gobolkan Banaadir, Lafoole iyo Ciidama-dha Qalabka Sida ayaa Xidh-mociyin Ubax ah dhigay taal-looyinka dal - jirka - Dahsoen, Xaawa Taako, Dhagaxtuur iyo Sayid Maxamed Cabduule Xasan oo ku yaal Magaaladan Muqdisho, iyadoo lagu xusayo Sannadguuradii lixaad ee asaaska ubaxa Kacaanka Oktoobar oo sannad kasta ku beegan 18ka Juun. Ubaxa Kacaanku waxay soedaal cheer ay ku soc-mareen waddooyinka waaweyn ee Magaaladan Muqdisho iyagooy ay hor kacayeen, guddoomiyaha Hoggaanka Abaabulka ee Golaha Dhexe ee XHKS Jaalle Cumar Saaald Cilmi, Wasirka Waxbarashada iyo Barba-rinta Jaalle Aaden Maxamed Cali, guddoomiyaha Ururka Dhallinta Kacaanka Soomaaliyeed, Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame iyo Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Banaadir, Jaalle Yuusuf Ibraahim Abuu-raas.

Intaa ka dib waxaa dhallintu ay isugu soo urureen fagaaraha Beerta Daraawiishta, halkaasoo Guddoomiyaha Hoggaanka Abaabulku Jaalle Cumar Salaad Cilmi uu si faahfaahsan uga warramay ujeeddooyinka loc abuuray ubaxa Kacaanka. Waxaa uu wax ka taabtay, xaalad-

da ubadka Soomaaliyeed ay ku sugnaayeen kacaanka ka hor iyo tallaabooyinka meelmarka leh ee kacaanku ka qaaday barbarinta iyo daryeekaa dhallaanka Soomaalida.

Habeennimadii, xaflad lagu qabtay golaha murtida iyo madaddaalada oo lagu xusaayey sannadguuradaa 6aad ee ubaxa, waxaa ka soo qaygalay Xoghayaha Guud ee Xisbiga H.K.S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre, khurdbad uu halkaa ka jeediyeeyna waxaa uu ku bogaadiyey challinta munaasabaddaas waxana uu u rajeeeyey Sannadguurooyin kale oo farxad leh. Waxaa kaloo uu aad u ammaanay dadkii qabanqaabiyye dabaaldeggaa iyo xusidda maalintas, isagoo si kala qalan uga warramay ujeeddooyinka ka dambeeya asaasidda ururka dhallinyarada oo uu sheegay inay tahay dhismaha bulsho horusod ah oo fayow, taasoo uu yidhi lama gaadhi karro, haddaan sal qoys oo adag la sameyn.

«Abuuridda U.K.O. waxaa looga gol lahaa in laga xoreeyo ayniyada soo socda, fikradahii dibu-dhaca ee laga dhaxlay guomeysiga, waxaa kaloo kacaanku xoreeyey haweenka Soomaaliyeed si ay u barbaariyaan, Ubadi caafimaad qaba» ayuu intaa raaciye Xoghayaha Guud.

Ubaxa kacaanka Oktoobar waa urur ka kooban ardada du-gsiyada hoose iyo kuwa dhexe waana Xubinta labaad ee ururka dhallinta kacaanka Soomaaliyeed.

Fikradda abuubulidda filalka dad'da yari, waxay bilaabantay 1960naadii. Horsedayaasha si-da weyn u aaminsanaa samaynta ururro dhallinyaro waxa ka mid ahaa Macallimiinta Soomaaliyeed. Barayaasha Gobolla-da Waqocyi ee dalka ayaa waxay sameeyeen Ururkii «Scouts» ka wiilasha, macallimiin kalena waqtiyadaa waxayba abaabuleen ururro u eg amalo la mid ah ka dhallinta dalalka hanti-wadaagga ah, hase yeeshee barnaamijkaas meelna ma gaachin Sababtu waxay ahayd iya-ta ugu jireen tilisyo xilgab iyo doo arrimaha dalkuba ay gacan-musuqmaasuuq ah.

18kii Juun 1971kii ayaa Jaalle Maxamed Siyaad Barre oo marka ahaa Madaxweynaha Golihii Sare ee Kacaanku, uu ku dhawaaqay asaasidda dhallinta kacaanka Oktoobar. Waxaana Madaxweynuhu ut. sidaas ku caddeeyey khurdbad uu maalintaas lix sanno ka hor uu ka jeediyeey xarunta dhallinta kacaanka ee Ceel Jaalle. Markii hore waxaa magacu ahaa dhallinta Soomaaliyeed hase yeeshee 19-

71-1972kii ayaa fikradda sameynta magaca «Ubaxa Kacaanka Oktoobar la curiyey. Dhawr bilood markay ka soo wareegteyna waxaa ardada qoran tiradoodu gaadhey 500. 1973kii waxaa magaalada Muqdishoлага furay Xaruntii labaad ee dhallinta kacaanka oo loo bixiyey «Xarunta Kamaaluddiin». Dhammaan Xarumaha dhallinta kacaanka ee ilaa imminka la dhisay waxay leeyihin qalabka ciyaaraha gegooyinka, iyo kuwa guryaha guduhooda, waxaana dheer aaladaha danana ee muusigga oo dhan. Waana arrin wax ka soo qaad leh in **alaabtaasi** ay si buuxda uga faa'iiday.


sinayaan dad dhallinyar oo tamartoodu soo socote oo keli ah-aan iyo wadar ahaanba kor u qaadaya awooddooda xagga Isboortiga iyo xagga muusiggaba.

Tababarridda xagga ciyaarraha, oo ay ku carbiyaan rag ciyaaruuhu ay meherad u yihiin ka sokow, dhallinta waxaa la siyyaa barbaarin iyo waxbarasho kor loogu qaadayo baraarruggoda kacaannimo, waxaana taas darteed lagu ababiyya tusaalooyinka Xoghayaha Guud ee Xisbiga hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, Jaalle Siyaad. waxaana taasi lama huraan ay ka dhigtay in dhallinta loo kala

qayaxo siyaasadaha kacaanka, qaybta dhallintu kaga beegan tahay dhismaha dalka iyo hawlah kaga aaddan hirgelinta barnaamijka iyo Xeerka X.H. K.S. iyagoo ah xubin hawl iyo xilba u darban oo ka mid ah bulshada

Tan iyo intii la asaasay U.K O. Wusaaradda Waxbarashadu waxay ay xilweyn ka gudatay hirgelinta barnaamijka isdabajoog ahoo oo xagga Waxbarashada ku lug lahaa. Waxaa kaloo xusid mudan kaalinii Xafiiskii Siyaasadda ee Madaxtooyada Golihii Sare ee Kacaankuu ka qaatay sidii guul looga gaadhi lahaa barnaamijkaas.

## JABUUTI WAY XOROWDAY



27kii Juun ayaa dadka Jabuuti iska tuureen, heeryaadi guameysiga, kadib markii 115 sano uu isticmaarka Faransiiska u talinayey. Waxay la baxday «Jambuuriyadda Jabuuti», wanay dhidibtay calan leh midabyada; Cagaar, Buluug iyo Caddaan kulmiya, Xiddigga Canna leh. Laba daqiiqo markay saaca-

**ddu habeen badhkii** weydaartay, ayaa calankii Faransiiska chulka la soo dhigay kii Jamhuuriyadda dhalatayna lagu taagey hoyga Badhsaabkii ugu dambeeyey ee Faransiiska, iyadoo 21 madfac loo ridey muunaasabaddaa farxadda iyo bilieida lahayd, kumaankun qof oo heeso iyo ciyaarc isdhex wadaa-

na ay ku dhawaaqayeen «Hanoolaato Gobannimada iyo midnimada Jabuuti».

Gobannimada Jabuuti waxa tusaale kaahaya ay u tahay guusha lama-huraanka ah ee xaqummad waliba u leedahay in aayheeda ay ka taliso, oo muujinaya tubta caadiga ah ee horu-

marka aadamiga ee ka soo horjeedda gumaysiga iyo sharkiisa. Gobannimada Jabuuti waa ay-aanka Afrika iyo adduunka Carabta, waana guul u soo hoyatay dadyowga horumarka iyo nabadda jecel ee adduunka oo chan. Dadka reer Jabuutise inkastoo ay ku rayraynayaan guushaa kama dambaysta ah iyo gobannimada, illaawi maayaan cadaadintii. muquunintii iyc dhibudhicci labadaa ka dhashay ee gumaysigu baday.

Dadka Soomaaliyeed iyo waddammada kalee nabadda iyo horukaca ku dhaataa waxay niyadsami ku soo dhoweeyeen kuna bogaadiyeen gobannimada Jabuuti ee soo hoyatay 27kii Juun 1977kii.

Bannaanbax laxaad leh oo lagu taageeraayo dhalashada Jamhuuriyadda Jabuuti ayaa lagu qabtay Beerta Daraawiishta ee magaaladan muqdisho, ka dib markii lagu dhawaaqay gobannimada Jabuuti. Bannaanbaxas wuxuu ka qaybgalay, Madaxweyne ku Xigeenka Koowaad ee J.D.S. Jaalle S/Guud Maxamed Cali Samatar oo ka tirsan Gud-diga Siyaasadda ee XHKS, Gud-doomiyeyaa Hoggaanno, Wasiirro, iyo xubno ka tirsan Golaha Dhexe ee XHKS. Jaalle Samatar Khudbadda uu halkaas ka jee-diyey waxaa uu ku sheegay in gobannimada Jabuuti ay ka dhalatay dagaal riqdheera oo ay guud ahaan u galeen dadka Soomaaliyeed gaar ahaan reer Jabuuti «Gobannimada Jabuuti hadiyad looma bixin ee dhiig iyo xabbad dhexdood ayay ka dhalatay» ayuu caddeeyey Jaalle Samatar. Wuxaan intaa uu ku daray in waddaniyiin badan oo u dhashay J.D.S. iyo J. Ja-

buuti ay nafahooda u hureen gobannimada Jabuuti, qaar kallenayay u soo mareen cadhalis iyo dhuubaato nooc walba leh. «Daw ayaannu u leenahay in aannu farsax ugu dabbaaldegno Gobannimada Jabuuti, waaya dadkeedu waa dadkayagii, dalkooduna waa qayb ka mid u waddankayega» ayuu ku dia-waaqay Madaxweyne ku-Xigeenku. Jaalle Samatar wuxuu ku dheeraaday halgankii dhereeraa ee dadka Jabuuti ay gobannimada u soo mareen iyo niyad-jabkii gaadhay ee ay astaanta u ahayeen astiyyal ku sheegyadii 1958kii iyo 1967kii iyo magacii Cafar iyo Ciise ee lagu qasbay dadka dalkaa ku dhaqan oo lagu beddelay magacii Sharci ahaan, taariikh ahaan iyo ju-qoraafi ahaanba uu dalkaasi la-haa ee ahaa: Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumeysto.

Khudbadda Jaalle Samatar uu fagaarahaa ka jeediyey wuxuu tilmaamay in Talisyadii in-labajoogga ahaa ee dalka Itoobiya ay ahaayeen, isticmaarka iyo imberyaaliyadda caalamiga ah ka sokow, kuwa keliya ee hortaagnaa gobannimada Jabuuti. Wuxaa intaa uu raaciyeey in taliska imminka ee addis-ababa aanu ka leexan siyaasadihii imbraad-door Xayle Salaase. hase yeesh ee waayuhu ku qasbeen inay ka waantooaan is-hortaagga gobannimada Jabuuti. Wuxaan arrimaha ka mid ahaa, buu yidhi Madaxweyne ku Xigeenku Ceebti Taliskaasi ka gaadhay fagaarayaasha adduunka markii uu taliskaasi noqday ka keliya ee ka soo horjeestay gobannimada Jabuuti.

Madaxweyne ku-Xigeenku is-agoc hadalkiisa sii wata, wuxuu sheegay in halka J.D.S. ay

uga dabbaalegayso gobannimada Jabuuti, uu taliska Addis-ababa uu ku fooggan yahay daandaansiga Jamhuuriyadda Cusub waxaana uu yidhi maxaa wuxa Milishiyada luu sheegay, oo beelaha la qasbuy ah, dhoollatusadkooda loogu beegay 26ka Juun. Waxana uu sheegay in Taliskaasi uu Ciidammadiisa geeyey sohdinta Jabuuti taasoo hapis ku ah badbaadada Jamhuuriyadda Cusub. Madaxweyne ku Xigeenka wuxuu dadka Jabuuti ugu baaqay inaanay ka walaacin. werwerna ka qabin shirqool kaga yimaadda Addis-ababa kol haddii dadka Soomaaliyeed oo dhammi ay gacan iyo taageero siinayaan.

Wafdi Soomaaliyeed oo heer sare ah oo uu hoggaaminayey **Madaxweyne Ku Xigeenka** J.D.S. Jaalle Sarreeye Gaas Xuseen Kulmiye oo ka tirsan Gud-diga Siyaasadda ee XHKS, ayna ka mid ahaayeen Hoggaanno, Wasiirro, iyo marwada Madaxweynaha Jaalle Khadiija Macallin ayaa maalintii **u dambaysey** bishii Juun ku soo noqday dalka markii ay ka soo qayb galeen dabbaaldeggii gobannimada Jabuuti. Jaalle Kulmiye markuu soo laabtay, wuxuu dadka wararka u sheegay in dadka reer Jaabuuti ay farsax iyo niyadwanaag ay ugu dabbaaldeegen gobannimada, wuxaan intaa uu raaciyeey in wafdigaa Soomaaliyeed uu ahaa ka ugu balaadhan ee xuskaa ka qayb galay. Wuxuu kaloo Jaalle Kulmiye uu tilmaamay in Wafdigii wareemataada Addis-ababa ay si laga xishoodo uga baxeen Xaf-laddii, iyagoo qarsan kariwaa-yey, naceybka ay u hayaan dadka reer Jabuuti iyo sida ay uga ba'ayaan gobannimada u soo hoyatay.

Jaalle Kulmiye waxa uu sheegay in bogaadin iyo salaan uu ka siday Xoghayaha Guud ee XHKS Soomaaliyeed, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, uu

gaadhsiiyey Madaxweynaha Dawladda iyo dadka reer Jabuuti. Wuxa kaloo uu sheegay in Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti Jaalle Xasan Guuleed Abtidoon iyo Madaxda kalee Jabuuti ay isla soo qaadeen arri-

maha danta u ah Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliyeed iyo Jamhuuriyadda Jabuuti ee walaalaha ah, midaynta Soomaali wewn, iyo xoraynta dhulka Soomaaliyeed ee wali ku jira gacanta Gumeysiga.

## MADAXWEYNE KU XIGEENKA CIRAAQ

Madaxweyne ku-xigenka dalka ciraaq Jaalle Daaha Muxyaddiin Macruuf ayaas **bishii hore daba-yaqaadeedii** ka ambabaxay magaaladan Muqdisho markay u dhammaatay boocasho rasmii ah oo seddex **maalmood ahayd oo** uu ku yimid dalka J.D.S. Markii uu ka soo degey gegida dayara-daha Muqdisho isagoo Warfidi-yenka u warramaya waxaa uu sheegay in boocashadaan in Soomaaliya ku yimid ay ku lug lee-dahay xoojinta Waxwadaqabsiga ka dhxeeyaa labada dal ee walaalaha ah.

Siyaasadaha **cadaadiska ah ee** taliska dhiigyaabka ah ee Ad-disababa, isagoo ka hadlaayana waxaa uu ku dhawaaqay in Ciraaq ay si buuxda u taageerayso dhaqdhaqaqyada gobannimadoonka ah ee liddiga ku ah taliska Addisababa. Mar wax laga weydiiyey halka dawladdiisu ka taagan tahay gobannimada Jabuuti waxaa Jaalle Macruuf uu sheegay in Jamhuuriyadda Ciraaq ay u fidin doonto Jabuuti taageero aan shuruud lahayn marka dalkaasi gobannimo qaato.

Wafdigaa Ciraaq waxaa ka mid ahaa Wasiirka Arrimaha Dibedda Jaalle Sacduun Xamm-aada, ku-xigenka Wasiirka Ar-rimaha Dibedda ee qaabilan ar-



rimaha Carabta Jaalle Cabdu Xuseen Mahdi. Ku-geenka Wasiirka Ganacsiga Dibedda Jaalle Mahdi Muxsin iyo Jaalle Cabdu-lqaadir Asandin oo Xoghaye ku-xigenka ah Wasaaradda Waxbarashada ee Ciraaq. Wafdigaa Ciraaq, intii ay dalka joogeen waxaa wada hadallo ammuuro kala duwan ku saabsan ay la yeesheen, madax ka tirsan dalka J.D.S.

Madaxweyne ku-Xigenka Ciraaq waxaa guriga Villa Soomaaliya ku qaabilay Xoghayaha Guud ee X.H.K.S., Madaxweynaha J.D.S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

Wax yar ka hor intaanu ka dhoofin dalka waraysi ay weri-yayaashu la yeesheen Jaalle Macruuf waxaa uu ku shægay mahadda uu dawladda Soomaaliyeed uga celinaayo martigelintii

Soomaalida lagu **yiqiin** iyo sida diirran ee loc **soo** dhoweeyey intii uu dalka joogey waxaana intas uu ku daray in boocashadiisu ay sii xoojinayso xidhijdhka walaaltinnimo ee ka dhxeeyaa, labada dal ee Soomaaliya iyo ciraaq. Waxaa uu daboolka ka qaaday madaxweyne ku-xigenku, in dhambaal uu ka sidey madaxweynaha ciraaq Axmed Xasan Al-Bakar uu gaadhsiiyey Madaxweynaha J.D.S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre, boocashadiisuna ay fursad u siisey in salaan uu ka sidey dawladda iyo dadka Ciraaq uu u soo gudbiyo dadka iyo dawladda Soomaaliyeed. «Waxaannu kaloo yeelannay, wadahadallo waxtar leh oo ku saabsan iskaashiga labada wad-dan iyo qaddiyadda Falastiin oo iyadu ah asaaska midnimada Carabta», ayuu ku dhawaaqay Jaalle Macruuf.

Waxaa uu caddeeyey Madaxweyne ku-xigeenka Ciraaq in wadahadalladii uu la yeeshay dawladda Soomaaliyed ay ku jireen arrinta Soomaalida galbeed, ee weli gumeysiga ku jirta iyo Eret-riya, waxaana uu intaas raacihey

in Soomaaliya iyo Ciraaq ay ka heshiiyeen, in la sameeyo guddi wadajira oo ka shaqaysa mashaariieda labada dal ay wadaagaan iyo ammuuraha kalee ku saabsan iskaashiga dhaqaale ee labada dal, iyo in la sii kordhiyo

boqashooyinka ay isdhaafsa-daan Madaxda labada dal. «Aadayaan ula dhacay horumarka la taaban karo ee Soomaaliyada Kaacaanka ahi gaadhay», ayuu ku soo gobagabeeleyey Jaalle Macruuf hadalkiisaas.

## SANNADGUURADII-SOWEETO

Xiisad laxaad leh ayaa ka oogneyd magaalada Soweeto oo ah degmo rasan oo ku lammaan magaalada Joohanisboorg, Afrikaan kuna ay degaan, iyadood mill-yanka iyo nusk a hal-kaa dggami ay isu diyaariyeen inay murugo ku xusan sannadguurada Kowaad ee kasoo wareegtay 16kii Juun ee kal hore markii booliiska midabtakoorka Koonfur Afrika ay gumaadeen boqollaal Afrikaan ah oo ka tirsanaa kuman-kun magaaladaas iyo hareeraheeda ka dhigay bannaambaxyo ay kaga dhiichiyeen midab kala sooca.

Sannadkii aynu soo dhaafnay Soweeto waxay kaalinta hore ka gashay wararka adduunyada mrkii ciidmada midabtakoorku ay rasaas ku fureen dadka bannaanbaxa nabadeed sameenayey ee dawdarrada liddiga ku ahaa. In ka badan 600 (Lix Boqol) ayaa ku dhintay gacanta ka gardaran ee bileyksa Koonfurta Afrika, hase yeeshee waxaa taas ka dhashay bannaambaxyo, hawl-joojin, iyo qalalaas lagu sameeyey qalcadan midabtakoorka iyo jinsi kala sooca Soweetona waxay noqotay astaanta niyaddaan liilsamayn ee Afrikaanka ku dhaqan Koonfurta Afrika ee ay ku diiddan yihii midabtakoorka.

Gurmad norle oo bilays hub wata ah ayaa laga soo buuxiyey Soweeto oo iyadu isu beddeshay xarun laga abaabulo hawlaho lid diga ku ah midab-gumeysiga oo ay wadaan shaqaalaha iyo ardayda. Bileysku waxay bilaabeen ururin iyo xidhixidh ay uga gol lahaayeen inay ka baajiyaan dadka halkaa deggan kagana hortagaan wixij rabshada ah ee ay dadka ku dhaqaaci lahaayeen 20 ka tirsand haliinta mintidka ah ay golaha ardayda ee Soweeto ayaa la qabqabtay. Sidii caadada u ahayd markii sannadguurada tiiraanyada lihi soo dhowaatey, ayaa taliska midabtakoorku ma mnuucaay k u lamada loogu murugoonyo iyo bannaanbaxyada lagu xusaayo boqollaalkii gacanta xaq darro ku dhintay ee bilaysku kal hore xasuqay. Hase yeeshee sanadan lafteeda inkastoo sidiit bahalnimada ahayd ee kal hore aanay rasaasta oodda loogaga qaad. In laddana sannadguuradii sahayasho la'aan ma socon. Lix Afrikaan ah ayaa la toogtay, 278 kale-na xabsiyada ayaa loo taxaabay iyadood dalkoo dhanna ay rabshado saaqeen.

Ardayda kiciddooda waxay ka dhalatay luqada la yiidhaa «Afrikaanis» oo caaddaanku ay ku hadlaan oo lagu qasbay dug-

siyada Afrikaanka oo la yidhi waa inay noqotaa Afka wax lagu barto; waxa kaloo jirta arrinta mushahaarada xaaladda ay ku shaqeeyaan xoogsatada Afrikaan ku, hase yeeshee inkastoo a y muhiim yihijin, ma aha kuwa keliya ee sartu ka qudhuntay, waxaase intaasoc dhan ka weyn xuquuqda saldhigga ahayd ee aadami-ga meesha ka maqan.

Mar kale ayaa xarakada dhiddhi ihi carrigaasoo dhan ku dhammaatay, bannaanbaxyadan muddadaba faraha lagu hayey oo ay uidka ku soo jireen. Dhallinyaro ku dhaqan dhulkaan caddaadiiska ka taagan yahay ayaa dhagxiyey, waxyeellona u geeystay, gawaadhi yaryar kuwa waaweyn iyo basas, waxaan taliska midabtakoorku ku waramay 10 jeer oo rabshado maalintaa lagu xusaayaay ay Soweeto ka dhacay. In ka badan 3000 oo arday oo ka tirsan dugsiiga ORLANDO iyo dugsiyo kale ayaa joojiyey casharradii iyagoo ku diiddan taas 20kii Madaxda ardayda mintidka ah ee la xidhay. Magaalaada MAMELODI ee ku dhaw keybtawn waxa iyana loo diray bileyksurmadi ah markii dadka madowga ahi ay arjumeen basas iyo gawaadhi ay lahaayeen shaqaalaha ca-

ddaanka ah ee u qabbaana guddida la yidhi waxay qaabilسانا تاھي ماامولکا باانتووگا (AFRIKANKA) waxaana bannaanbaxaa iyo qiramuujintaa laxaadka leh ee gilgishay hannaanka qallocar. ee midab guameysiga, ka qaygalay ardayda iyo shaqaalaha hawladdenada ka ah Warshadaha iyo ma-shaarieda kale xagga dhaqaala-ha ka weyn.

Xasuusta Soweeto waxay weli-geed ku aslanaan doontaa nafaha iyo niyadda dadka diiddan inay qaataan dulliga iyo dala,

sigi midabgumeysiga. Dadyow-gii waayo tunka lagaga fadhiyey ee Fiyatnaam, Kamboodiya, Laos, Mozambiik, Gini Bisaw, Angola iyo kuwo kaleba waa kuwii ku guuleystay inay shakaalka ja-raan oo Ummado xor ah noq-daan; maxaa Afrikaankt tirada badan ee Koonfur Afrika taas iska hortaagi kara? Marka ha-ddaba, la eego sida xocggaga horusocodka ah ee adduunka u garab taagan yihin dadka ku dhaqan Kooufur Afrika iyo sida go'aanka aan ka laabashada lahayn ay ugu gaadheen dadka-

si inay xorocbaan waxa hubaal in ayaamaha midab gumeystaha Pretoria u hadhay tirsan yihii.

Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga ah ee Soomaaliya iyo daw-ladaha kale horusocodka ahina waxba kalama hadhayaan sidiid dadka Afrikaanka ah iyo dhaq-dhaqaqyada gobanimadoonka ahi u gaachi lahaayeen himi-locyinkooda oo ah xorriyad dhab ah sinnaan iyo nabad, shakina kuma jiro inkasta ha qa-a-datee in dadka tirada badani ee la eaddaadinayaa ay guusha hati-yi doonaan.

## BOOQASHADII JAALLE ISMAACIIL EE SHIINAHADADKA IYO KUURIYA

Wafdi ka socda Dawladda Soomaaliyed oo uu hoggaminayo Kaaliyaha Xoghayaha ee xisbiga H.K.S., madaxweyne ku-Xigeenka J.D.S. Jaalle S/Guuto Ismaaciil Cali Abokor ayaa 20kii Juun tegey Magaalada Peking oo si diirran oo saaxiibtinimo leh loogu soc-dhoweyey. Wafdigaa Soomaaliyed bocqashadoodu waxay ahayd mid saaxiibtinimo oo dawladda Jamhuuriyadda Shii-naha dadka ay ku martiqaad-day. Jaalle Ismaaciil oo uu we-heliyey Ra'iisal Wasara ku-xi-geenka Shiinaha Lie Hsien Nien waxa salaan sharafa uu ka qaa-tay cutubyo ka tirsan Ciidamma-da Shiinaha oo isugu jirey ku-wa dhuulka, cirka iyo baadda. Markii wafdigaa la soo dhowey-nayey ayaa dhallinyarta Shiinu-hu halkaas ka sameeyeen ciyaa-ro lagu marxabbaysiinayey. Waf-diga Soomaaliyed ee sharafta leh iyadoo dad kaloo badanina lulayeen caleemo, kuwana ku dhawaaqayeen erayo xamaasad



leh oo ay ka mid ahaayeen; ha noolaato saaxiibtinimada dad-yowga Soomaaliya iyo Shii-nuhu. Wafdigaa Soomaaliyed intii ay ku sii socdeen goobta martigelin-tooda loogu talo galay, waxay sii mireen waddooyin munaasa-badda darteed aad loo qurxiyey iyadoo astaamo iyo boodhadh erayo soo dhoweynhi ku qoran

yihii ay ka soo laalaadeen dhis-mayaasha daadheer, waxaan halkaa ka muuqdey jawi diirran oo saaxiibtinimo.

Lie Hsien Nien waxa wafdigaa Soomaaliyed ee uu hoggaminayey Jaalle Ismaaciil uu martiqaad sharafeed ugu sameeyey guriga Ummadda ee weyn ee

magaalada Peking, halkaasoo Jaalle Ismaaciil iyo Lie Hsien Nien ay isku dhaafsaadeen khubdado, ay ka dambeeyeen muusiga labada waddan oo halkaa la-  
ga tumay.

Jaalle Lie waxa uu aad ugu dheeraaday Ummadda Soomaaliyed ee Hoggaan ka Jaalle Mohamed Siyaad Barre ku gaadhad horumarka lagu diirsan karo marka la eego ilaalinta Madaxbannaanida iyo gobannimada Qaranka, iyo kor u qaadidda dhaqaalaha iyo dhaqanka Ummadda. Waxana uu ku ammaanay dawladda Soomaaliyed qaybta loo bogey ee ay ka gashay dagaalka waddammada adduunyada saddexaad ay kula jiraan Imberyaliyadda iyo gumeysiga. «Intii xidhii dhaka dibloomaasiga ahi samaysmay, iyo intii ka dambeysey hooqashadii ra'iisal wasaarihi geeriyoodey ee Shiihu Chou En Lai ku tegey Soomaaliya iyo soedaalkii Madaxweynaha J.D.S. Jaalle Siyaad ku tegey dalka Shiihaha, xidhii dhaka saaxiibtinimo ee labada geesood iyo wax wada qabsigoodu horumar wacean ayut sameeyey. Dadka Shiihaha oo uu hoggaaminayo, Guddoomiyahooda, caqliga badan Hua Kuo-Feng, waxay ku sii seconayaan marka la eego siyaasadda arrimaha dibedda wadiiqadii Macallinkii Weynaa Mao Tse Tong, waxana ay adkaynaayaan horena u marinayaan xidhii dhaka saaxiibtinimo iyo iskaashiga ka dhexeyya Shiihaha iyo Soomaaliya» ayuu yidhi Ra'iisal Wasaraa ku-xigeenka Lie Hsien Nien.

Madaxweyne ku-xigeenka J D S Jaalle Ismaaciil Cali Abokor oo isna martiqaadkaa ka hadlay waxa uu ammaanay guulaha dadka shiihuu ay ka gaadheen dhismaha Kacaan-

kooda iyo dalkooda. Wuxaan ku faraxsanjähay in maamulka cusub ee shiihuu uu ku soedo dawgii uu jexay Mao Tse Tong, hoggaamiyihii iyo kacaanyahan-kii weynaa. Wuxaan nuna ku kalsoonnahay hoggaanka mas-kaxda badan ee Hua Kuo-Feng uu dalkiinna weyn ee quruxda badani uu horumarka halkii-sa ka sii wadi doono.» Boqashadii uu madaxweynaha Soomaaliya, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, ku tegey dalka Shiihaha, ayuu caddeeyey, Madaxweyne ku-Xigeenku, waxay kaalin weyn ka qaadatay kor u qaadidda Saaxiibtinimada ka dhexaysa labada dad ee

«dadka ku jira gumeysiga Itoobiya waa in loo oggolaadaa xuuquuqda aadaminnimo ee ay leeyihiin iyo inay iyagu goostaan aayahooda siyaasadeed iyo mustaqbalkoodu wuxuu noqonayo». Hase yeeshi Jaalle Ismaaciil waxa uu ku nuuxnuuxsaday in arrimaha dhulka ee ka dhexeyya Soomaaliya iyo Itoobiya lagu dhammeeyo si nabad ah oo heishiisi iyo dhexdhedaad in ti-maadda. Wuxaan ku baaqay Madaxweyne ku-xigeenku taageero la siyo halganka hubaysan ee ay wadaan dadka Koonfur Afrika, Namiibiya, iyo Zimbaabwi waxana uu sheegay in aakhirataanka ay ka gacan sar-



Soomaaliya iyo Shiihaha, iyo xoojinta wax wada qabsiga labada dal. «Labada dad ee shiihaha, iyo Soomaaliya waxay waadaagaan waayo-arag xagga taariikhda ah, imminkana halganka aynu kula jirri imberyaliyadda gumeysiga, iyo gumeysiga cusub ayaa aad isugu keen soo dhoweynaya» ayuu intaq raaci-  
yey Madaxweyne ku-xigeenku.

Isagoo ka hadlaya xaaladda murugsan ee ka taagan Itoobiya Jaalle Ismaaciil waxa uu yidhi

rayn doonaan dawladaa cadaanka tirada yar ee dhulalkaa ka amarkutaaglæya. Wuxaan uu yidhi Waxanjuu taageersannahay qadiyadda Ururka Xoreynta Falstiin, Shirweynaha Carabta iyo Afrika ku dhexmaray magaalada Qahirina waxa uu abaa guul, shakima kuma jiro inuu kaalin weyn ka geli doeno xoojinta isbahaysiga Afrika iyo Carabta, iyo sida la isaga kaashanayo arrimaha Falstiin iyo Koonfur Afrika. Soomaaliya kama

indhasaabna qaybta weyn ee Shiinuhu ka qaata, welina ka qaadanayo taageerada Ururradha Gobannimo doonka ah ee Afrika, guulaha taariikhda galay ee Jamhuuriyadda Shiinuhu soo hoyseyna waa kuwo u dhashay adduunyada saddexaad. Bocqashada aan ku imi J. Shiinuhuna waxay marag u tahay sidaannu u doonayno xocjinta xidhiidhka innaga dhexeeyaa ayuu Caddeeyey Jaalle Ismaaciil, Mar uu ka hadlayey horumarinta dhaqaale ee dalka Soomaaliya waxa uu carrabka ku adkeeyey in qorshaha dhaqaaluhu uu kaalinta koo-waad siinayo wax-soo-saarka dhaqaale, gaar ahaan fidinta iyo ballaadhinta beeraha, iyo wershadaa fufudud iyo kuwa dhexdhexaadka ah si isku fillaansho looga gaadho xagga cunda da sannadka 1980ka. «Hase yeeshee kama diimocin inaanu marka hore isku hallayno xoggayaga, barwaqadayada iyo maskaxdayada» ayuu ku soo bagabeyey Jaalle Ismaaciil hadalkiisii.

22kii Juun Jaalle Ismaaciil iyo

wafdigaa uu hoggaaminayey waxa la kuulmay Guddoomiyaha xiibiga Shuuciga ah ee dalka Shiinuhu Hua Kuo-Feng, Jaalle Ismaaciilna waxa uu gaadhsiiyey salaan isaga iyo dadka shiinaha uga sidey Madaxweynaha J.D.S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Guddoomiyaha Shiinuhu Hua Kuo Feng isna wuu ka mahadeeliyey waxa ja madaxweyne ku-xigeenka uu ka codsaday inuu bogaadin ka gaadhsiiyo Madaxweyne Siyaad, Dawladda iyo dadka Socmaaliyeed.

Intii aanu soo gebagabeyn socdaalka uu ku joogay dalka Shiinaha Jaalle Ismaaciil waxa ka mid ahayd meelaha uu soo booqday danwadaag ku taalla duleedka magaalada shangay. Danwadaagta dadku waa ku badan yahay dhulkuna waa yar yahay. Sideeda bana ma ah meel barwaaqo badan. Hase yeeshee iyagoo ku soenaya Baaqii Mao ee ahaa «Wax beeriidda ka barta Tachai» ayaa dadka danwadaaga ku jiraa ay hawl dheeraada iyo isku kalscoonaan muujiyeen, waxa ay gaadheen in si isdaba-

jooga ay u kordhiyaan soo saarka badarka. Wafdigaa waxa la tusay beerihii bariiska iyo eudbiga oo si laxaad leh halkaa uga baxay.

Wafdigaa uu hoggaaminayey Jaalle Ismaaciil waxa dabeeto ay u ambabaxeen magaalada Piyonyaang iyagoo bocqasho afar maal mood ah ugu kicitimay J.D.D. Kooriya, Martiqaad uu ku soo dhaweeeyey Madaxweyne ku-xigeenka dalkaasi Jaalle Kim Dong Dyn, Jaalle Ismaaciil waxa uu ka warramay xidhiidhka saaxiibtinimo ee ka dhexeeyaa labada dal halganka ay ugu jiraan siday horumar degceg ah u gaadhi la-haayeen iyo siday uga horjeedan gumeysiga, gumeysiga cusub iyo imberiyaaliyadda «Inkastoo labadeenna dal Juqraafi ahaan ay kala durugsan yihiin, waxa ina-kulmiya xidhiidh saaxiibtinimo iyo wax wadaqabsi. oo ay sii xoojisey booqashadii Madaxweynaha J.D.S. uu ku tegay dalka Kuriya» ayuu ku dha waaqay Madaxweyne ku-xigeenku.

## SHIRWEYNIHI U M A

Madaxda dawladaha iyo dalka 48 Waddan oo Afrika ah ayaa soo gebagebeeyey Shirweynihii U.M.A. ee 14aad iyagoo go'aanno dhawr ah isku raacay. Shirweynaha oo intii u dhexay say 2dii-5dii Julay ka socday Liberfiil, Xarunta Gaaboon, waxaa uu u dhacay sidii loogu tala galay. Qodobbada Ajendaha Shirkaa ugu waaweynaa waxay ahaayeen, Xoraynta Afrika geeteeda Koonfurreed, iyo faragelin-ta xogagga shisheeyaha ahi ay ku hayeen dalalka Afrika oo go-

bta ah.

Waaddammada Shirkaa ka qaybgalay waxa ka mid ahayd Jamhuuriyadda cusub ee Jabuuti oo intii ka horreysey 27kii Juun gumeysiga Faransiska ku hoos jirtey, maantase ah dal xor ah oo madaxbannaan oo Afrika ka mid ah, lambarka 49aad ka gashay liiska dalalka U.M.A. Munaasabaddaas farxadda leh ee Jabuuti oo gob ah lagu soo dhowaynayey, waxay UMA u tahay miduu ku faanayo dalkaa

oo ka mid ah kuwii gumeysiga ururka la dagaallamayey uu haystey, ayaa xoroobey.

Go'aannadii Shirkaasu isku raacay waxa ka mid ahaa «Isbahaysiga waddaniga ee Simbaabwi» «Patriotic Front» oo loo aqoonsado dhaqdhqaqaqaaq gobannimadoonka keliya ee dalka Simbaabwe. Saddex guddi ayaa loo saaray dhexdhexaadinta Jaad iyo Liibiya; Suudaan Soomaaliya iyo Itoobiya. Dhinaca cunaqabataynta Koonfurta

Afrika iyo Rhodesiya waxa wu-fuuddu ay guddoonaadeen in ergo lix waddan ah loo diro dalalka saliidda soo saara oo laga dhaadhiciyo in a y joojiyaan saliiddooda u socota labadaa talis. Wuxuu kaloo la meelmariyey hindise ay soo jee-disey Nayjeeriya oo ahaa in la asaaso guddi 7 dal ka kooban oo eegta khilaafka dalalka Afrikanka ah markay ay isqabtaan Guddidaas oo beddli doonta gudidii dhedhexaadinta ee U. M.A. ee tamargabtay, waxay ka koobnaan doontaa Gaaboon, Tuunisiya, Nayjeeriya, Zaambiya Toogo, iyo Malgaasi.

Hase yeeshee UMA, oo loo asaasay wanaagga iyo horumarka Afrika waxaa weli hortaalla hawlo weyn oo ah xoraynta Afrikada Koonfureed oo ah goobta uu weli gumaysigu kaga hadhay Qaaradda Afrika. Waxaa kaloo jirta in Afrika hawlaho sugayaa aanay ku koobnayn

Xoreynta waaxyaheda weli la gumaysanaayo; waxa arrin laga uurruttaalooda ah in dalalka xorocbey ee Afrika intooda badani ay la, yihiin arrimilhii xornimadaa dhawri lahaa xagga Siyaasadda iyo xagga dhaqaalaha-ba. Madaxbannaanida dhaqaale ee Afrika waxa lugta jii-dey tabaha siyaasadda gumeysi-ga cusub iyo Imberyaliyadda. Afrika oo ah hoyga dalalka soo koraya aad ayay u dambaysaa marka la eego horumarka wershadaha.

Hase yeeshee, inkastoo mud-do fara badan, Afrika khayraadeedaa la fuuqsanayey, waxay Qaarraddu awood u leedahay inay iskeed isugu taagto haddii barwaaqadeeda xaddiga badan iyo ciiddeeda dihin sida ku habboon looga faa'iidaysto oo la shafeecsado si horumar loo gaa-dho.

Arrin kale oo ilaa imminka Afrika gaar ahaan u fadhiisi-

say Asiya iyo Laatiin Ameeri-kana guud ahaan u saamaysay, waxaa weeye nidaam laga tegay ee dhaqaale ee Imberyaliyadda ka soo jeeda, kasoo faa'iidada alaalka iyo badeecadaha maaashkooda ku shuba wad-dammada Yurub iyo Maraykan-ka iyadoo loogu soo gabbanayo hannaan ganaesi, sida darteed-na UMA oo matila una hadla Afrika waxa xil ka saaran yahay siduu u xoojin lahaa mid-nimada dhaqaale iyo Siyaasadeed ee Afrika, dabadeedna u habayn lahaa tallaabooyin habboon oo lagaga hortegayo sida reer Galbeedku u dhaacayo dhaqaalaha adduunyada saddexaad.

Tan iyo intii la unkay 1963-kii UMA, waxa uu soc hooyey guulo muuqda iyo isbeddello si walba u saamaynaya aayaha iyo mustaqbalka Qaarradda — Shirweynaha 15aad ee UMA waxa Sannadka soo socda lagu qaban doonaa Xarunta Suudaan, ee Kharduum.

## DALALKA ADDUUNKA SADDEXAAD IYO XIRIIRKA DHAQAALEED EE CAALAMIGA AH

ee weli dhaca lagu hayo aanay ke-li-keli, gooni joognimo, gorgortan gaar ahaaneed, waxba ku soo hognayn. Isku duubnaan, iskaashi iyo wax wada qabad dhex mara dalalka soo koraya, dawladaha hantiwadaagga iyo horusocodka adduunka ayaa keeni kara isbeddel weyn oo ku dhaca qaabka xiriirka dhaqaalaha adduunka maanta u

yaal. Ifafaalabeedii maantaba waa inoo muuqdaa. Jaahawarerkha hays-ta dawladaha hantigocadka ah, dhaqaale baraarka joogtada ku noq-day, lacag jabka iyo sabbaynta haysta, mufalismada shirkada badan ku dhacaya, waxay calaamado u yihiin guulo ka soeda dalalka adduunka saddexaad, Siyaasadda nabad-jirka iyo xasilooni ku

wada noolaadka maanta adduunka jirta waa mid labada hab ee hantiwadaagga iyo hantigocadka dhex keenay tartan nabadeed, wad-eigaasna waxtar weyn ayuu u leeyahay halganka ay ku jiraan dalalka soo koraya ee higsanaya isbeddel dhaqan-dhaqaaleed oo no-lasha bulshadooda kor u soo qaa-da.



## ARAGTIDA CILMIGA

# XULASHADA, DIYAARINTA IYO KALA QAYBINTA HAWLKAREENNADA

YUUSUF SALEEEBAAN

Taariikhda dhaqdhaqaaqa tawriga ah ee caalamiga ah iyo waayo-aragnimada Beesha dawladaha hantiwadaagga ahi waxay muujinayaan noloshana ku xaqiijiyeen in guulaha iyo midhaha la gaadhaa ay si aada ugu xiran yihiin hoggaaminta iyo heerka garashada siyaasiga ah ee maamulayaasha iyo hawl Wadeennada. Waxaa dhacda iyadoo duruufa hawsha lagu fulinaayo ay isku mid tahay in natijada laga heela si aada u kala duwanaato, mararka qaarna ay isburiyaanba, arrintaas waxay si toos ah ugu lug leedahay taabanaysaana aqoonta dadka loo xilsaaray fulinta hawsha, qalabka iyo qaabka ay isticmaalayaan.

Dabaqad waliba marka ay la wareegto xukunka, waxay iska soo dhix bixiyaan saaraanna dadka ugu garaadka bisil ee xeesha iyo garashada qotada dheer u leh ifafaalaha kala duwan ee nolosha, taasi oo awood u siisay in ay abaa-bulaan hawlahaa saameeya horumarinta iyo barwaaqaynta dabaqaddoodaasi ay meselaayaan.

Hoggaanka siyaasiga ahi wuxuu karti iyo awood u leeyahay noloshana ku suurto geliyaa hawlahaa horumarinta marka aqoon uu u leeyahay qawaaniinta horukaca bulshada. Waxaa guulo laga soo hucyaa markii si run ah loo hirgeliyo qawaaniintaas iyadoo la tixgelinayo danaha dadka horusocodka ah.

Hoggaanka siyaasiga ahi wuxuu itaal darreeyaa kashifmaan na marka uu ka jeesto fulinta iyo xaqiijinta danaha xoogsatada, isagoo daryee-laaya danihiisa gaarka ah ee lidka ku ah horukaca bulshada iyo dabaqaddaha danyarta.

Marka lagu jiro xilliga u halganka curashada kacaanka hantiwadaagga ah, waxaa marxaladdaas soo shaac baxa, waayo-aragnimo iyo aqoonna kasbada kacaanyahan-nada, naftoodahurayaasha ah ee u dagaallamaan taabbagelinta himilooyinka xoogsatada. Duruuftaas iyo dhibaatooyinkaas fara badan, adagna ee ay soo maraan dadka halganka ku jiraa baa bislaysa, barbaaris, korna u qaadda garaadkooda iyo kasmaddooda siyaasiga ee hoggaaminta.

Aaraa, iyo fikrado taa ka duwan waxaa qaba axsaabta buruwaasiyadda yaryar. Axsaabtaasi waxay qabaan in kacaanka hantiwadaaggu suurta geli karo oo qudha marka la gaaro waxyaalaha soo socda:

a) Markay korodho tirada shaqaaluhu oo ay koobaan dadweynaha intiisa badan.

b) Markay korodho tacliinta shaqaaluhu, yeeshaanna dad madax ah oo leh aqoon sare, awoodna u yeelan kara hoggaaminta dadka

Burjuwaasiyadda yaryar, danays-tayaasha iyo obortunistayaashu wa-

xay faafinayaan inaan xoogsatadu awood u lahayn inay xukunka hanato, xejisato, haddii tirada shaqaaluhu yar tahay. Sidaas daraadeed waxaa loo baahan yahay in la abuuro shaqaale fara badan markaana ka djib la tiigsado kacaanka hantiwadaagga ah.

Waa run in aan shaqaaluhu lahayn mana yeelan karo tiro dad carbisan oo ku filan hoggaaminta, abaabulidda, maamulka, dhaqaalaha iyo siyaasadda ka hor intaan xoogsatadu la wareegin xukunka, sababtuna waxay salka ku haysaa iyadoo hantigoosadka, dhulgoosadku iyo isticmaarku, dadka ku haayaan dhibaatooyinka ay ka mid yihiin Jahliga, gaajada iyo Cudurku.

Waxyaalaha kor ku xusan ma aha, sida danaystayaashu u sheegaan, dhibaatooyin is-hor-taagi kara curashada kacaanka hantiwadaagga ah, Kacaanku isaga ayaa suurta geliya diyaarinta hawlka-reennada ka yimid dabaqadda shaqaalaha iyo danyarta. Waayo-aragnimada beesha dawladaha hantiwadaaggu waxay caddeynaysa in arrinta ugu weyn ee kacaanka hantiwadaagga ahi siyo fiiro gaar ah ay tahay abuuridda iyo barbaarin-ta hawl wadayaasha qaranka iyo diifaaca dalka.

Sidaas awgeed waxaa si joogto ah la isugu dayaa in kor loo qaado heerka tacliinta ee kaadirka. Had-

daba intaan la helin kaadir dalka dhinac walba ka haqab tira, waxaa lagama maarmaan noqday in laga faa'iideysto xeeldheerayaashii hantigoodsadka iyadoo mar kasta xisbigu, ururraada bulshadu iyo dadweynuhu ay kormeerayaan sida ay u fuliyan hawlahaa, isla markaa waa in la garab wadaa in dalka laga abuuro dugsiyo heerar kala duwan gaarsiisan oo lagu tababaro diyaariyana hawlcareennada ay tahay inay hoggaamiyaan nolosha dalka iyo Ummaddaba. Dalka waa in lagu baahiyaa fikradaha qabanqaabiinta aqoon-isweydaarsiyada, dalalka hantiwadaagguna waxay hirgeeliyan kacaanka hiddaha iyo dhqanka, iyo ololayaasha lagu ciribtrraayo aqoon darrida.

Qawaaniinta guud ee saldhigga uu ah xulashada kaadirka waa kuwa soo socda:

- 1) Hoggaamiyaasha iyo hawlcareennada xisbigu waa inay yeeshaan garasho siyaasi ah oo sare.
- 2) Waa in la tixgeliyaa aqonta ay u leeyihii mabda'a hantiwadaagga cilmiga.
- 3) Siday heegan ugu yihii daryeelidda xoogsatada;
- 4) Siday u urursan yihii iyo heerkooda tacliinta;
5. Siday xiriir ula leeyihii dadweynaha;
6. Sida ay uga qayb qaataan hawlahaa ka socda dalka ee waxtarka u leh nolosha bulshada;
7. Waddaninimadocda iyo caalamimadocda.

Waxaa intaa raaca oo ay tahay in la tixgeliyo moraalka qofka noqonaya hawlcareen xisbi iyo hawladeen. Ruuxa lagu aamm inaayo ummadda, aayaha iyo hanti da waa in uu yahay qof caddaaladda

yo daacadnimada jecel lana d a g a a l l a m a musuqmaasuqa, eexda iyo qabiilkha. Garashada siyaa siga iyo mooraalka hantiwadaaggwu waxayy lid ku yihii is tustuska, mabda'a la'aanta, xukun jacaylka iyo hatigocsadka, marka sifooyinka iyo s h r u u d a h a a kor ku yaalla laga helo kaadirka ayaa la cirib tiri karaa dhibaatooyinkii laga dhexlay hababkii iskudulnooclaashada iyo gumeyisiga.

Waa inaan teello loo dhigan ee wax laga qabtaa shaqadana laga eryaa hawlcareennada ku soo gabbada xubinnimada Xisbiga iyagoo ku shaqaynaaya siyaasadda isla weynanta ee waxyeelaysa hakisana hirgelinta mabaadii,da hantiwadaagga.

Waddamada hantiwadaagga oo qudhii ma tixgeliyaa shuruudha lagu xulo hawlcareennada ee waxaa kaloo ku dhaqma fiira gaarana siyya dalalka oo koraaya ee horusocodka ah doortayna mabda'a hantiwadaagga ee cilmiga ku dhisan.

Kacaanku marnaba uma naxariisanaayo dadka hortaagan horumarinta dalka hadday xataa yihii kuwo leh tacliin sare, karti iyo aqoon gaar ah.

Marka hawladeennada doocra-shaocoda lagu jiro waa in la tixgeliyo garashada siyaasiga, mooraalka iyo aqoonta gaarka ah ee uu u leeyahay shaqada uu maamuli doono. (Haddii shaqadaasi tahay mid ku xiran farsamada amase cilmigaba)

V.I.Lenin wuxuu qoray «Si maamulku guulo u soo hooyo waa in maamuluhu aqoon qoto dheer u leeyahay xaaladda wax soo saarida, qalabka wax soo saaridda, isla markaasna yeeshaa tacliin cilmiyed ee kufilan».

Hawladeennada Xisbiga iyo qaranku waa inay leeyihii sifooyinka:-

A) Awocdda isku dubbaridka hawlahaa,

B) Ka leexleexasha la'aanta yoolka,

C) Dareenka wanaajinta hawlahaa,

D) Dareenka waxa cusub, dhammaystirka hawlihii la bilaabay iyo fulinta hawlahaa.

F) In ay isku xiraan laftigoodu sharuudaha adag ee ay ka rabaaan dadka la shaqeeya.

Haddii aan sifooyinkaa la helin guulo lama soo hoyn karo.

Hadal uu jeediyey Xoghayaha Guud ee XHKS 1dii Nofembar 1969kii Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre, waxaa ku jiray kacaanka Oktoobar intii ka horraysay jagooyinka dawladda si qabiilnimo iyo qaraabakiilnimo salka ku haysa ayaa dadka loogu soo magacaabi jirey.

Maamul kasta waa inuusan ku ekaan oo keli ah isku - dubbaridka hawlahaa ee waa inuu ka qayb qataa barbaarinta dadka iyo fulinta hawlahaa, taasoo keenta horumarinta wax soo saaridda iyo kobicinta dadaalka dadka.

Shuruudo adag ayaa looga baahan yahay inay yeeshaan hawlcareennada. Hay'adaha horsedka ee xisbigu waa inay ku caan noqdaan mabda'a iyo fikrad adag, aqoon ballaaranna ay u leeyihii hantiwadaagga, hawlahaa ay fulinayaan iyo abaabulidda arrimaha dadweynaha.

Mabda'a ugu muhiimsan ee lagu barbaariyo hawladeennada waa

abaabulidda, wada shaqaynta maamulayaashii hore iyo kuwa cusub, si ay isu buuxiyaan waayo-aragnimadii hore iyo xammaasadda, himmadda iyo xoogga kuwa dambe.

Waxaa hubaal ah oo aan marna shaki gelayn in kaadirkii muddada badan soc halgamaayey ay leeyihin waa-aragnimo weyn, adadayga-hawleed oo ay ku helaan shaqada. Haddaba haddii maamulayaashaa-si gaaraan da'da shaqo ka fadhiisadka, taasoo ay u hayaan niyad inay shaqada sii wadaan, looma bazhna in lagu beddelo dad shaqada ku cusub. Maamulayaashaas waxaa loo beddelaa tallaabo tallaabo. Inkastoo dadka dhallinta yari ayan lahayn sifooyinka kor qoran, hase yeeshi waxay qabaan sifooyin u gaar ah oo ay ka mid yihii aaminsanaanta ay aaminsan yihii in mustaqbalka ay iyagu iska leeyihin, niyadda xamaaska ay u hayaan in arrimo cusub la qorsheeyo, koritaanka joogtada ah ee aqoontooda, waayo- aranimadooda oo si dhaqso ah u korta. Sidaas daraadeed ayaa xisbigu marna aanu uga hak-hakan magacaabidda maamulayaal dhallinyar oo tamarta iyo xoogga dhallinyarada iyo waayo-aragnimadii dadkii hore looga wada faa'iideysto.

Marka la magacaabayo maamule cusub waa in la tixgeliyaa arrimaha hoos ku xusan:-

Ma u leeyahay waayo-aragnimo hawsha; ma leeyahay aqoon siyaasadeed; ma leeyahay aqoon ku saabsan qalabka wax soo saaridda gaar ahaan shaqada loo dhibidoono ; iyo ma leeyahay mabda'adag.

K. MAARKIS iyo ENJELIS waay marar badan caddeeyeem haddii dhaqdhaqaqa tawriga ah ee

xoogsatada ay ka qayb qaataan dad meeselaaya dabaqado kale, waxaa ugu horreyntaba looga baahan yahay inay fahmaan, gartaan aaminaanna iyagoc aan wax shuruuda ah ku xiri aragtida broletaariyadka, si ayan ula dhex iman xoogsatada waxyalihii laga dhaxlay hanti-goosad'ka iyo burjuwaasiyadda yar-yar. Haddii aan taa la helin dhaqdhaqaqa tawriga ah iyo axsaab-tooda cusubi waxaa soo gaadhaaya dhibaatooyin waxyeelleeya hal-gankooda iyo ujeeddooyinkooda.

Marka dhaqdhaqaqa tawriga ah laga gaadho horukac iyo guulo la taaban karo, oo uu noqdo xaqiyo qof waliba u jeedo, aya waxa dhaca in dad badan oo aan aaminsanayn mabda'a hantiwadaagga cilmiga, aan la hayn waayo-aragnimada hal-ganka dabaqiga ah kana maqan taly adkaysiga loo adkeysto dhibaatooyinka, se ku soo gabbada, cus-kadana aqoontooda, baa waxay isku dayaan inay maroorsadaan jagooyinka hoggaaminta ee xisbiga iyo kacaanka.

Jagooyinka waaweyn ee saameeyaa la shaqaynta hawlkaanenda waa inay waafaqsanaadaan waaji-baadka xagga dhaqaalaha iyo siyaasaddaba.

Hay'ad kasta oo wax hoggaamisaa, iyadoo la tixgolinaayo, cuskana-yaanna duruufta la taaban karo ee taalla, waa inay awooddeeda iyo kartideeda oo dhan isugu geysaa mee-laha halboowlaha ah ee waxtar tayo iyo tiraba u yeelan kara horukaca dalka, isla markaana xooji-naaya hawladeenadaas. Sidaas daraadeed waxa loo baahan yahay in fiiro gaar ah la siiyo miyuusha iyo kartida kaadarka, si marka la kala qaybiyo ee hawshooda ay billaabaan u dhaliyaan faa'iidooyin iyo midho fara badan.

Axsaabta nooca cusubi waxay

qiiim iyo ahmiyad weyn siyyaan u magacaabidda haweenka jagoo-yin sare. Hantiwadaaggu wuxuu bee-gan u yahay hirgelinta sinaanta ragga iyo dumarka wuxuuna abuu-raa duruustii ay ku muujin lahaa-yeen awoodooda iyo kartidooda, si ay uga qayb qaataan dhammaan hawlahaa saameeyaa bani-aadamka.

Ahmiyad gaar ah waxaa la siyyaa arrinta ah u magacaabidda jagoo-yinka waaweyn wakiillada dabaqadda shaqaalaha ee ugu firfiree-on, diyaarsan, una qalma ka qayb qaa-dashada hoggaaminta dalka. V.I. LENIN wuxuu ku muuxnuuxsaday in hibada iyo kartida abaabulidda laga dhix helo dabaqadda shaqaalaha ee astaanta u hel nolol-hawleed-ka ee u sahlaysa inay shaqada u qaabtaan si wada jir ah.

Kaalinta hoggaaminta ee hawl-wadeennada abaabulayaasha ah ee ka soo dhix baxa dadweynaha, shaqaalaha iyo xoogsatada beeralayda ah waa mid lagma maarmaan ah oo laaanteed aan la soo hoynayn libaha iyo guulaha la tiigsanaayo.

Ururrada xisbiga iyo hay'adahooda hoggaaminta oo qudha aya si toos ah go'aanno uga gaadhi kara arrimaha ku saabsan dooroshada, magacaabidda iyo shaqa ka joojinta hawladeenada xisbiga. Hase yeeshi, wixii ku saabsan magacaabjidda, doorashada iyo shaqa ka fadhiisinta madaxda dawladda iyo ururrada ijtimaa-ciga ah, xisbigu wuxuu ku leeyahay ta'sir iyo talo asagoo isticmaalaaya sumcaddiisa siyaasiga, moraalka iyo qalabka wax ka dhaadhicinta iyo ka qancinta. Marka xisbigu dhallilaayo haggaamiyayaasha qaar, marnaba ma dhaedo inuu ka dhiibto amar lagu bed-delaayo dadkaasi ee wuxuu bandhigaa warbixinno sugar, talooyin noqda tusaalcooyin iyo tilmaamo

waafaqsan baahida loo qabo bedde-lka iyo magacaabidda dad cusub oo si habsami ah uga soo bixi kara hawlaho xisbiga iyo dawlaadu ay ka xilsaareen horumarka dalka.

Waxaa dabijici ah in dadka dalalka hantiwadaagga ay u dhijibaan kana xilsaaraan wakiillada u fiican, u firfireonna xisbiga, wuujibaadka halboowlaha ah iyo boosaska waa-weyn ee dalka. Xubnaha xisbigu waa dad(muujiyey).

A)- Naftooda u huray dhismaha hantiwadaagga;

B)- Kartidooda iyo itaalkooda oo ay ku dheehan yihii aaminnimo iyo daacadnimo wax ugu qabanaaya xoogsatada.

Brobagaaandaha hantigocsadku ku hadaaqo ee ah in xubnaha Xisbigu helaan f'iidooyin gaar ah, waxaa la odhan karaa faa'iiddada qudha ee xubnuhu helaan waxay tahay inay xil iyo mas,uuliyad gaar ah wax walba iska saaraan, heeganna u yihii qabashada iyo fulinta hawlaho u dhibta badan.

Magac iyo sumcadha xubnaha xisbiga iyo ixtiraamka qotada dheer ee xoogsatada u hayaan waxaa sal-dhib u ah dagaalka is-dabajoogga ah ee ay ugu jiraan danaha xocgsatada iyo dadweynaha.

Isla mar ahaanta, taasi macna-heedu ma aha, in irriduhu ka xiran yihii dadka aan ku jirin xisbiga, inay dalka ka qabtaan jagoc-yin waaweyn maadaama ay u hoggaansan yihii danta hantiwadaagga, fulinaayaanna waajibaadka xisbigu hordhigay.

Qaababka iyo matadyda qaar ee lagu derso hawlkaareennada:

a)- In si tixadernimo ku jirto

loo derso dadku mentayda tilmaanta ead ka bixinaaya kaadirka;

b)- In fadhi iyo kular gaar lala yeesho;

c)- In la haadho, sharkana war-bixinaha ay ka soo qoraan dadka meel kala shaqeeya ee aqoonqa u leh.

Qaababka ugu fiican, uguna raagsiyya badan ee lagu kormeero hawlkaareennada waa fadhiyada xisbiga, ururrada shaqaalaha, dhallinyarada, ee xubnaha xisbiga iyo xoogsatada ay ku dhaliilayaan hawlkaareennada qaar.

Warbixinta qoran ee ay si wada jira u soo diraan xubnaha hay'addu waa dokumenti muhijim ah oo rasmi ah.

Sida kale ee kaadirka lagu barto waxay tahay iyadoo guddi loo xilsaaree oo baarta garaadkooda siyaasiga, niyaddooda iyo hawlkar-nimadooda. Taasoo keenta in mid walba meeshu guul ka soo hoyn karo lagu hagaajiyo.

Kormeerridda iyo dersinta joogta ah ee la darsaayo hawl Wadeenna-da waxay leedahay qimo weyn oo sahlaaya in la abuuro kayd hawlkaareennno ah. Kaydku waa hawldeennno lagu tixgeliyo tayo-hawleedka iyo siyaasadeedka ay muujiyaan, looguna talo galo inay buuxiyaan qabtaanna meelaha hoggaaminta. Dadkaasi waxay u baahan yihii ku-xigeennada hoggaamiyayaasha, kaadirka firfir-coon ee ururrada ijtimaciga ah iyo halyeyada wax soo saaridda.

In looga digtoonaado, cararona talo goosashada salka ku haya sababaha shahsiga ah (subjectivism) iyo kala qaybinta kaadirka ee aan la garowsanayn, aksaabta noo-ca cusubi waxay leeyihii Magac-

dhebidda (Nominakulturada-hay'adaha xisbiga), taasi oo isugu biyo shubanaysa tiro go'an oo hawlwa-deenno ah oo la magacaabo amaba shaqada laga fadhiisiyo. Boosaska iyo jagooyinka lagu qoraayo magac-dhebidda waxaa goosta hadba guddiga arrintaasu saameeyso. Inta badanna waxay ka kooban tahay hoggaamiyayaasha xisbiga dawlaadu, shaqaalaha iyo hay'adaha, cil-miga, tacliinta. Sidaas si la mid ah baa qaybaha dawlaadu, ururrada shaqaalaha iyo maamulku ay u lee-yihii magac-dhebidda.

Unugyadu maadaama ay yihii asaaska xisbiga, waxaa shardi u noqotay in magacaabid iyo isbeddel kastaa ay ku lug lahaadaan oo ka yimaadaan iyaga. Haddii ay dhaedo in qof madax ahi fulin waayo shuruudaha xisbiga, unugyadu waxay xaq u leeyihii inay ruuxaa-si u tilmaamaan, sheegaanna kha-ladyadiisa.

Waxaa marag ma doonta ah inaan dadku ku dhalan madaxni-mada, ee ay tahay waxa lagu kasban karo hawaha iyo waqtiga. Qorshaynta hantiwadaaggu waa inayan ku koobnaan oo keli ah xallinta arrimaha taagan ee waa inay ka saadaalisaa, kana sii fiirsataa arri-maha iyo dhibaatooyinka iman ama dhalan kara xilliga foodda ku soo haya. Sidaas daraadeed diyaarinta barbaarinta iyo kobeinta kaadirka hoggaaminta waa in lagu jaangoo-yo barnaamij soconaaya waqtidheer.

Waa maxay qaybaha iyo qodoba-da uu ka kooban yahay barnaamij-kaasu?

— Falaanqeynta xaaladda saameysa dhinaca diyaarinta hawlkaareennada hoggaaminta iyo u kala qaybintooda meelaha halbow-laha ah.

— Xaddidaadda iyo goynta waxyaala ha ay baran doonaan xagga siyaasadda iyo xirfadda (farsamada), tallaabooyinka laga qaadayo, si si habsami ah loogu diyaariyo kaadirka hoggaaminta ee cusub, si kor loogu qaado aqoontooda, si loo hubiyo tayo-siyaasadeed iyo hawlcedkooda iyo si loogu diyaariyo inay qabtaan boosaska hoggaaminta.

— Xaddidaadda iyo goynta: (a) Waxyaala ha looga baahan yahay kaadirka leh tacliin jaamacadeed iyo mid sare oo farsameed.

(b) Heerka aqoonta, tayo kartiyeed iyo hawleedka ee uu wax ku fulin karo kaadirku marka la siyo waajibka saameeyaa horukaca.

— In dadka loo diro Jaamacadaha iyo dugsiyada farsamada ee sare isla markaana si qumman oo waafaqsan baahida dadkaasi loo kala qaybiyo.

— Tallaabooyin laga qaado sidii kor loogu sii qaadi lahaa heerka aqoonta hawladeennada haysta tacliin Jaamacadeed iyo dugsi farsameed sare.

— Tallaabooyin in laga qaado sidii haweenka looga dhix diyaarin lahaa hawlcareenno.

— In la xaddido inta hawlcareen ee loo baahan yahay muddada foodda inagu soo haya.

Barnaamijka noocaas ahi wuxuu natijjooyin qiiima leh yeclan karaa

haddii si joogta ah, xilliga fulinta hawlah, loogu horumariyo iyadoo la waafajinaayo shuruudaha siyaasadda, dhaqaalaha iyo hiddaha iyo dhaqanka ee nolosha. Sidaas daradeed nuxurka iyo qaababka diyaarinta iyo barbaarinta kaadirka waa inay la heer noqdaan waajibaadka cusub iyo shuruudaha la xiriira.

Tusaale, dalalka soo koraaya dhibaatooyinka hortaagan waxa ka mid ah diyaarinta iyo barbaarinta kaadirka. Sidaas darteed, laga bilaabo dhalashadii Kacaanka 21 Oktoobar, Madaxda dalku iyo dadweynuhuba oo uu hormood u yahay Jaalle Maxamed Siyaad waxay bilaabeen in olole lagu qaado diyaarinta kaadirka waddanka. Sidii ololahaas miro looga dhalin lahaa waxaa waddanka lagu baahiyey tababarro hannuunin ah, waxaa la abaabulay aqoon isweydaarsi iyo casharro ku lug leh aydoloyiyada. Raadiyaha iyo Wargeysyada si isdabajoog ah ayay u f.diyaan aqoonta iyo waayo-aragnimada hantiwadaagga. Waxaa had iyo jeer la mieneeyaa, sharxaana taariikhda iyo mabaadi'ida hantiwadaagga.

Waxaa khasab ah in la asaaso tababarro ay tahay — iray soo maraan dhammaan shaqaalaha dawlaadu. Tababarradaas waxaa laga ga doodaa lana falanqeeyaa arrimaha la xiriira wax soo saaridda iyo hawlah dawlaadu. Xisbigu wuxuu aamminsan yahay in indheer garatadu ka qaadaan karto kaalin weyn horumarinta waddanka xag-

ga isbeddelka bulshada iyo dhaqaalaha, kor u qaadidda garaadka siyaasiga ee xoogsatada. Arrintaas waxaa tusale u ah shirkii aqoon-yahannada Soomaaliyeed uu uga furay Guriga Ummadda Xoghaaya-ha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Jaalle Maxamed Siyaad Barre 16.12.75 ilaa 3.1.76. Shirkaasi aqoonyahannada Soomaaliyeed xagga dhaqaalaha, Injineeriyyadda, takhtarnimada waxay soo saareen talooyin ay kaga dhiibanayaan sidii lagu hirgelin lahaa go'aannadii shirweyinhii 1aad ee ka dhacay Guriga Ummadda 4.11.75-5.12.76.

Qawaaniintii LENIN ee ku saabsanaa diyaarinta, barbaarinta iyo kala qaybinta kaadirka waxaa dhaqan geliya oo qudha waddamada mabda'ka dhigntay hantiwadaaga cilmiga.

— Barbaarinta iyo barashada xeedheerayaalka u bislaaday siyaasadda, lehna mabaadi'ida ay ku hirgeliyaan dhismaha hantiwadaagga.

Qiimeynta maamulayaasha, siinta maamulayaashaas xaalad ay waa jibaadkooda ku fuliyaan, ku hagaa jinta meelo ay guulo ka keeni karaan, adkaynta disibliinka maamulayaasha.

— Ku magacaabidda jagooyinka sare dadka leh bisayl siyaasadeed, lana arkaayo inay soo baxayaan, si waayeenimo ahna u hoggaamin kara dad, kana faa,iideysan kara cilmiga waqtiga lagu jiro iyo waayo-aragnimada jirta.



# MACNAHA EREYADA HIDDAHA IYO DHAQANKA MA LA SUGAY ?

Rashiid Sh. Cabdillaahi

Tan iyo maalintii afka Soomaaliga ah la qoray waxaa soo ifbaxay dhaqdhaqaaq nololeed oo cusub, kuna lug leh fikirka iyo aqoonta. Waxay ahayd hinqasho hor leh iyo gilgilasho u dhiganta cosob iyo naq gobaad iyo geed door ah ka baxa! intese dulin geed iyo qaraar ku dhafma! Haddii af-Soomaaligii la qoray noloshana lagu dhaqan geliyey-maamul, cilmi baarid iyo Waxbarashadaba waxaa taas barbar socda lana abuurmay dhibaatooyin tiro badan. La yaab ma leh oo dhalasho kasta oo cusub waxaa la xiriira hirdan ama legdan ka yimaadda cosobka duugga ka dhex siibanaaya, taasina waxay khasbaysaa in er-

Afka la qoray wuxuu ahaa Afbaaxaddiisa iyo heerkiisu ku siman yahay dhumucda noloshii raacatannimo; marka aynu taas isla qirnana way muuqataa koobnaanta Af-Soomaaligu, illayn baaxadda af kastaa aqoonta bulshadiisa ayey u dhigantaaye.

Mihimadda bulshada Soomaaliyeed hortaal kuma dhammaan afka oo far loo dejijo, ee hawsha weyn dhibta badanina ka sokaysaa waa in aqoonta, cilmiga iyo teknooloqiyada maanta adduunku ku dhaqmo af-Soomaali lagu shubo, taasina waxay khasbaysaa in er-

eyga loogu camal falo, iyo xitaa ereyo qalaad la Soomaaliyeeyo. Waxaase taas ka horreysa in marka hore la garto dulucda ifafaalee kasta oo loo erey bixinaayo, waxa uu yahay, xubnaha uu leeyahay, sida ay xubnahaasi isugu xiran yihiin iyo sida uu ugu taxmo ifafaaleeyasha kale ee dabeeecadda iyo nolosha bulshada. Haddii tubta erey-bixinta sidaas laga dhigto waxaa is oggolaanaya dulucda cilmiyeed ee fikradda iyo ereyga loo dejiyey. Haddii kalese waxaa dhacaya ereyda oo la isku af garan waayo iyo in cid waliba madaxaa bannaan ereyga ay doonto iyo macnaha ay rabto ugu adeegto. Sidaas ayey ku hirigli kartaa kumase soconeysyo qof iyo taladiis iyo «hebelow maxay ku la tahay.»

Lammaanaha labada erey Hidde iyo dhaqan ayaa u badan erey bixinaha aad mooddo inaan lagu heishiis ahayn dulucdooda, inta badanna aan laga wada hadlin ujeedaddada ay tilmaamayaan mawduuci ahaan.

Wargeyska Halgan, isaga oo arimahaas isha ku haya ayey la noqotay in uu dhinacyo ka mid ah macnaha looga jeedo «Hidde iyo dhaqan» dood geliyo. Annaga oo doodaas ku toosineynna majaraha baarista cilmi bulsheedka aannu

kor ku xusnay, ayaannu su'aalo tiryo yar oo ku saabsan dhinacyada hijddaha iyo dhaqanka (sida hadda loogu camal falo), dejiney, waxaannu la aadney niman dhallin ah oo u go'ay arrinta kor ku xusan, waanz Jaallayaasha ah Axmed Faa-rax (Idaa-jaa), Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye) iyo Siciid Saalax Axmed. Waxaa kale oo qormada markii hore noogu jirey Jaalje Yuusuf Xaaji Aden wayse noo suuro noqon weydey Caafimaadkiisa darteed. Raggaas waxaannu u doorannay Soomali aqoon iyo garashada majaraha cilmi baarista oo aannu bidney, waxayna, kolleyba, aniga ila tahay inay matalayaan dugsi Suugaaneed oo cusub, oo haddii aanu weli si dhamneysan u abuurmin, unug himmad weyn aan hayo. Waan hubaa, haddii ragga iyo dhallin kale oo ja mid ahi jidkaas sii wadaan oo aqoon kororsi iyo baaris joogta ah ku dhumiyaan dugsigan, inay taariikhda ku geli doonaan ugu yaraan, dhalashada cusub ee suugaanta Soomaaliyeed.

Sida laga arki karo, su'aalaha waxaanu u soo jeedinay si aragtida dugsigooda soo dibed bixinaysa. Waxay taabanayaan macnaha erey-bixinta Hidde iyo dhaqan iyo sida ay ugu dhigmaan cilmi ahaan waxaa (Culture) loo yaqaan, sida Hidde iyo Dhaqan ula xiriiro bulshada iyo taariikhda iyo Hiddaha

yo Dhaqanka Soomaaliyed — haddii ereybixintan sax loo qaato tilmaanteeda hore iyo haddaba.

Hadal yaanan ku daalinne Su'aalihii oo dhigan iyo ra'yigii nin walba ka dhiibtay, iyaga oon «S iyo J» nin kasta isu daba taxan ahayn oo ah Su'aalaha oo israacsan iyo Jaalle kasta araggiisa oo gooni u dhigani, waa kuwan:-

S.1aad: Waxaa jirta in erayga Afka Shisheeyaha lagu dhaho (CULTURE) Afka Carabigana lagu dha-ho (AL-THAQAF) aad mooddo in Af-Soomaaliga loogu tarjumo laba erey oo is-saaran (Hiddaha iyo Dhaqanka) ma u malaynaysaa inay la mid yihiin macnaha ereyga Culture ama Al-Thaqafa,

Maxay tahayse macnaha ereyga Hiddaha iyo Dhaqanka?

S.2aad: Waxaa kale oo jirta in macnaha Hiddaha iyo Dhaqanka cilmiga bulshadu ku tilmaamo mid taabanaya bulshada dhinacyadeeda aqoonta fikirka, diinta, fanka guud ahaan iyo akhlaaqdeeda, waxa kale oo ay taabataa waxyaabaha maadiga ah ee dadku abuuro uguna adeegsado danahiisa, kuwaasoo oo ka imanaya guud ahaan aqoonta, farshaxanimada iyo waayo aragnimada dadku nolosha ka kasbaday. Haddaba labada erey ee Hiddaha iyo Dhaqanka ma

tilmaamayaan dulucdaa. haddiise midkood tilmaamayo waa kee?

S.3aad: Waxaan ognahay in Hiddaha iyo Dhaqanku wax taariikhi ah yahay kuna xiran yahay socodka iyo isbeddelka bulshada asagoo heerka uu markasta joogaa yahay mid ku xiran, cabbirayana heerka bulshadu mareyo, haddaba Hiddaha iyo Dhaqanka Soomaaliyed heerkee bay kula tahay inuu hadda marayo marka loo qiyaaso adduunka horay u maray?

S.4aad: Maxay kula yihin astaa-maha u gaarka ah hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyed hore iyo haddaba?


## Jawaabtii Idaajaa

1. Kolka hore ereyga af-Ingiiriiska (CULTURE) lagu yiraahdo, afka Carabigana (AL-THAQAF) lagu yiraahdo ma aha erey u dhigma labada erey ee ah «Hidde iyo Dhaqan». Ereyga (CULTURE) macnihii hore ee uu afafka laatiinka ku lahaa waa (QODA-AL ama waa ABUUR), hase ahaatee gadaalkii wuxuu yeeshay macnaha hadda loo yaqaan ee uu caanka ku yahay, ahna (KASMO) ama (AQOON). Reergalbeedku markay leeyihii hebel waa (Cultured) waxay u jeedaan waa nin aqoon leh ama kasmuu leeyahay. Markay leeyihii hebel waa (CULTURIST) waxay u jeedaan waa njin u go'ay hawlahaa kasmada ama aqoonta. Sidaan qabo, Carabta ayaa tarjamaddii haboonayd la solansiiyey amaba isha ka riddey kolkay u heleen ereyga ah (AL-THAQAF) oo asal ahaan macnaha (Qodaal)

keenaya, sidaas awgeedna u dhow macnihii hore iyo kii dambe ee ereyga (CULTURE).

Sidaas daraaddeed, waxaan qabaa inay tahay tarjamada aan sax ahayn haddii ereyga (CULTURE) Af-Soomaalii ahaan loogu rogo «hidde iyo dhaqan», maxaa yeelay isuma dhigmaan, isku macnana ma xambaarsana.

Haddii aan u soo noqdo su'aasha qaybteda labaad oo ah macnaha ereyada hiddaha iyo dhaqanka waxaan u haystaa sidatan: Dhaqan iyo hidde waa laba erey oo aad isugu dhow, midka horena wuxuu tilmaamayaan tol ama ummad meel deggani habka nololeed ee ay xilli xilliyada ka mid ah ku dhaqanto iyo ilbaxnimadeeda ay gaar ahaanta u leedahay, kan labaadna wuxuu tilmaamayaan caadooyinka ay uni-



Hor iyo abbaato inta aanan ka jawaabin su'aalaha nala soo weydiiyey ee ku saabsan hiddaha iyo dhaqanka iyo arrimaha la xiriira waxaan jeclahay majalladdan «Hal gan» la baxday inaan ugu mahad naqo siday isaga xilsaarayso aqoon-bahinta iyo hab-wanaagga cilmi-baariista ay ku farsamaynayso. Dhaaxaan u baalhaadey majallad saldhig aqooneed leh, kana welwelaya arrimaha fekerkeenna saamaynta ku leh, maantaynuse helnoo aynu haynaa sida ay heestu u ti-raahdo:

maddaasi badanaa ku socoto ee aan dadkeedu ka leexleexan, una wada hoggaansamo.

Waxaad oran kartaa: Dhaqankeennu wuxuu muddo dheer ku soo dhisnaa «raacatannimo», hidduuhennana waxaa ka mid ahaa martisoor, geesinnimo, gobannimo-jacayl iyo wixii la mid ah. Hidduuh wuxuu ugu dhow yahay ereyga afafka laatiinka lagu yiraahdo (TRADITION), afka Carabigana lagu yiraahdo labada erey ee badanaa la israaciyo, ahna (Al-Caadaat Wal-Taqaaliid). Dhaqan iyo hidde aragtidayada, waxay soo hoos gelayaan ereyga wayn ee kasmada aan u aqaan, iyagana waxaa soo hoos gelaya suugaanta, foolkloorka, muusikada, farshaxannimada, iyo dhammaan hababka nolosha ee ay ummadi ku caanka tahay ama ay qayrkeed kaga duwan tahay.

Aragtidaydaas anigoo ka ambo-qaadaya waxaan ku talin lahaa inta goori goor tahay in laga soo noqdo tarjamaddaas qalad ahaanta ku hirgashay, ereyga (CULTURE) ahna loo qaato (Kasmo) ama (AQ-OON) oo agtayda mid qura ka ah, kocbayana Saynisyada, cilmiyada bulshada, hababka nolosha Ummadaha, dhaqanka iyo hiddaha dirkaba. Sidoo kale, waxaan ku talin lahaa Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare in dib loogu bixiyo Wasaaradda Kasmada iyo Tacliinta Sare.

2. Dhinaca kale labada ereyba way tilmaamayaan dulucda hiddaha iyo dhaqanka sida cilmiga bulshadu u qeexo, tilmaan keliyana ma ahee waa saldhigga ummadummaaha ka mid ah lagu garan karo ama lagu mala-awaali karo fal-celiskeeda (REACTION) kolkii ay arrin nololeed la soo gudboonaa-to.

3. Waa run aan muran geli kariin hiddaha iyo dhaqanku inay kol walba ku xiran yihin heerka ay markaas bulshadu marayso, mana aha wax horumar laga fili karo haddii aan horumarka bulshada isbeddel guud ahaaneed ku dhicin ama aan hababka nolosheedu isrogan. Kasmada ummaddu kolkay heer wacan gaarto ayay dhaqankeeda iyo hiddaheeduna heer wacan gaari karaan, inta ka horraysase lagama yaabo heerkooda «bilowga» ah inay ka gudbaan. Wuxaan isleeyahay waa su'aal in hadda la soo bandhigaa aysan habboonayn, maa yaelay, ka-jawaabiddeedu waxay niyad-jab ku ridi kartaa Soomaali badan oo ay qalad ahaan uga dhaadhaeday hiddaheenna iyo dhaqankeennu inay joogaan heer aan ku faani karno ama u dhigmi kara kuwa ay leeyihin ummada-ha horumarka gaarey. Habka fekerkeenna kolkaynu beddelno, kolkaynu isku dayno ilbaxnimada ummadaha kale inaynu wax ku qabsanno, kolkaynu isku dayno waxyaalihii maskaxdoocdu dhashay inaynu si garasho ku dheehan tahay nolosheenna u soo gelinno, isla markaasna dhaxalkeennii hore cilmiyantiisa ku dhaqaaqno ayaynu isku soo qaadi karnaa su'aasha ah «Hiddaheenna iyo dhaqankeennu heerkee bay hadda marayaan marka loo qiyaaso adduunka horay u maray»? Dhabitii, waynu lahaan jirney dhaxal maanso oo aad u faro badan, aadna nolosheenna tilmaan uga bixin kara, hase yeeshee hiddaha iyo dhaqanku gabay iyo geeraar keliya ma aha.

Dhaxal Masrax ma aynu lahaan jirin, mid aynu maanta ku faani karnana ma hayno; qoraallo taariikhda inoo galay ma jiraan; ilbaxnimada aadamaaha wax aan ku soo kordhinney garan maa-yo; dhaxal farshaxannimo maynu

lihin, mana aynu lahaan jirin. Waaas oo dhan ma aynu lahayn, maa yaelay sooma aynu marin duruuftii aynu ku dhalin lahayn iyo sababihii inoo suuragelin lahaa oo (deggenaantu) ugu weyn tahay. Ummaddaha lagu magacaabo kuwa soo koraya ayaynu kala mid na-hay dib-u-dhaca ka haysta dhinac-yada nolosha iyo fekarka intaba.

Si kolka dhaqankeenna iyo hidduheenna aynu heer wacan u gaarsiinno waxaa lama-huraan ah inaynu, hor iyo abbaato, nafteenna u qiranno kasmadeennu inay aad u hoosayso, dabadeedna, innagoo aan taas ku niyad jabin, isku dayno sidaynu fekarkeenna u qaadsiin lahayn waddooyinka aqoonta, xiriir kasmo oo dhowna ula yeelan lahayn ummadaha boqollaalka sano inaga horreeya, ee haddana dhax-galkoodu inoo sahlan lahay.

4. Dhammaadkiil dagaalkii labaad ee dunida iyo sanooyinkii afartameeyihii wixii ka horreeyey hiddaha iyo dhaqanka Soomaalidu waxay lahaayeen astaamo u gaar ah oo kol walba garab socdey habka nolosha ummada, kol walbana cabbinaayey waayaba maalin walba taagan iyo wixii bulshada dhex-deeda ka dhaca. Wuxuu ahaa hidde iyo dhaqan mikrafoon u ah nolosha bulshada oo kol walba tilmaan ka bixiya himilooyinkii soo koobnaa ee raacatada ama cabbira xiriirka tolnimo iyo khilaafka qabyaaladeed ee badanaa ka imaan jirey daaqa, biyaha iyo sharaf kudirka. Tusaale ahaan, hiddaha iyo dhaqanka, haddayru maansada iyo maahmaahda ka soo qaadanno, waxaa caddaanaya inay astaan qabyaaladeed ku wada dheehan tahay, garaadka waddanini-maduna uu ku yaraa, marka laga reebo labaatankii sano ee uu hal-gankii Daraawiishtu dalka ka al-

oosnaa. Ninka gabayaaga ahi tolkiis uun buu yiqiinnay, tolka wa-naaggiisa iyo magac dheeridiisa ayuu u dagaallami jirey, fekarkiisuna ma dhaafsiisnayn beesha uu ku abtirsado iyo degmada uu «Qareenka sharciga ah» isaga dhigay.

Maahmaahda lafteeda haddaynu u fiirsanno waxaan ka helaynaa boqollaal si caddaan ah u mut:jinya dhaqankeenni qabyaaladeed ee hore. Waxay ku maahmaahi jireen, «TOL WAA TOLANE», «Gurbaan garabkaaga ha kuugu jiro ama gacalkaa ha kuu hayo».

Hadda hiddihii iyo dhaqankii isbeddel ma ku dhacay? Haa mana aha mid maanta bilawdaye waa mid la kowsadey dhaqdhaqaqyadii gobannimo-doonka kolkii laga soo

bilaabo halgankii Daraawiishta, kii Xisbiyada, xilligii calan saarka iyo xilligaan Kaceaanka ah ee aynu ku jirno. Xilliyadaas midkood wiliba isbeddel buu ku sameeyey hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed, maxaa yeelay xiriirkii dadka ayaa isbeddel ku dhacay, magaalooyin baa la bartay, gumeysi aan awel hore la arki jirin ayaa la ar-kay, himilooyinkii soo koobnaan jirey ayaa ballaaratay, garaadkii wa ddannimada ayaa beddeley garaadkii qabyaaladda. Halkii uu qofku qabiil kaga abtirsan jirey wuxuu bilaabay inuu Soomaali kaga abtirsado. Waxaa dhalatay murtti iyo suugaan Soomaali-weyn loogu danaymaayo oo beddeshay tii guubaabada iyo xasaradda qabyaaladeed loogu shaqayn jirey.

Intaba waxaa ka daran oo hi-

ddihii iyo dhaqankii ku soo kor-dhay laamo aynaan horay u aqoon jirin oo masraxu ka mid yahay, muusikadu ka mid tahay, farsha-xannimaduna ka mid tahay. Isbeddelka kale ee sida garaadka ah maansada ugu dhacay wuxuu ahaa qar-aweynidii oo yaraatay iyo erayadii gabayga loogu istiemaali jirey oo noqday kuwo fudud, taasoo la socotey nolosha sahlan ee magaalooyinka iyo fikradaha cusub ee Yurub iyo dibedda dalka ka soo galay. Hadalkii oo kooban, habkiit nolosha raacatada kolkay wax yari iska beddeleenba waxaa isbeddelayey astaamihii hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed, maantana wuxuu marayaah heer aynu ku tilmaami karno mid barbar sooda nolosheenna maadiga ah ee dhab-

## Jawaabtii Gaarriye

isu dhaxajsiyo taas oo ereyga siin karta micna biyooloji ah. Hase yeeshoo bulshadu way leedahay wax Hidde la odhan karo mar hadii ay leedahay astaamo dhaxal ahaan facba fac ka qaato.

Dhinaca kale waa in aynu xusuus u lahaan naa in erey bixinta hadda aynu wadanno lana dhalatay qorista Af-Soomaaligu ay tahay mid u baahan fuddudayn iyo inaan xarko badan Jagu xirin; tusaa-le ahaan waxaa habboon inaan lagu daalin in micnaha ama fikradha erey cusub loo doonayo erey u dhigma Af-Soomaaliga hadda jira looga helo. Waxaa la yeeli karaa in erey Af-Soomaaligii hore macna kale ku jahaa hadda ereyixin cusub loo qaato. Taas waxaa tusaa-le u noqon karta: ereyga «Suu-gaan» macnihiisii hore iyo ka hadda la siiyey. Ereygu mar kasta waa meel dadku afkaarta mada-

xooda ku jirta ku shubaan wayna dhacdaa in ereyo macne ay hore u lahaan jireen ka guuraan mid kalena qaataan.

Arrimi meesha ay ka murug-taase waa sida ereybixinta loo dejiyo looma istiemaalo ereyada mac-naha cusub loo yeejey. Waxaynu aragnaa in laammaanka labada erey ee Hiódaha iyo Dhaqanka loogu camal falo dulucda (Culture) iyada oo haddana la kala macneeyo oo Hiddaha la yiraahdo waa gundhigga aan doorsoomin, hase yeeshoo «Culture» waxaa taagan oo aan marna doorsoomini kuma jiraan, sidaasi cilmi bay ku sugan tahay.

Haddii aynu hadda weli u baahan nahay in aynu «Culture» waxaa loo yaqaan erey u helno, amase labadan kala dooranno waxaan ku talin lahaa in ereyga dhaqan la

qaato; Hiddaahana loogu isticmaalo micnaha (Heritage ama Taradition) oo tilmaamaya qayb ka mid ah waxa loo yaqaan (Culture) ama dhaqanka, haddii la garto in la isku turjumo. Halkaas waxaan ka wadaa in aan ereyga Hidduhu la tartami karin ereyga Dhaqanka marka looga socdo macnaha ereyga (Culture).

Midda kale isbarbardhigga labada erey kolleyba aniga waa ila qalad, waxaana keeney iyada oon marka hore macnaha la rabo in ay xambaaraan iyo waxaa looga jeedo si cilmi ah oo xuduud go'an leh loo dersin.

Dhaqanka aadamigu weligiiba wuxuu ka jawaabayey halganka dadku ugu jiro in uu ka xarochu dabeeccadda marbana heer buu ka joogey halgankaas. Waxaynu oran karnaa wadarta dhaqanku waa isugeynita fikradaha, aqoonta, xirfadaa iwm. Wadartaasi dhammaanteed, hadba heerka ay marayaan baa taariikhda sal u ahayd waxayna ku xirneyd heerka wax soo saarka bulshadu joogo. Sidaas dar-

teed horumarka dhaqanka iyo korriinkii wuxuu la socday markasta heerka wax soo saarka Cilmiga, teknikada, iyo ikriraacyada maalin kasta koraya, oo ah gufeysyo lagu aaddiyo goldololooyinka wax soo saarka, waxay is la markaas sal u yihii horumar dhaqameed.

Haddii aynu halkaas uga soo daadegno heerka dhaqankeenu hadda joogo marka loo eego ka adduunka hore u maray waxaynu oran karnaa dhaqankeenu wuu dambeeyaa. Dhaqanku kama samaysmo waxyaabo kala fog-fog oon xiriir lahayn, nolosha dhinacyadeeda kalena ka go'an. Haddii aynu isla qirsan nahay in dhaqaalaheerku dambeeyo, cilmiga iyo teknoloojiyaduna inagu yar tahay, waxaynu garan karnaa in aynu ka dambeyno, dhaqan ahaan, aduunka dayaxa tegey, tirtirey aqoon laaan, dhaqaalahoodu heerka sare joogo ee maajin kasta malaayiinta buugagga, riwaayado joornaallo iyo filmada ah soo saara.

Haddii aan astaamaha dhaqanka Soomaaliyed u gaarka ah erey

ka iraahdo waxay iigu muuqataa in dhaqanka Soomaaliyed yahay mid ay ku dheehan yihii astaamo marxalado kala duwan. Waqt waxaa jirey in ay dhaqanka ku dhammeyd astaanta bulsho qabilleed, mar kale waxaa soo baxay astaan gobannimodoon iyo dareen qarameed iyada oon astaantii qabiinimo ka bi'in weli. Xataaka gobannimadoonka xagga qaabka dhismihiisa, wuxuu leeyahay sifiyoontii kii hore, Dhinac kale waxaa isbarbaryaal caadocyinkii hore iyo qaar sucub oo magaal-joggannimada la dhashay.

Haddii dhaqanku tijaabada dadka yahay afku wuxuu kaydiyaa tijaabadaas, baaxaddiisuna waxay le'egtahay inta awoodda wax soo saar ee dadka iyo aqoontoodu le'egtahay wuxuuna afku ballaartaa marka aqoonta dadku ballaarato. Dhaqanka Soomaaliyed ee maanta dhaxal awowgeen ah, waxaa astaamihisa ka mi ah in uu la siman yahay heerkii tijaabadii iyo aqoontii awawyaasheen; ka hadda iyo mustaqabbalka dhalan doonaase waa arrin kale.



Mahad gaar ah waxaa leh Halgan qeybleeda Hiddaha iyo Dhaqanka oo i soo biday inaan wax ka tari karo aqoolkooda wareysigan, taas oo aan u arko sed gaar ah oo naloo tebiyey.

## Jawaabtii Siciid Saalâx

Tooyashooyinkii dulucda weynaa tibaaxdoodii oo kooban waxan oran karaa:-

1. Anniga qof ahaan labada erey ee qalaad oo kala ah «CULTURE» iyo «AL THAQQAFA» Tarjumaddoda Af-Soomalinimo una haysto inay tahay: «HIDDAHA IYO DHAQANKA».

Labadan erey ee lamaanaha ah, waxay iigu muuqdaan in aanay tilmaamayn isku wax, Marba haddii xiriiriyaha «iyo» loo dhexaysiiyey

luqo ahaan waxa ka muuqtaa in labada erey ka mid yihii ereya badar oo Afka ku jira, isku mahiiba ah, maena ahaanna kala duwan sida, «Kas iyo Maan» «Dooc iyo Dareen»....

Haddaan qeexo labada erey, wayla durkayaan, inagoo aan ka tusaala qaadanba sida ballaaran oo aqoonyahannada cilmiga bulshada ama kuwa Cilmiga Nafsiqay ay u kale qalaan, dhadhanka macnaha ay aniga labadu ii sameeyaan ma aha mid qudha, ee waa laba mac-

ne oo isku xiran oo kala yar xee-  
ran.

Tafiirta ama isirka ereygan wuu  
xuu ii dhadhamayaa inuu ka yimid  
marka la leeyahay:

1. Daqan ...Duunyaa la dhaqaa,  
loo yeelaa hab nololeed jiritaan-  
kooda ku habboon, si looga faa'  
iidysto.

2. Dhaqmaatin.. waa waxtar iyo  
wanaag cidi u dhaqanto sida: Waa  
gabadh dhaqmaatin leh lala dhaq-  
mi karo oo marwa guri noqon kar-  
ta.

Dulucda weyni waxay isugu soo  
dhacaysaa dhaqan dadyow oo ah:  
Hab nololeed dad qabatimay, no-  
loshooda iyo wada noolaanshahoo-  
da suura geliya oo facba fac u te-  
biyo, aaddan degaankooda, halkaa-  
soo laga dheegi karo in uu yahay  
tastuur ay isbaraan, wadaagsadaan  
beel ama bulsho degaan ku wada  
nooli, kuna xiran fekerkooda, dab-  
ci, aqoon kara xeer xubnaha dad-  
kaa laga filo inay fuliyan.... ma-  
rarka qaarkoodna geli kara qaan-  
uunnada, dastuurka ama xeer qor-  
aallada dal u yaal, waana dhaqanka  
intisa gaarta heer dhaqan qaran,  
waayo waxa jiri kara dhaqan qoys,  
dhaqan guri, dhaqan beel ama mid  
gobol....

Isbeddelka nolosha iyo dhaxgal-  
ka aadamigu waxay jideeyeen:

— Dhaqan guur, dhaqan wareeg,  
dhaqan badhax, dhaqan geeddi iyo  
dhaqan quud iwm.

Oraaha suugaaneed oo marar  
aan ku soo qaadqaaday waxa ka  
ka mid ah:-

— Dhaqan waa dhadhamo dheef  
duluc lehiyo dheeha nololeed;

— Waa dhahaarashada beel dhex-  
taal loo dhammaadaaye,

— Waa dhuuni lagu kaydsadaa  
dhuuxa waayaha e..

Waxaa kale oo ka mid ah:

— Aadmigu gardaranaa  
Xeer aanay ku wayddiin  
oggolaanshihiisay  
in aad fuliso doonaan  
dantu kugu ijibbaartaa

— Canugaa lagu canqariyaa ilma-  
haa lagu habaa barbaarta lagu bar-  
baariyaa.

Hiddahu waa eray ii tusiyey  
dhadhan ah:

— Waxa dhaxal ahaan ummadi u  
leedahay laysu soo tebiyey oo gun  
dhig ahaanna kayd Ummadda u  
yaal ah sida :

Af-ciyaara hidde, caadooyin,  
sheekooyin cir aanays iwm. Sidaas  
ayaa dhaqanku ila yahay daliig ka  
soo tafiirmay dhaqanka hidda hore.

— Dhaqanku waa isbeddelaa, hid-  
duhuse waa joogto.

«Hiddaha waxaan ku tarjumi  
lahaa erayada «Tradition, Folklore  
ama Turath».

III. Sidaad u sheegteen ayaa dha-  
qanku u yahay ku cilmi bulsheed-  
ka tilmaamahaa u leh (Anigu eray-  
gii hidde marka waan ka reebayaa)  
inkastuu ku lammaan yahay gaarna  
u yaal. Midka tilmaantaa buuxin  
karaa waa ila dhaqan.

V. Dhaqan iyo Hidde. Waa-  
wax taariikhda aadamiga soo tax-  
naa. Aadmigaa ah xubinta kowaad-  
ka ee dhudaha dhaqanka, heerka  
bulshadu marayso inuu cabbiraana

waa hubaal. Marba haddii taa-  
riikhda aadmigu tahay sida uu ula  
soo halgamayey noloshiisa iyo aay-  
aha uu marba deegaankiisa kala  
soo kulmayey, heerka dhaqan aq-  
ooneeakiisa marba ugu adeegsana-  
yey, oo dhaqan maadiga ku mu-  
quuninayey, aragtidiisu markaa  
way ka gudbaysaa dhaqan mudu-  
gan, oo waxay u gudbaysaa isku  
dhafka «dhaqan — dhaqaale». Taas waxay leedahay laba daymo  
oo midiba si wax inoo tusayso, hor-  
ta se aadmiga salka awoodiisa waa  
maskaxda waa garaadka iyadaa  
garaadka xukuhta.

Labada daymood waxay kala yi-  
hiin inaynu taxa taariikhiga ah fii-  
rinno, hababkii dhaqaale ee aadmigu  
soo maray sida: Habkii bilow-  
gii, is-addoonsigii, habkii dhulgoosigii,  
habkii Hantigoosigii, habkii  
Hantiwadaaggii.

Mise waxaynu jalleecnaa, heerar-  
ka bulshooyinku maantu kala joo-  
gaan, sida xagga dhaqan dhaqaala-  
hooda degaanka ku xiran:

- 1) Heer ugadhsigii — dabasha  
da — qadhaabasho;
- 2) Raacato
- 3) Beeraley
- 4) Warshadaha
- 5) Muquunin degaan
- 6) Ganaci.

Labadaa midkii aynu egnaba,  
heerka Soomaali maraysa waa  
caddaan, haddii aynuse u dhadhan-  
ka aan dhaqan-dhaqaale ku dhaf-  
neyn . . . heerkee Soomaali ka ma-  
reysaa tibaaxdu waa kan iyadu ay  
joogto uguna sarreya kuwii ay soo  
martey . . . Ummad walba dhaqan-  
keeda ayaa iyada ugu sarreya . . .  
dhaqan qudhiiisuna waa dhalil  
raad la'aaneed.

Falanqayn :

# MASRAX SIYAASADEEDKA

Boobe

Waxaan daba joogaa maqaal tirisigii hore ee Halgan ku soo baxay, kuna suntanaa «Riwaayaddii Dhaqdhaqaaq», Jaalle Afrax si hufan ayuu falanqaytiisa ugu sugay riwaayadda, waanna wax loo baahan yahay inaynu ku dhaqanno si aynaan halkii uun u taagnaan ee aynu u doorsanno.

Marka ugu horraysaba ma i-chaahdeen masraxa hanuuniska ah ee waxaan door bidi lahaa masrax siy... sadeedka. Gefna ha igu ahaatee Afrax waxa laga yaabaa bactamaa uu masraxaa kacaanka kala fil dhigay, kuna koobay jiritaankii-sa maalmaha ciidaha, inuu ka fur-san waayey inuu magacaa siyo. Wuxaan qabaa in masraxani kacaanka in badan ka horreeyey. Intaa oo keli ah kuma ekee markay-nu masraxeenna labadiisa dhulood raaceno—Banaadiriga iyo Hereriga mid ayaaba soo ifbaxiisu ku qoto-may siyaasadda. Bal qabso oo markuu masraxu Hargaysa (Wa-qocyi) ka curanayey waxa sal iyo gunba u ahaa koox macallimiin ah oo si ay dadka u garansiyaan wax-tarka ay waxbarashadu leedahay riwaayaddo Af-Crabi ah ku dhac siin jiray. Waa alla u naxariisay-gii Yuusuf Ismaaciil Samatar (Gaandhi) iyo Yuusuf Xaaji Aadan oo maanta nool. Waxay-nu ka xusi karnaa riwaayadiihi ugu horreeyey mid la odhan jiray «Al-ABBUL-JAAHIL» ama «Ado-ogii aqoonta la'aa». Haddaan si gaaban u guud maro sheekadii ku dhafnayd riwaayaddaa waa laba

oday oo garasho aan ka sinnayn.

Labadii oday mid ayaa inankii-sii dugsiggii ka saaray, kii kalena waa u daayay. Kii dugsiga ku hadhay waxbarashadiisii ayuu sii watay, dibadda ayuu aaday, markuu dalka ku soo laabtay isagoo soo qalin jebiyey ayaa wiilkii aabbihii dugsiga yaraantiisii ka saaray «Booy» (Adege) ugu shaqeeeyey. Xilligaasi waa 1945kii. Waa Af-Crabi waxa sheekadu ay ku socotaa waana fikraddii Yuusuf Xaaji Aadan.

Bal daymo u yeesho, waagaa (waa 32 gu'ka hor) sida masraxa oo dhallaan ahaa loogu adeegan jiray, iyo meeqaanka maanta uu taagan yahay. Waan qirayaa in horumar dhacay jaad uu yahayba, hase yeeshee arrimaha masraxa maanta lagu falanqeeyaa qaar mac maaha.

Masrax siyaasadeedkii waxa loo rogey siduu, Afraxba sheegay taariikhda oo saacad lagu dul cararo. Seef la bood ayaanan noqonne raadraac ma jiro, oo hoobollada hal-abuurka ku caanbaxay haddayba coonaan inay masraxiyad ka diyaariyaan goob la soo maray ama marxalad taariikheed wax qoran oo sidaa uu u awran ma helayaan. Afka oo aan muddo dheer qornay ayaa dhibaatooyinkaa iyo qaar badan oo ka dhashay la yimid maantana weli taagan.

Mushkilad kale oo weli jirta wcligeedna ku lammaanayd masra-

xa guud ahaanba, gaar ahaanna masrax siyaasadeedku waxay tahay iyada oo aan cilmi loo lahayn masraxa. Jaalle Afrax ayaa maqaal hore ku soo qaaday taasoo ah isku-daadsanaanta hawl masraxeedka. Si masraxiyad loo sameeyo qasab ayaa laga dhigay inuu qofku gab-yaa noqdo. Tix intee lagu odhan karaa? Tiraabna masraxeenna jiraan uma joogo.

Dhibaato kale waxaan u arka-ya meheradaynta (Professional) masrax. Masraxeenna, gaar ahaan masrax siyaasadeedka waxa qurux, muq, dheef, iyo dhugmo wuxuu lahaaba ka qaaday markii mudan-aasho la siiyay hanti abuurka. Laamaha badan ee Masraxa mid keliya ayaa tamar iyo taagna la isugu geeyay dadkiina lagu sidkay. Jacayl ... Jacayl— Nabsina ka danbeeyo Waa kaa ka ay sawiri karayaan (Isagoo fool-xun runtana ka arradan). Maanta bulshadeen-nu wax aan jacayl ku lug lahayn maba daawan karto. Masrax siyaasadeedkii markaa, muxuu noqday? In hay'ad ama urur kharash bi-xiyo dabadeena dad lagu martiqado, isagoo weliba si aan buurnayn loo soo diyaariyey. Intee intuu jiray kacaanku ololayaal la qaaday? Wax maankayga raad ku reeba waxaan ka xasuuusnahay: Iftiinka Aqoonta oo O.H.R.M. lagu gunaanaday oo ahayd hal-abuurkii Siciid Saalax iyo Sheekh Bashiir, halabuurkii Axmed Saleebaan Bidde oo kooxda ONKOD kaga qaybagashay tartankii riwaayadaha ee «BANFAS 76».

# D H A M B A A L

## H A M B A L Y O

Waxaan halkan idiinku soo gudbineynaa dhambaal Hambalyo ah oo ay u soo direen Ururka Ardayda Soomaaliyed ee J.D. Bulgaariya Jaalle Maxamed Siyaad Barre Xoghayaha Guud ee XHKS. Dhambaal-ku wuxuu oranayaa:-

XOGHAYAHA GUUD EE X.H.K.S SOOMAALIYEED

MADAXWEYNAHA J.D.S. JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE

Haddaannahay Ururka Ardeyda Soomaaliyed ee wax ku barata Jamhuuriydda Dadka Bulgaariya waxaa farxad iyo sharaf noo ah inaan soo gudbino hambalyo aad u diirran oo ka soo go'day kasha iyo laabta adiga, Golaha Dhexe X.H.K.S. iyo Dhammaan Ummadda Soomaaliyed idinkoo u dabbaldegayaa Sannadguuradii 1aad ee ka soo wareegtay maalintii la'aasay X.H.K.S. iyo sannadguuradii 17aad ee qarannimada Ummadda Soomaaliyed, 1da Luuliyo 1960.

Jaalle Xoghaye waxaan ku kalsoonnahay dhismaha XHKS kaasoo ah horseedka Ummadda Soomaaliyed ee dhisaya nolosha cusub, waxaannu kugu garab taagannhay sida geesinnimada leh ee nafta ugu hureyso aayaha iyo daryeelka dadweynaha Soomaaliyed.

Sannadguuradii 1aad ee XHKS wuxuu ku beegmay markii Midowga Soofiyeeti iyo adduunyada horu-socodka ah looga dabbaaldegayo Sannadguuradii 60aad ee ka soo wareegtay kacaankii Oktoobar 1917kii markaas kacaankaas waxaa hormood u ahaa Jaalle V.I. Lenin, kaasoo dhisay daw-laddii hantiwadaagga ee ugu horreysay adduunyada.

Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyed wuxuu halgan ugu jiraa dhisidda nolosha cusub ee dhammaan bulshada Soomaaliyed. Waxaannu aaminsannahay MABA'DIIDA HANTIWADAAGGA CIL-MIGA islamarkaana u hoggaansannahay Barnaamijka iyo Xeerka X.H.K.S.

Jaalle Xoghaye, waxaannu aad iyo aad u taageereynaa siyaasadda cad ee ay ku socoto dawladda kacaanka ee Soomaaliyed xagga gudaha iyo dibaddaba. Waxaannu tageero buuxda siineynaa siyaasadda oo kacaanka ka muujiyey dalalka maqan, gaar ahaan intuu jiray kacaanku waxaa gobannimadooda helay walaalaheenna Xeebta Soomaaliyed oo Faransiisku gumeysan jiray oo maanta la baxday JAMHURIYADDA JABUUTI, taasoo uu ammaanteeda leeyahay kacaankii 21 Oktoobar oo adigu horseedka aad u ahayd, kaasoo u furay xaashi cusub taariikhda Ummadda Soomaaliyed.

Waxaanu hil iyo hooba la garab taaganahay dalalka iyo dadka Soomaaliyeed ee weli ku sii dambeeyaa gacanta shishheeyaha kuwaas oo ah:- NFD iyo Soomaalida Galbeed.

Waxaannu garab siineynaa siyaasadda cad ee dawladda Soomaaliyeed ee taageeraysa Dhaqdhaqaqyada Gobannimadoonka ah ee Afrika iyo Adduunyadaba, iyo sida walaaltinnimada ah ee ay isugu soo dhaweyso una habaysa dalalka Afrika.

Waxaannu taageeraynaa Barnaamijka iyo Xeerka Xisbiga HKS. Waxaannu diyaar u nahay in aannu daafacnno mabaadiida kacaanka. Waxaannu ballan qaadeynnaa in aannu noqonno danjirayaal buuxa ee kacaanka Soomaaliyeed.


Jaalle, Xoghaye waxaannu ballan qaadeynnaa inaan dalka si wanaagsan wax ugu soo baranno, diyaarna u ahaanno inaan u soo noqonno dhulkayaga oo aan wax ugu tarro islamarkaana qayb libaax ka qaadandoonno daryeelka ummaddeenna markaan soo noqonno iyo inta aan maqannahay.

Jaalle Xobhaye, waxaannu Eebbe kaaga rajeeeyeynnaa cimri iyo caafimaad, ummadda Soomaaliyeedna barwaaqo iyo baraare.

XOGHAYAHA GUUD EE URURKA ARDAYDA SOOMAALIE J. DADKA BULGAARIYA, SOOFIYA..

Jaalle Dr. Maxamuud Xuseen.

**GUDDIGA QORAALKA EE HALGAN WUXUU HAMBAL-YAYNAYAA SHIRKA ARDAYDA ADDUUNKA, ISAGOO U RAJAYNAYA INAY GOAAN DHAXAL GAL AH KA GAADHAAN SOO NOOLAYNTA DHAQANKA WADDA-NIGA AH.**



Waxaa laga soo guuriyey Wargeyska la yiraahdo "SECHABA" oo ah Codka Shirweynaha Waddaniga ah ee Koonfur Afrika (A.N.C.)



Munaasabadda Dabaaldeggaa maalmaha  
Madaxbannaanida iyo Midnimada waxaan  
xuseynaa Geesigii xurnimada Soomaaliyeed  
**Sayid Maxamed Cabulle Xasan.**